MAAN
Institute for Diplomacy and Global Affairs

# Nabada iyo Xasiloonida Geeska Afrika Waxaa Sees Adag u Noqonaya Udub-Dhexaadka Maqan '*Urur Goboleedka Bulshooyinka Geeska Afrika*' oo La Unko!

**CABDISHAKUUR Xasan-kayd**[1] | No. 001 | September 1, 2024


## GUUDMAR

Qormadan waxa aynu kaga hadli doonaa muhiimada aasaasida iyo sees u dhigida urur goboleedka iskaashiga bulshooyinka Geeska Afrika uu u leeyahay dalalka iyo dadka gobolkan iyo guud ahaan caalamka iyo gobolada kale ee ay ood wadaagta yihiin. Waxa aynu qeexi doonaa gobolka Geeska Afrika juquraafigiisa, dadyowgiisa, iyo taariikh kooban oo gogol-dhig u ah qormada. Qaybta labaad ee qormada waxaan ku iftiimin doonaa tiirarka seeska u ah muhiimada Gobalkani leeyahay sida bogcadda oo ah mid istaraataji ah, ilaha dhaqaale ee gobolkan oo aad u dihin hadii xasilooni waarta iyo iskaashi ka dhex dhasho wadamada gobolkan u horseedi doonta horumar iyo saameyn Gobolka Geeska Afrika uu ku yeesho siyaasada, dhaqaalaha, iyo xasiloonida bogcadan ay ku taalo marin biyood ka mid ah kuwa dunida ugu muhiimsan. Qaybta saddexaad waxaan ku lafaguri doonaa urur goboleedyada kala ah IGAD iyo Bulshada Bariga Africa (EAC) oo labaduba qayb ka ah irbada seexisay dalalka gobolkan ee ay ku il-duufeen baahida ay u qabaan bulshadoodu iskaashi iyo wax wada qabsi ay ku gaadhaan himilooyinkooda gaarka ah iyo higsiga guud ee gobolkan. Qaybta afraad waxa aynu ku falanqeyn doonaa Hirdanka quwadaha caalamka, awoodaha soo koraya, iyo dabeylaha Juquraafi-Siyaasadeed ee Gobolka Geeska Afrika iyo Badda Cas. Waxa aan wax ka xusi doonaa dheeli-tirka Awoodaha iyo bogcadaha dunida ee muhiimka u ah juquraafi-Siyaasada, Juquraafi-Istraatajiyada, Juquraafi-Dhaqaalaha. Waxa sidoo kale aan iftiimin doonaa dheelitiranka Awoodaha iyo loolanka Juquraafi-siyaasada Gobolka Geeska Afrika - Tartanka dawladaha shisheeye iyo doorka saaameynta siyaasada iyo dhaqaalaha ee dalalka Shiinaha, Sucuudiga, Qadar, Imaaraadka Carabta, Turkiga, Cumaan iyo Iiraan ee Gobolkan Geeska Afrika. Qaybta Shanaad waxaa ku faahfaahin doonaa arrimaha lagama maarmaanka ka dhigaya in gobolka Geeska Africa uu sameysto Urur Goboleed si loo xaqiijiyo horumar ku dhisan iskaashi dhaqaale, siyaasadeed, nabadgalyo iyo difaac.



**Ereyada muhiimka ah:**

Geeska Afrika, Juquraafi-Dhaqaale, Juquraafi-Siyaasad, Juquraafi-Istratajiyad, Nabad, Urur Goboleed, iyo Xasilooni.


---

[1] CABDISHAKUUR Xasan-kayd waa aasaasaha iyo gudoomiyaha Machadka Dibloomaasiyada iyo Arrimaha Caalamka ee MAAN. Waana musharax darajada saddexaad ee Jaamacada (PhD) ee Barashada Dibloomaasiyada iyo Xidhiidhka Caalamka (gaar ahaan dhanka Amniga). Waxa uu hore usoo noqday La-taliyaha dhanka Amniga ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga, Jamhuuriyada Somaliland. Sidoo kale waxa uu bare kasoo noqday qaar ka mid ah Jaamacadaha Jamhuuriyada Somaliland mudadii u dhaxeysay 2010-2012.

# 1. HORDHAC

Geeska Afrika waa gobol ka tirsan qaarada Afrika waxa uu dhacaa inta u dhaxaysa Gobolka Bariga Afrika,[2] Waqooyiga Afrika[3] iyo Badda Cas. Gobolkan oo ku yaala bogcad aad ugu muhiim ah arrimaha Juquraafi-Siyaasadeed, Juquraafiga-Dhaqale, iyo Juquraafiga-Istaraajiyadeed ee Mandaqadan oo iksu xidha mandaqado kala duwan. Xasiloonida iyo nabada ka hirgasho gobolkan ayaa noqonaysa mid ay midhaheeda gurtaan dadyowga gobolkan iyo gobolada ay ood-wadaagta yihiin iyo dunida guud ahaan. Halka Colaadaha ka qarxa gobolkani sidoo kale uu saameyn taban iyo mid togan ba uu ku yeesho gobolada ood-wadaagta la ah iyo dunida guud ahaan.

Gobolkani waxa uu dhacaa meel istiraatiiji ah oo muhiim u ah dhaqaalaha, xasiloonida, iyo iskaashiga caalamka maadaama oo marin-biyood aad u muhiim ah uu ku yaalo, dadka gobolkanina taariikhda dunida ay door muhiim ah uga ahaayeen oo uu yahay gobol fac weyn. Dalalka Gobolkan Geeska Afrika ee waqti xaadirkan waxa ka mid ah dalalka Jabuuti, Eritariya, Itoobiya, Somaliland iyo Suudaan, halka Soomaaliya oo iyada lafteedu Geeska dhacda ay dhawaan ku biirtay urur Goboleedka Bulshada Bariga Afrika, taas oo ka mid ah arrimaha muhiimka ka dhigaya aasaasida Urur Gobaleedka Iskaashiga Dhaqaale ee Geeska Afrika. Waxa aynu guudmar ku samayn doonaa tilmaamaha Gobolkan:

## *1.1. Juquraafiga iyo Cimilada*

Gobolka Geeska Afrika Juquraafi ahaan waxa uu isugu jiraa lamadagaan-u-eeke qalalan oo ku san xoolo dhaqashada maadaama dhul daaqsimeed wanaagsan leeyahay. Sidoo kale waxa ka mid ah dhul joogiisu sareeyo, waxa kale oo uu leeyahay dhul xeebeed aad u balaadan oo ku teedsan Gacanka Berbera[4] iyo Badda Cas. Cimilada gobolku waa ay kala duwantahay dulka hoose ee qalalan iyo Gubanta ku teedsan xeebaha Somaliland ilaa Suudaan,[5] dhulkan oo ah dhul heerkulkiisu sareeyo roobka uu helaana aad u yar yahay. Halka Dhulka joogiisu sareeyo ee gobolkan geeska Afrika uu yahay mid ka qabow inta kale, roobka uu helaana badan yahay isla markaana qodaalka iyo beerashada ku haboon.

## *1.2. Taariikhda iyo Dhaqanka*

Dadyowga Alle ku beeray gobolka Geeska Afrika waxay leeyihiin taariikh qani ah, oo leh ilbaxnimo qadiimi ah sida borotooyooyinkii Adal, Aksum, Nuuba, Saldanadihii Ifaat oo ahaa qarniyadii dhexe, halka Faraacinta oo ah ilbaxnimooyinka taariikhda ku xusan ta ugu da'da weyn, ayaa dhigaalkooda iyo baadhitaano dadka barta cilmiga raadraaca aasaarta qadiimiga ahi ay xusaan in ay ka yimaadeen geeska Afrika. Dhanka dhaqanka marka aynu eegno, gobolkan waxa ku nool qoomiyado aad u tiro badan oo

[2] Ururka Bulshada Bariga Afrika (East African Community - EAC) waa urur goboleed ka kooban siddeed (8) dal oo iskaashanaya, waxaa ka mid ah Jamhuuriyadda Burundhi, Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ah ee Koongo, Jamhuuriyadda Kiiniya, Jamhuuriyadda Ruwaandha, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Jamhuuriyadda Koonfurta Suudaan, Jamhuuriyadda Yugaandha iyo Jamhuuriyadda Midowday ee Tasaaniya, oo xaruntiisu tahay Caruusha, Tansaaniya.

[3] Midowga Carabta Waqooyi ( Arab Maghreb Union - UMA) waa urur ay ku bahoobeen dalalka carbeed ee Waqooyiga Afrika kaasi oo ujeedkiisu yahay iskaashi dhaqaaale oo horseeda midnimo siyaasadeed mustaqbalka oo dhexmara wadamada xubnaha ka ah. Xubnaha hadda ku jira ururkan waxaa ka mid ah Aljeeriya, Liibiya, Muritaaniya, Morooko iyo Tuuniisiya.

[4] Erey-bixinta goobaha Juquraafi ee ay Reer Yurub ku calaamadsadeen qaaradaha dunida kama dhigayso joogto, sidaa awgeed maadaama qoraalkani u uku aadan yahay Gobolka Geeska Afrika 'Gacanka Cadmeed' waxaan ku bedeli doonaa 'Gacanka Berbera'.

[5] Inta u dhaxaysa Qaw oo Somaliland ugu bariyeysa ilaa Xadka Suudaan iyo Masar oo ah meel 31km waqooyi bari ka xigta tuulada Fudukwaan.

kala degan Somaliland,[6] Dabuuti,[7] Caratariya (Eritrea),[8] Suudaan,[9] iyo Itoobiya.[10] Dhanka diimaha Gobolkan dadkiisu waxa uu isugu jiraa Islaam oo noqonaysa ta ugu balaashan marka la isku daro dadyowga gobolka, Masiixiyada oo ku xigta, Juhuudiyiin tiro yar, iyo caqiidooyinka laga heysto qaybo ka mid ah oo laga soo gaadhay dadyowgii hore laakiin aan ahayn caqiidooyin samawi ah.

### *1.3. Arrimaha Sabankan*

Xiligan taagan waxa dalalka iyo dadyowga gobolka Geeska Afrika horyaala caqabado door ah oo ay ka mid yihiin xasilooni daro siyaasadeed, colaado iyo xasarado sababay masiibooyin bini'aadaminimo oo baaxad leh. Sidoo kale Gobolka waxa si joogto ah uu ula tacaalaa macaluusha, abaaraha oo soo noqonoqday mudooyinkan dambe, nabaadguurka iyo xaalufka dhirta, iyo colaadaha ka aloosmay Itoobiya iyo Suudaan oo culeys ku darey kuwii ka taagnaa Jamhuuriyada Soomaaliya oo dawlad la'aan ahaa mudo dheer, ilaa maantana nafta ay ku hayaan bulshada caalamku dawlad gacan ku rimis ah oo aan ka iman doonista shacabka ee ay yagleeleen bulshada caalamka.

### *1.4. Dhinaca Dhaqaalaha*

Gobolka Geeska Afrika waxa uu leeyahay dhaqaale baaxad leh iyo khayraad dihin. Dhaqaalaha dadyowga gobolku waxaa ugu balaadhan qodaalka ama wax soo saarka beeraha. Xoolo dhaqatada oo aad ugu badan dadyowga gobolka ayaa ka ganacsiga xoolaha nool iyo hilibkooda ka dhigtay il kale oo dhaqaale balaadhan kasoo galo gobolka. Horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha ayaa iyaguna ku socdo si xawli ah taas oo gobolka geeska Afrika gayasiin karta horumar balaadhan hadii xal waara loo helo xalinta khilaafaadka , damința colaadaha iyo ka hortaga xasaradaha. Waxaana horumarkaa gobolka Geeska Afrika u baahan yahay iskaashi iyo wax wada qabsi toolmoon oo dhexmara dalalka bogcadan aad ka muhiim ka u ah.

---

[6] Somaliland dadkeenu waa Qabiilooyin Soomaali ah oo ay ugu badan yihiin Isaaq, Dir (Gadabuursi, Ciise, Akisho, Gurgure) iyo Harti. Waxa jira beelaha kale ee Gabooye, Magaadle, Jibraa'iil (Ogaadeen), sheekhaash, Ashraaf, Yibro, Tumaal, Madhibaan. Iyo hadii laga tagi waayo qoysas kooban oo ka soo jeeda Carab, Hindi iyo Baakistaan (1960 ka hor dadkii daganaa distoorka Somaliland waxa uu u aqoonsan yahay reer Somaliland, qoysaska hindida, carabta iyo Bakistaaniyiinta ah eek u abtirsada dadkaasina way helaan dhalashada Somaliland)

[7] Jabuuti dadkeenu waxay u qaybsamaan qoomiyadaha Soomaali, Canfar (danaakilo) iyo Carab aan tiro badnayn.

[8] Eratariya qoomiyadaha ku dhaqan waxaa ka mid ah Biheer-Tigrinya, Tigree, Saaho, Canfar, Kunaama, Bilan, iyo Rashayda.

[9] Bulshada Sudaan oo badi ay ka soo jeedaan carabta xoolo dhaqatada ah ayaa waxa ka mid ah qoomiyadaheeda Cawadiya, Fadniya, Banii Carak, Bani Xasan, Al-Ashraaf, Kinaanah, Baggara, iyo Rashayda. Qoomiyadaha kale ee aan carabta ahayn ee reer Suudaan waxa ka mid ah – Kobtik, Beeja, Fuur, Nuuba, Falaata, Kabaabish, Nuweer, Saghaawa, iyo Masalit. Dhanka diimaha waxay isugu jiraan Muslim, Masiixiyiin, iyo diin dhaqmeedyo. Carabta waxa lagu qiyaasaa 70% halka dadyowga aan carabta ahayni noqonayaamn 30%. Manaafacaadsiga waxa loo kala saaraa raacato (Juhaynah – xoolo dhaqato) iyo qodato (Julayin – beeraley).

[10] Qoomiyadaha Itoobiya oo 80 ka badan ayaa waxa ugu balaadhan Oromo, Amxaaro, Soomaali, Tigree, Sidaamo, Guraage, Walayta, Hadiya, Canfar,Gamo iyo kuwo tiro yar (Aari, Agaw-Awi, Agaw-Hamayra, Alaba, Anuak, Arbore, Argobba, Baaja, Baskeeto, Benji, Berta, Boodi, Burji, Dawro, Dirashe, Diisi, Goofa, Gumus, Silte, Hamar, Harari, Konta, Konso, Koore, ,ursi, Nuweer, Surma, iyo kuwo kale oo badan).

## 2. TIIRARKA SEESKA U AH MUHIIMADA GOBOLKANI LEEYAHAY

Mandaqada Geeska Afrika waxay leedahay muhiimad aad u weyn oo ay dhaxalsiisay juquraafiga bogcada ay ku taalo. Waa gobol istaraataji ah isla markaana Alle ku galaday ilo dhaqaale oo kala duwan waana gobol dihin oo aan badi la manaafacaadsan khayraadkiisa dabiiciga ah. Waxa uu doorweyn ku leeyahay siyaasada dunida iyo gobolada deriska la ah, sidoo kale waxa saameeya hirdanka awoodaha dunida ee isbedelada juquraafi-Siyaasad taas oo dawladaha gobolkan la kala saftaan xasarado aan dhib mooyee dheefta ugu jirta ay kooban tahay. Khalad igu raacimaayo hadaan idhaahdo gobolkan dawladihiisa inta badan waxay ku haftaan isbedelada iyo hirdanka quwadaha waaweyn iyo awoodaha soo koraya oo mudooyinkii dambe ka dhigtay gobol ay ku tijaabiyaan saameyntooda ama la odhan karo waa shaybaadhka siyaasadahooda.

Cinwaan yareyaasha soo socda waxa aan ku iftiimin doona waxyaalaha aasaasiga u ah baahida gobolka Geeska Afrika in uu uu yeesho iskaashi, isdhexgalka, iyo sameynta urur goboleed dhameytiran ka dhigaya lama dhaafaan.

### *2.1. Bogcad Istaraataji ah*

Gobolka Geeska Afrika waxa uu ku yaalaa bogcad istaraataji ah oo leh tilmaamo iyo tiirar ka dhigaya meel muhiim ah oo aan awoodaha dunida ku hirdamaya aanay ka maqnaan karin, waxa aynu si kooban u xusi doonaa tilmaahaa istaraatajiyadeed ee gobolkan.

#### *2.1.1. Marin Biyood muhiim ah*

Geeska Afrika waxey ku taalaa isgoys xaasaasi ah oo u dhaxeeya jasiiradda carabta iyo badweynta Hindiya. Isgoyskan muihiim ka ah ee marin biyoodka waxaa loo yaqaanaa Kadinka ama Albaabka Mandeb. Kadinkan marin biyood ayaa ka mid ah kuwa ugu mashquulka badan dunida. Maraakiibta dunida u kala gooshta ayaa in badan oo ka mid ahi ka gudbaan kadinkan marka ay u kala socdaan qaaradaha Yurub iyo Aasiya. Sidoo kale maadaama oo uu marin biyoodkani isku xidho Jasiirada carabta iyo Geeska Afrika, waxa kadinkan muhiim ka dhigay in uu yahay ka ugu badan ee ay maraan badeecada saliida ee muhiimka u ah tamarta dunida iyo waxsoosaarka warshadaha. Xasiloonida marin biyoodkan ayaa kordhinaysa horumarka, halka xasaradaha iyo colaadaha marin-biyoodkani ay kordhinayaan qiimaha badeecadaha iyo kharashka rarkoodaba.

#### *2.1.2. Ku dhawaanshaha Bariga Dhexe*

Meesha uu ku yaalo gobalka Geeska Afrika ayaa ah mid istiraatiiji ahaan muhiim u ah wadamada Bariga Dhexe, gaar ahaan marka la eego marinada ganacsiga iyo amniga gobolka. Taariikhda ganacsi iyo isu socod bulsho ee labada Gobol ayaa ahaa mid qoto-dheer oo soo jireen ah, in kastoo kor u kaca dhaqaale ee dalalka bariga dhexe uu keenay inay ku dhex milmaan siyaasadaha dalalka gobolka geeska Afrika taas oo mustaqbalka hadii gobolkani yeesho urur goboleedka maqan ay waajibkooda ka gudan doonaan hadii aan dawladaha bariga dhexe bedelin hab-xidhiidhka iyo iskaashigooda ku aadan gobolka Geeska Afrika.

## *2.2. Joogitaanka Ciidamo Shisheeye*

Joogitaanka ciidamada shisheeye iyo saldhigyada ciidan ee ay dalal dhowr ahi ku leeyihiin xeebaha gobolka geeska Afrika ayaa gobolka ka dhigaysay meel aad ugu muhiim ah hirdanka Juquraafi-Siyaasad ee caalamka. La-dagaalanka Argagixisada iyo budhcad Badeeda Soomaliya ayaa dhiirigalisay imaanshaha ciidamadan shisheeye ee saldhigyada ka sameystay gobolka Geeska Afrika.

### *2.2.1. Joogitaanka Ciidamada Shisheeye*

Waxa gobolka Geeska Afrika la soo dersay labaatankii sano ee u dambeeyey imaanshaha iyo joogitaanka ciidama shisheeye ee saldhigyo ciidan ka sameysanaya dalalka xeebaha dalalka gobolkan. Dalalka ilaa iyo hada saldhigyada ku leh iyo kuwa ay ciidamo ka joogaan dulsaar ku ah saldhig kale waxaa ka mid ah - Maraykanka, Shiinaha, Talyaaniga, Faransiiska, Isbeyn, Turkiga, Sucuudiga, Imaaraadka, Jabaan, Jarmalka. Waxaa Iyana jira dalal kale oo aan saldhigyo ku lahayn ama aan ciidamoodu dulsaar ku ahayn saldhigyada xulifadooda, laakiin maraakiib ciidan u joogta Bada Cas waxaana ka mid ah Hindiya, Ruushka, Iiraan, Midowga Yurub (Hawlgal ciidamada isku-dhafan ee Midowga Yurub ku ilaalinayaan danahooda iyo bedqabka maraakiibtooda dunida iskaga gooshaya ee maraya marin biyoodkan). Gobolkan muhiimka ah ayaan saamaxeyn awoodaha is hirdiyaya in ay ka maqnaadaan waana sababta keentay saldhigyada ciidan ee ku soo badanaya xeebaha gobolkan si ay dalalkaasi meeqaamkooda istaraatajiadeed sare ugu qaadaan kana qayb qaataan xasilinta wadooyinka Badda Cas.

### *2.2.2. La dagaallanka Argagixisada*

Sida aan hore usoo xusnay isa-saameynta Gobolka Geeska Afrika iyo Bariga Dhexe ayaa ah mid aad u sareeya xidhiidhka taariikheed, diineed, iyo bulsho ee ka dhaxeeyey labada dadyoow qarniyo awgood. Helitaankii Saliida ee dalalka Bariga Dhexe ayaa soo kordhisay in ay kala bataan hantida ay heleen iyo baahida dawladahaa carbeed, waxaanay bilaabeen in ay ka qayb galaan jaanjoynta siyaasada dunida. Meesha ay ka gali karayeena ayaa noqotay afkaarta diimeed iyo dhismaha koox-diimeedyo kala duwan. La dagaalka Suufiyada ayaaxoogaysatay, waxa aanay dhashay culimo iyaga oo wali waxbarasho diineed wada hadana isu cumaamaday in ay fadwoon karaan, 'cid rediya, cidna taageera'.

Dawladihii carbeed markii ay arkeen in maxsuulkii ka soo baxday shaybaadhkooda siyaasadu ay balaadhatay isla markaana caqabad ku noqon karto mustaqbalka qoysaska ka arrimiya dalalkaas ayay usoo waarideen dalalka kale ee Islaamka ah. Waxa xusid mudan dagaalkii Midowga Soofiyeetka iyo Afghanistaan dhex maray in uu bedelay wajiga waxa maanta loo yaqaan argagixisada ama ururada argagixisada. Dagaaladaas waxa ka qayb galay dad badan oo kasoo jeeda dunida islaamka oo taageerayay dagaalyahanada Afgaanistaan, kuwaas oo helay tababaro ciidan, khibrad dagaal oo dalalkii reer galbeedka ee ay loolamayeen Midawga Soofiyeetku ku taageerayeen dagaalyahanadaa. Markii uu soo gabogaboobay dagaalkaas ee dagaalyahanadii dalalkoodii ku noqdeen waxa khilaaf soo kala dhexgalay tuumbadii isku xidhaysay galbeedka, Xoogaga Afgaanistaan iyo Dagaalyahanada garabka siinayay ooh aa Cusaama Bin Laadin[11]waxaa unkamay Al-Qaacida. Alshabaab oo gobolkan khatar weyn ku ah ayaa ka mid ah ugxaantii ka dilaacday beedkaa Afgaanistaan ku dhashay.

[11] Cusaama Bin Laadin waxa uu ahaa Hogaamiyaha Ururka Al-Qaacida oo ay kasoo shiidaal iyo tababar qaateen aasaasayaasha Ururada Argagixisada ee Gobolka Geeska Afrika intooda badan. Waxa uu ku dhashay Magaalada Jidda ee Sucuudiga sanadkii 1957kii isaga oo ahaa wiilkii 17naad ee dhanka wiilasha Maxamed Bin Laadin oo la sheegay in uu dhalay 52-54 caruur ah (Waxa uu kasoo guuray Yaman, markii uu saaxiibtinimo dhow la yeeshay qoyska boqortooyadana waxa uu aasaasay shirkad dhisme oo weyn) hantida aabihii oo gaadhay 2-3 Bilyan oo dolar ayaa uu dhaxal u helay hanti gaadhaysa ilaa 200 Milyan ka dib geeridii aabihii ku nafwaayey

Joogitaanka ciidamada shisheeye ee Gobolka Geeska Afrika ayaa ay ku andacoodaan in ay u joogaan la dagaalanka argagixisada, iyo sidoo kale Budhcad badeed Soomaliya ka dilaacday intii ka dambeysay dagaalka ka dhanka ah Argagixisada caalamka. Isku beegnaansho dabiici ah in ay noqoto aad ayay u yartahay waxaa se la arki karaa xidhiidh ka dhaxeeya Meesha ciidamo shisheeye yimaadeen ee qaarada Afrika iyo korodhka falaka Argagixisadu.

### *2.3. Khayraad Daciibciga ah iyo Ganacsiga*

Khayraadka dabiiciga ah iyo dhabooyinka ganacsiga oo gobolkani leeyahay ayaa ka mid ah qodobada gobolka Geeska Afrika ka dhigaysa bogcad aad ugu muhiim ah Juquraafi-Siyaasad iyo Juquraafi-Istaraatajiyad, iyo Juquraafi-Dhaqaale ahaanba.

#### *2.3.1. Kheyraadka Dabiiciga ah*

Gobolka Geeska Afrika waxa uu hodan ku yahay kheyraadka dabiiciga ah ee aan wali la manaafacaadsan. Ilahana khayraadka dabiiciga ah ee dihin ee gobolkani leeyhay waxaa ka mid ah saliidda, gaaska iyo macdanta. Inkastoo gobolku uu la kulmay colaado iyo xiisado siyaasadeed oo aalaaba sababa xasaradaha caqabada ku noqday in si buuxda looga faa'idaysto khayraadkan. Hirgalinta iyo yagleelida urur goboleed dhidibada u taaga iskaashiga iyo wada noolaanshaha dadyowga gobolkani waxa ay horsed u noqon kartaa dhismaha mideynta difaaca iyo siyaasadaha taas oo dhaqaalaha iyo xasiloonida kor uqaadi karta gobolkana dhaxalsiin doonta iskaashi dhaqaale, difaac, maalgashi, iyo yareynta saameynta ka imanaysa dunida kale ee ay keento hirdanka Juquraafi-Siyaasad ee awoodaha tartamaya.

#### *2.3.2. Dhabaha Ganacsiga*

Gobolka Geeska Afrika waxa uu u adeegaa oo uu u yahay dhabo ganacsi oo muhiim ah ganacsiga u dhaxeeya Qaarada Afrika, Bariga Dhexe, iyo Aasiya. Dekeda Gobolkan oo inta badan ay saameeyaan colaadaha dalalka dexdooda, xasilooni darada dalalka qaar ka mid ah iyo la kala safashada dagaalada Juquraafi-Siyaasadeed ee dunida ayaan si wanaagsan looga faaidaysan marka laga reerbo dekedda Jabuuti oo iyadu ah dalka ugu yar gobolka dagaalo saameyn ku yeeshayna aanay ka dhicin hadii laga tagi waayo iyada oo dhawaan qaaday dhabihii la kala safashada ee burburka u horseeday dalal badan oo deriskeeda ah. Jabuuti ayaa hadii ay sii hayso siyaasadaa ku milanka hirdanka awoodaha noqon doonta dalkii ugu dambeeyey ee gobolkan ee gala hoos udhac dhaqaale iyo mid siyaasadeed wallow aan colaado ka dhici doonin. Urur Goboleedka maqan ee Geeska Afrika ayaa se ka badbaadin doona saameyn laxaad leh in ay ku timaado, in kastoo aragtidayda shaqsiga ah aan aaminsanahay in ay bilowga ururkan aanay soo dhaweyn doonin dawlada Jabuuti, taas oo bedelkeeda ka dhigi doono mid ka xidhxidhan gobolka ay ka midka tahay.

---

shil diyaaradeen sanadkii 1967. Dhalka aragtida siyaasiga ah waxa uu ka dab qaatay Cabdala Cassaam oo ahaa Falastiini. Dagaalkii Afgaanistaan iyo Midawga Soofiyeetka waxa uu uu ka caawiyey Cassaam dhismaha xafiiska keenitaanka dagaalyanada shisheeye 'Maktab Al-Khidamat' taas oo dhaxalsiisey in uu helo cudud ka amar qaadata oo daacad u ah oo lagu qiyaasay 5000 oo sucuudiyiin ah, 3000 oo Aljeeriyiin ah, 2000 oo masaari ah, waxaana u uku samaysat xarumo la iska qoro Yurub iyo Maraykankaba. Guushii Afgaanistaan ka dib waxa uu noqday Boqorka dagaalyahanka ah, waxaanay cududa uu sameeyay diyaar u ahaayeen inay dagaalo kale sii galaan oo dhinbiisha halganka sii wadaan, iyaga oo ka qaybgalay caawinta dagaalyahanada muslimiinta ah ee dunida kana dagaalamay Aljeeriya, Angoola, Boosniya, Jeejniya, Ceratariya, Soomaaliya, Suudaan iyo meelo kale. Markii ay kala leexdeen Cabdalla Cassaam sanadkii 1988 isaga iyo Ayman Al Dawaahiri oo ahaa Aaabaha aasaaska Jihaadka Islaamka ee Masar (The Islamic Jihad of Egypt), waxay sameeyeen Ururka Al-Qaacida. Waxaana sanadkii xigay Qarax Gaadhi lagu dilay Cabdalla Cassaam iyada oo ay jiraaan tuhuno ku eedeeyey dilkaa in uu ka dambeeyey Cusaama Bin Laadin hadana ma jirto cadeymo arrintaas muujinaya oo aan ka ahayn in ay aragtida ku kala tageen mudo dheer oo ay halgan ku wada jireen ka dib.

### *2.4. Isbaheysiyada Siyaasadeed iyo Khilaafaadka*

*Iska-hor-imaadyo Goboleed:* Geeska Afrika waxaa astaan iyo tilmaamba u noqotay taariikh madow ee ka dhalatay khilaafaadka, xasradaha, xasilooni la'aanta iyo colaado dhaliyay dhimasho, dhaawac, burbur hantiyeed iyo baro-kac baaxad leh. Colaadaahaa oo isugu jira qaar ka dhashay muran xuduudeed, xiisado ka dhex aloosma qowmiyadaha, Jabhado dagaalo la gala dawladaha gobolkan oo badi gacanta u galay kaligood taliyayaal. Dagaalladan ayaa saamayn ballaadhan ku yeeshay waqti xaadirkana ku yeelan kara xasilloonida gobolka. Sidoo kale colaadahan ayaa waxa ka faaidaysta oo huriya quwadaha waaweyn ee caalamka oo ku hirdamaya gacan ku heynta iyo xulufaysiga dawladaha iyo dadyowga gobolkan aad ka muhiimka ugu ah istaraatajiyadahooda ciidan, dhaqaale, siyaasadeed iyo meeqaamkooda maamulida iyo jaangoynta siyaasada caalamka.

#### *2.4.1. Ka-qayb-qaadashooyin Diblomaasiyadeed*

Quwadaha waaweyn iyo urur goboleedyada, sida Midowga Afrika, Qaramada Midoobay, ayaa siyaabo kala duwan u gala arrimaha Gobolka Geeska Afrika iyaga oo qaadaya dhabooyin diblomaasiyadeed si ay u maareeyaan colaadaha, korna ugu qaadaan xasilloonida, kuna daba-galaan himilooyinka horumarineed ee Geeska Afrika. Maqnaanshaha Urur Goboleed baahidooda ka yimid dalalka Geeska Afrika darted danaha ururadan caalamiga ahi inta badan waxa ay noqdaan kuwo ku aadan doonista cida maalgelisay dedaaladaa xasilinta, halka dalalka gobolka qaarkoodna ay u arkaanba il dhaqaale kasoo galo mashaariicdaa nabad-ilaalinta iyo xasilinta gobolka.

### *2.5. Dhibaatooyinka Bini'aadaminimo iyo Arrimaha Horumarka*

*Dhibaatooyinka Bani'aadamnimo:* Gobolka waxaa la uu la darsaa caqabado bani aadaminimo oo ay dhaliyaan colaadaha iyo xaradaha wajiyada kala duwan leh ee gobolkan dhex muquurtay oo qaarkood ilaa maanta ay socdaan. Saboolnimada, macaluusha iyo abaaraha ayaa iyaguna ah ilo kale oo sababa barakac baaxadleh. Hay'adaha gargaarka caalamiga ah iyo hay'adaha biniaadaminamada ayaa ah kuwo si weyn uga qayb qaadanayay taageerida dadyowga tabaalaysan in kasta oo waxa ay bixiyaan ay tahay faroguudkood wax aad u yar ka taraya baahiyahooda. Si kasta oo ay wax ugu tuuraan dalna kuma horumari karo taageero dibadeed hadaan dawladiisu yagleelin siyaasado gudaha ah oo u saamaxaya taageeradu inay wax bedel u kordhiso ee aanay kordhin baahida iyo ku tiirsanaanta caawimada shisheeye. Suudaan ayaa ay ka taagan tahay xaalada bini'aadaminimo ee ugu daran waqti xaadirkan gobolka Geeska Afrika, in kastoo Itoobiya lafteeda ay xasarado iyo colaado ka jiraan.

### *2.6. Tixgalinta Deegaanka iyo Isbedelka Cimilada*

*Deegaanka iyo Saamaynta Isbedelka Cimilada:* Gobolka Geeska Afrika wuxuu aad ugu nugul yahay saamaynta isbeddelka cimilada, oo ay ku jiraan abaaraha iyo daadadka. Caqabadaha deegaanka ee gobolka waxay leeyihiin saameyn Juquraafi-Siyaasadeed, oo carqaladeeya isu-socodka dadka, sugnaanta cuntada, iyo gargaarka caalamiga ah.

Gebogabadii, guud ahaan, muhiimadda Juquraafi-Siyaasad ee Geeska Afrika waa mid dhinacyo badan leh, oo ay ku jiraan tixgelin ciidan oo istiraatiiji ah, danaha dhaqaale, iska-horimaadyada gobolka, iyo arrimaha bani'aadamnimada. Marin-biyoodka muhiimka ah ee uu ku yaalo Kadinka Mandab oo ah isgoys

u dhaxeeya Afrika iyo Bariga Dhexe ayaa waxay ka dhigeysaa gobol ay diirada saarayaan oo aanay ka maqnaan Karin quwadaha caalamka iyo kuwa gobollada kale.

## 3. URURADA AY XUBNAHA KA YIHIIN DALALKA GOBOLKU, EE CAQABADA KU NOQDAY ISKAASHIGA DADYOWGA IYO DALALKA GEESKA AFRIKA

Dalalka dhaca Geeska Afrika waa gobolka kaliya ee Afrika ee aan lahayn urur goboleed, isla markaana ah gobol kala xidhan marka la eego isu socodka dadka, gacanciga ku kala tagsanaanta siyaasada maadaama oo ay ku dhex milmaan hirdanka Juquraafi-Siyaasad ee quwadaha waaweyn. Geeska Afrika marka la tilmaamayo ee qaarada Afrika la qaybinayo[12] waxaa la raaciyaa Afrikada Bari in kasta oo aanu ahayn urur goboleed guud ee uu yahay qaybin jiho keentay, waxa se jira urur goboleed la yidhaa Ururka Bulshada Bariga Afrika oo ay xubno ka yihiin 8 dal waxa aynu ku falanqayn doonaa ururkan ciwaan yaraha labaad ee cutubkan saddexaad. Dalalka Geeska Afrika oo laga reebay Somaliland iyo 4 dal oo ka mid ah Ururka Bulshada Bariga Afrika ayaa iyaguna xubno ka ah Ururka Horumarinta iyo la tacaalista Abaaraha ee IGAD. Ururka IGAD ayaa dad aan ka mid ahay ay aaminsan yihiin in uu caqabad ku noqday in bulshada Geeska Afrika dareento baahida ay u qabto urur goboleed shaqeeya iyo iskaashi buuxa oo dhex mara bulshada gobolkan hodanka ah, isla markaana Alle dhigay bugcad istaraataji ah.

Waxa aan sida ugu kooban ee aan waxba ka tagayn u sharaxi doonaa taariikhda iyo geedi-socodkii ay soo mareen ururada IGAD iyo Bulshada Bariga Afrika, aasaaskoodii ilaa waqtigan aan joogno.

### *3.1. Ururka IGAD*

Urur goboleedka IGAD[13] waa urur goboleed ka jira bariga Afrika, ujeedadiisuna tahay horumarinta iskaashiga dhaqaalaha, isdhexgalka gobolka, nabadda iyo amniga dalalka xubnaha ka ah. Ujeedooyinkan ayaa ah kuwo mar dambe lagu daray si aan u ogaano waxa uu hada ku magacaaban yahay, iyo xaqiiqda waxa uu yahay waxaan milicsan doonaa taariikhda ururkan.

#### *3.1.1. Aasaaskii iyo Sannadihii Hore (1986 ilaa 1996)*

Ururkan oo magacii ugu aasaaskiisa loogu wan qalay ahaa IGADD,[14] waxa dhidibada loo taagay 5tii Bisha Koowaad[15] sanadkii 1986kii. Waxaanu ku yimid baahi ka dhalatay ka jawaabista abaaraha, cunto yaraanta iyo macaluusha soo noqnotay ee Gobolka Geeska Afrika. Waxaana la is tusay baahida madal ama urur isku dubarida dedaalada dalalka gobolku ay ugu jiraan wax ka qabashada abaarahaas. Xubnaha aasaasay ururkan waxaa ka mid ahaa Jabuuti, Itoobiya, Kiiniya, Suudaan, iyo Yugaandha. Sanadihii hore IGADD waxay diirada saartay gurmadka abaaraha iyo mashaariic horumarineed oo wax katara cunto yaraanta iyo macaluusha. Waxaana higsigu ahaa in ururku mideeyo muruqa dalalka xubnaha ka ah isla


[12] Midowga Afrika waxa uu Qaarada u qaybiyaa lix gobol oo kala ah – 1) Afrikada Bari, Afrikada Waqooyi, Afrikada Dhexe, Afrikada Galbeed, Afrikada Koonfureed, iyo Qurbe-joogta Afrika.

[13] IGAD - The Intergovernmental Authority on Development.

[14] IGADD - Intergovernmental Authority on Drought and Development.

[15] 5 January 1986.

markaana uu noqdo madal hogaamisa iskaashiga iyo dedaalada wax lagaga qabanayo caqabadaha soo foodsaara deegaanka iyo wax soo saarka beeraha ee dadyowga ku dhaqan gobolka.




*Sawirka 1aad: Khariidada Dalalka Xubnaha ka ah Urur Dawladaha ee Dhanka Horumarka (IGAD)*

### *3.1.2. U Digo-rogashadii IGAD ee 1996kii*

Ururka IGADD oo dib-u-habeyn iyo isbedel lagu sameeyey ayaa sanadkii 1996kii magaciisa loo bedelay IGAD (waxa laga saaray xarafkii D hore ee u taagnaa Abaaraha 'Drought'), waxaana la balaadhiyay waajibaadkii Ururka oo lagu soo daray arrimaha horumarka oo ay ku jiraan nabadda iyo amniga gobolka, xasilloonida siyaasadeed, iyo is-dhexgalka dhaqaalaha. Waajibaadka cusub ee Ururka ayaa lagu sheegay in uu ururku noqdo urur goboleed dhamaystiran oo xaqiijin kara horumarinta is-dhexgalka dhaqaalaha gobolka, xalinta khilaafaadka, iyo iskaashiga siyaasadeed. Waxa riyo maalmeed ah in urur goboleedkan ay xubno ka yihiin dalal kale oo urur goboleed shaqaynaya ku jira laakiin ujeedka ay kan u galeen ahaa caqabadaha ka dhasha abaaraha oo ay ka sinaadeen dalalkan ay ood wadaaga yihiin.

### *3.1.3. Balaadhinta iyo Horumarinta Uururka (1996 ilaa 2000)*

Sanadkii 1993 waxa Ururka kusoo biiray dal cusub oo ahaa Ceratariya iyada oo xubinimada dalkaasi la hakiyey sanadkii 2007 sababtana lagu sheegay ku luglahaanshaha colaadaha gobolka iyo khilaafaadka dhexmaray iyada iyo dalalka ay xuduudaha wadaagaan. IGAD waxa ay u tafo-xeydatay dedaalada Nabada iyo Amniga, iyada oo qaaday talaabooyin ay ka mid yihiin ilaalinta nabada, xalinta khilaafaadka (dhexdhexaadinta dhinacyada colaadu ka dhex oognayd ee gobolka sida Suudaan iyo Soomaaliya). IGAD waxay bilowday dhowr mashruuc oo heer gobol ah, oo ay ku jiraan Qorshe Hawleedka IGAD ee u diyaar-garowga iyo ka-hortagga aafooyinka, iyo mashaariic horumarineed oo kala duwan oo ujeedkoodu ahaa in ay xaqiijiso in ay u digo-rogatay urur goboleed dhamaystiran. Mashaariicdan ayaan ahayn kuwo sida urur goboleedyada kale lacagtoodu ka timaado dalalka xubnaha ka ah ee waa kuwo ay maalgaliyaan, kuna dabo-galaan dalal shisheeye waana ta ka dhigtay Ururka IGAD mid la mid ah ururada bulshada oo ka shaadh-weyn.

### *3.1.4. Doorka Hawlgaladii u dambeeyey (2000 ilaa Imika)*

Ururka IGAD waxa uu sameeyey hawlgalo iyo talaabooyin door ah oo ay ka mid yihiin kuwan hoos ku xusan:

- *Nabad ilaalinta iyo dhexdhexaadinta:* IGAD waxay ka qayb qaadatay dedaallada nabad ilaalinta iyo dhexdhexaadinta, sida fududeynta geeddi-socodkii nabadeed ee horseeday Heshiiskii Nabad Dhammaystiran (CPA[16]) ee Suudaan, kaas oo soo afjaray Dagaalkii Sokeeye ee labaad ee Suudaan una gogol xaadhayay xornimada Koonfurta Suudaan ee sanadkii 2011-kii. Soomaaliya oo xasilinteeda lacag badan dunidu ku bixisay dalalka xubnaha ka ah IGAD waxay u noqotay il dhaqaale oo muhiim ah oo kharash adag kasoo galo dedaalada aan ka iman dhinacyada isku haya Soomaaliya laakiin ka imanayay dalal dhowr ah oo dunida ka mid, taas ayaana ah ta keentay in midho-dhalka shirarka nabadayntu uu u noqdo kuwo aan u guuleysan sidii la filayay. IGAD waxay ka qayb qaadatay dadaallada lagu xasilinayo Soomaaliya iyada oo taageertay howlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM[17]) oo hada u magac-bedeshay (ATMIS[18]) waxayna fududeysay wada-hadallada u dhexeeya qaybaha kala duwan ee Soomaalida.
- *Is-dhexgalka Gobolka*: IGAD waxay tamar badan ku bixisaa ka shaqaynta isdhexgalka gobolka iyo iskaashiga dhaqaalaha. Waxay ku lug leedahay hindiseyaal kala duwan oo loogu talagalay horumarinta ganacsiga, kaabayaasha, iyo siyaasadda dhaqaalaha ee dalalka xubnaha ka ah. In kasta oo danaha xubnaha Ururka oo xubno ka ah urur goboleedyo kale ay sababto is-khilaafka danaha iyo waajibaadka ururada taas oo IGAD dhaxalsiisa in hidisayaasheedu iska noqdaan laab-la-kac ka midho dhalintoodu u baahan tahay in la wajaho xaqiiqooyinka ah in aanay noqon Karin urur goboleed dhamaystiran.
- *Isbeddelka Cimilada iyo Horumarka*: IGAD waxa kale oo ay si firfircoon uga qayb qaadataa wax ka qabashada isbeddelka cimilada iyo arrimaha deegaanka. Waxay ka shaqeysaa barnaamijyada gobolka ee la xidhiidha maareynta abaaraha iyo la qabsiga cimilada si loo xaqiijin karo horumar waara.

### *3.1.5. Qaab-dhismeedka iyo Hawlaha:*

Ururuka IGAD waxaa uu leeyahay hogan. Go'aanada Ururka waxa jaangooya goalaha ay ku mideysan yihiin madaxda dalalka xubnaha ka ah, kuwaas oo shir-weyne qabsada sanadkii hal mar. Halka Hawlaha maalinlaha ah ay qabtaan shaqaalaha uu hogaamiyo Xoghayaha Guud oo fadhigoodu yahay dalka Jabuuti, iyada oo ay dusha kala socdaan ooh awl maalmeedka ay ku ilaaliyaan Gudida Golaha Wasiirada ee dalalka IGAD. Sidoo kale Ururka IGAD waxa uu leeyahay Hay'ado iyo xarumo gaar ah oo u qaabilsan waajibaad gaar ah sida qodaalka iyo waxsoosaarka beeraha, Caafimaadka, iyo Xalinta Khilaafaadka.

IGAD ayaa weli ah urur goboleed muhiim ah dalalka iyo dadyowga Geeska iyo Bariga Afrika, maadaama ay ujeedkii loo aasaasay iyo baahidii ka dambeysay ee ahaa abaaraha soo noqnoday, cunto yaraanta, iyo

---

[16] Heshiiskan oo ka dhacay dalka Kiiniya waxa Suudaan dhinacyadii ku dagaalamayay ee dawlada iyo xoogaga taageersan iyo Jabhadihii Koonfurta Suudaan ee SPLM ay ku heshiiyeen sanadkii 2005 in Afti laga qaado dadka reer koonfurta Suudaan go'aankoodana la meel mariyo aftida ka dib. Heshiiskan ayaa Aftida ka dib

[17] AMISOM - African Union Mission in Somalia.
[18] ATMIS – African Union Transition Mission in Somalia.


macaluushu ay wali ka jirto dalalkan oo dhamaantood ka siman bulsho balaadhan oo xoolo dhaqato ahina u baahan yihiin ururkan. Waxaa se lama dhaafaan ah in la garwaaqsado in IGAD aanay noqon karin urur lagaga maarmi karo baahida bulshada iyo dadyowga gobolka Geeska Afrika ugu baahan yihiin Urur Goboleed dhamaystiran kaas oo xaqiijin kara yoolalka mustaqbalka fog ee horumarka, nabadda, xasilloonida gobolka, iskaashiga dhaqaale iyo difaac ee dalalka Geeska Afrika.

### *3.2. Ururka Goboleedka Bulshada Bariga Afrika (EAC)*

Bulshada Bariga Afrika (EAC[19]) waa urur goboleed iyo midnimo siyaasadeed oo fadhigiisu yahay Bariga Afrika. Waxa aanau ujeedadka aasaaskiisu ahaa in kor loo qaado is-dhexgalka gobolka iyo iskaashiga ka dhexeeya dawladaha xubnaha ka ah. Waxa aynu milicsan doonaa geedi-socodkii urur goboleedkan. Halkan waxaa ah dulmar taariikheed:

#### 3.2.1. *Isku dayadii hore ee Is-dhexgalka Gobolka (1960-meeyadii-1970-meeyadii)*

Isku daygii ugu horreeyay ee is-dhexgalka gobolka ee Bariga Afrika wuxuu ahaa aasaaskii Bulshada Bariga Afrika 1967, oo ay ku jiraan Kiiniya, Yugaandha, iyo Tansaaniya. Horraantii ururku waxa diiradda saaray iskaashiga dhaqaalaha iyo isdhexgalka, iyaga oo la wadaagayo hay'adaha iyo siyaasadaha ganacsiga, gaadiidka, iyo isgaarsiinta. Mudo 10 sano ah ka dib Ururka Bulshada Bariga Afrika waa burburay ama la kala direy. Kala tagaa waxaa sababay caqabadihii soo wajahay Ururka oo ay kamid ahaayeen kala duwanaansho siyaasadeed, dheelitir la'aan dhaqaale, iyo khilaaf xagga siyaasadda ah. Arrimahaas ayaa keenay in la kala diro 1977-kii, iyadoo saddexda dal ee xubnaha ka ah ay si rasmi ah u kala direen Ururkii Bulshada Bariga Afrika.




*Sawirka 2aad: Khariidada Dalalka Xubnaha ka ah Urur Goboleedka Bulshada Bariga Afrika (Qoraaga ayaa wax ka bedelay – Somaliland oo ay sheegato dawlada Soomaaliya ayaan haba yaraatee xubin ka ahayn, mustaqbalkana ka noqon doonin).*

#### 3.2.2. *Soo Noolayntii iyo Samayntii EAC Cusub (1990 meeyadii - Hadda)*

Khilaafka sababay in uu burburo Ururka ayaa keenay colaado ka dhex aloosma dalalka Tansaaniya iyo Yugaandha. Colaadahan ayaa dabada ku hayay inqilaabyo dhowr ah oo ka dhacay dalka Yugaadha iyo dawlada Tansaaniya oo ciidankeeda galisay dalkaas si ay xukunka usaarto Raysal Wasaarahii la inqilaabay

[19] The East African Community (EAC)

ee Milton Oboto, iyo sidoo kale tababaro iyo Taageero ay u fidisay Jabhadii NRA[20] Qoomiyada Mayankole[21] ee dagaalka kula jirtay Dawlada Yugaandha. Waxa xusuid mudan in dawlada Tansaaniya iyo Jabhada NRA ay ku kala tageen doonista dawlada Tansaaniya ay rabtay in xukunka ay dib ugu soo celiso Milton Oboto. Dedaalo badan ka dib, talaabooyinkii soo nooleyntii Ururka Bulshada Bariga Afrika waxaa ka mid ahaa:

- *Dib-u-Habayntii Ururka*: Dadaalka dib u soo noolaynta iskaashiga gobolka wuxuu bilaabmay horraantii 1990-aadkii. Geedi-socodkaa waxaa horseeday rabitaanka kor u qaadista isdhexgalka dhaqaalaha, horumarinta nabadda iyo xasilloonida, iyo kobcinta horumarka gobolka.

- *Heshiiskii Dhismaha Ururka*: Uuru goboleedka Bulshada Bariga Afrika waxa si rasmi ah dib loo aasaasay Sodonkii bishii Kow-iyo-Tobnaad ee sanadkii 1999 kii (November 30, 1999), ka dib markii heshiiska ay saxeexeen aasaaska urur goboleedka Bulshada Bariga Afrika. Heshiiskan waxaa uu dhaqan-gal noqday July 7, 2000, xubnihaha ururkuna waxay kala yihiin sidan – Kiiniya, Yugaandha iyo Tansaaniya oo ahaa xubnihii seeska u dhigay; dalalka Ruwaandha iyo Burundhi oo kusoo biiray 2007dii; Dalka Koonfurta Suudaan oo kusoo biirtay 2016; dalalka Jamhuuriyada Dimuquraadiga ah ee Koongo iyo Dawlada Fadaraalka ah ee Soomaaliya ayaa iyaguna ku biiray 2023 iyo 2024.

### *3.2.3. Horumarinta iyo Ballaadhinta Urur Goboleedka (2000-ilaa hadda)*

Intii ka dambeysay sanadkii 2000 oo ahayd markii heshiiska aasaaska Uur Goboleedka Bulshada Bariga Afrika la saxeeyey, waxa dhacay isbedel balaadhan oo lagu xaqiijinayo isdhexgal dhaqaale iyo siyaasad mideysan oo gobolkani gaadho. Talaabooyinka xiligan ururku u qaaday dhanka ka midho-dhalinta ujeedooyinkiisa wxaa ka mid ahaa:

- *Qaab-dhismeedka iyo Hogaanka Ururka:* waxa seeska loo dhigay qaab-dhismeed cad iyo hogaan sare oo agaasima hawlaha Ururka oo fadhigoodu yahay magaalada Caruusha ee dalka Tansaaniya. Sidoo kale waxa la sameeyey hay'ado u xilsaaran hawlo gaar ah sida ganacsiga, kaabayaasha dhaqaalaha, iyo caafimaadka.

- *Suuq Guud iyo Mideynta Kastamada*: mid ka mid ah guulaha ugu waaweyn ee Ururka Bulshada Bariga Afrika ayaa ahaa aasaaska Suuq Guud iyo Mideynta Kastamada sannadkii 2005, kaas oo ujeedadiisu ahayd in lagu hormariyo ganacsiga xorta ah ee ka dhexeeya dalalka xubnaha ka ah iyada oo laga saarayo canshuuraha iyo xayiraadaha aan tacriifada ahayn.[22] Urur Goboleedka Bulshada Bariga Afrika ayaa sidoo kale bilaabay Suuqa Guud sanadkii 2010kii, taas oo u saamaxday dhaqdhaqaaqa xorta ah ee badeecadaha, adeegyada, iyo isu-socodka xorta ah ee dadka ku nool dalalka xubnaha ka ah ururkan.

---

[20] Ciidanka Iska-Caabinta Wadaniga ah 'National Resistance Army (NRA)' waa jabhadii uu hogaaminayay Madaxweynaha haatan talada dalka Yugaandha haya ee Yuweri Kagute Museveni. Sidoo kale waxa ka mid ahaa Madaxweynaha haatan haya talada dalka Ruwaandha ee Paul Kagame (Kagame waa Qoomiyada Tuutsiga ee ku filiqsan dalalka Ruwaandha, Burundhi, Gobolada koonfurta iyo waqooyyiga Kivu Koongo, iyo waliba degmada Kabale ee dalka Yugaadha. Tuutsigu sida Mayankolaha waxa uu ka mid yahay qoomiyadaha san-dhuubta ah ee qaarada Afrika).

[21] Mayankole waa qoomiyada talada dalka haysa ee dagan galbeedka dalka Yugaadha. Waa qoomiyad ka mid ah qoomiyadaha Sandhuubta ah eek u dhaqan qaarada Afrika.

[22] Tani waxay dhigaysaa Alaabta u socota Gobolkan hal mar ayuun bay cashuurku dhacaysaa mid ka mid ah dalalka xubnaha ka ah, tani waxay Meesha ka saaraysaa in shixnad la cashuuro laba goor ama ka badan.

- *Mideynta Lacagta iyo Isbahaysi Siyaasadeed:* Ururka Bulshada Bariga Afrika ayaa qeexday qorshe hawleed qeexan oo ku wajahan isdhexgalka dhamaystiran oo ay ku jiraan mideynta lacagta iyo ugu dambeyntii Isbahaysi Siyaasadeed. Ururkan ayaa goostay in yoolka fog uu gaadho xaqiijinta in hal lacag ay samaystaan taas oo u baahan gorgortan qoto dheer iyo diyaargarow adag.
- *Mashaariicda Isdhexgalka Gobollada*: Ururku waxa uu ka qayb qaadatay mashaariic goboleedyo kala duwan si kor loogu qaado kaabayaasha dhaqaalaha, sida horumarinta shabakadaha gaadiidka (jidadka, tareenada, iyo dekedaha) iyo mashaariicda tamarta. Ururku waxa kale oo uu ka shaqayaa siyaasadaha gobolka ee la xidhiidha caafimaadka, waxbarashada, iyo maaraynta deegaanka.

#### *3.2.4. Caqabadaha iyo Fursadaha Mustaqbalka*

- *Caqabadaha Siyaasadeed iyo Dhaqaale*: Gobolku waxa uu wajahayaa caqabado ay ka mid yihiin kala duwanaanshaha siyaasadeed ee u dhaxeeya dalalka xubnaha ka ah, heerarka kala duwan ee horumarka dhaqaalaha, iyo arrimo la xidhiidha kaabayaasha dhaqaalaha iyo is-dhexgalka. Kala duwanaanshaha siyaasadaha qaran iyo arrimaha mudnaanta u leh dalalka xubnaha ka ah uruka ayaa mararka qaar dib-u-dhigi karta horumarka iyo hiigsiga gobolka.
- *Ballaadhinta iyo Isdhexgalka:* Ururka Bulshada Bariga Afrika ayaa muujisay xiisaha ay u leedahay balaadhinta xubnaheeda iyo isdhexgalka qoto dheer. Sanadkan ugu dambeeyey waxa ay aqbashay xubinimada dawlada aan cagaha ku taagnayn ee Soomaaliya oo saddex dal (Burundhi, Kiiniya, iyo Yugaandha) oo ururkan ka mid ahi ay ku jiraan shanta[23] dal ee ciidamada militarigu ka joogo nabad ilaalinta.
- *Saameynta Caalamiga ah iyo Kuwa Goboleed:* Ururku waxa uu door weyn ka qaadataa dibloomaasiyadda gobollada iyo horumarinta dhaqaalaha. Tallaabooyinka ururku waxa ay gacan ka geystaan xasilloonida iyo koboca Bariga Afrika, ururkuna wuxuu ku lug leeyahay iskaashiyo ballaadhan oo ka mid ah gobolada qaarada iyo kuwa caalamiga ah ba.

Gebogabadii Ururka Bulshada Bariga Afrika ayaa sii wadda inay isbedelo iyo dedaalada u uku doonayo xaqiijinta isdhexgal dhamaystiran, iyo iskaashiga xubnaha dhexdooda si wax looga qabto caqabadaha horyaala horumarka gobolka bariga Afrika iyo sido kale ka faaidaysiga fursada xubnaha gobolku haystaan ee wax ka taraya xaqiijinta himilada iyo higsiga Ururka Bulshada Bariga Afrika.

## 4. HIRDANKA QUWADAHA CAALAMKA, AWOODAHA SOO KORAYA IYO DABEYLAHA JUQURAAFIGA-SIYAASADEED EE GEESKA AFRICA IYO BADA CAS

Cutubkan waxaan ku eegi doonaa arrimo door ah oo ku aadan tilmaamaha gobolkan Geeska Afrika, muhiimadiisa iyo hirdanka quwadaha caalamka iyo kuwa awoodaha soo koraya ku dhexmaraya gobolka Geeska Afrika iyo Badda Cas. Waxaan sharax kooban oo faham waafiya ka siiya akhristaha ka bixin doonaa tiirarka cutubkan oo ay ka mid yihiin Juquraafiga, Siyaasada Juquraafiga, Juquraafi-Siyaasad,

[23] Burundhi, Itoobiya, Jabuuti, Kiiniya, iyo Yugaandha.

Juquraafi-Israatajiyad, iyo Juquraafi-Dhaqaale. Si loo helo faham buuxa oo ku saabsan sida siyaasadda caalamiga ah iyo arrimaha dibadda ay u shaqeeyaan, waxaa muhiim ah in la falanqeeyo dhaqdhaqaaqa qalafsan ee goobtan juqraafiyeed. Markaan u guntano fikradahan farsamo, waxaan si fiican u qadarin karnaa isdhexgalka kakan ee ka dhexeeya gobolkan, hirdanka quwadaha caalamka iyo saameynta dhaqaalaha.

### 4.1. Juquraafiga

Fahamka kufilan ee siyaasadda arrimaha dibadda oo urur goboleedyaduna hoos imanayaan ayaa lagamamaarmaan ka dhigaya in si qoto dheer loo falanqeeyo juquraafiga, maadaama oo uu door muhiim ah ka ciyaaro qaabeynta muuqaalka xidhiidhka caalamiga ah. Culimada qaar ayaa ku dooday in shaqada koowaad ee Juquraafiga ay tahay hurinta colaadaha iyo dagaalada. Sidan oo kale, baadhitaan kasta oo lagu sameeyo siyaasadda arrimaha dibadda waa in si taxadar leh looga fiirsado arrimaha juqraafiga ee doorka ka ciyaara. Juquraafiga kaliya maaha cilmi laakiin sidoo kale waa farshaxan; ma aha tilmaan kaliya ee waa fasiraad; ma aha aqoon kaliya ee waa xigmad.[24] Juquraafiga wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa fahamka arimaha caalamka siyaabo dhowr ah, oo ay ku jiraan - Wacyiga duleed,[25] Fahamka Dhaqanka,[26] Ku-tiirsanaanta Dhaqaalaha,[27] Wacyiga Deegaanka,[28] Socdaalka iyo Tirrada Dadka,[29] Masiibooyinka Dabiiciga ah iyo Gargaarka Bani'aadamnimada,[30] Juqraafiga Caafimaadka iyo Cudurrada,[31] Maareynta Kheyraadka,[32] Gaadiidka iyo isku xirnaanta,[33] iyo Siyaasada Juqraafiga.[34]

Juquraafiga ayaa qeexaya wadamada iyo muhiimadooda; Si kale haddii loo dhigo, waa 'Sababta Goobta' – in la fahmo halka ay waxyaalahu kaga yaalaan oogada dhulka, sida ay u habaysan yihiin, iyo sida ay taasi u saameyso nolosha dadyowga. Waxaa jira tusaalooyin aan la soo koobi karin oo muujinaya habka uu Juquraafigu u qoorqooro dhacdooyinka, dagaalada, ganacsiga, guuritaanka iyo socdaalka dadka, kobaca xadaaradaha iyo boqortooyooyinka. Juquraafigu wuxuu sidoo kale saameeyaa arrimaha ka yimaada siyaasadda, horumarka, iyo dhaqaalaha. Goobta juqraafiyeed ee dal ama gobol waxa uu saameyn karaa xidhiidhka ganacsiga, siyaasadda, iyo dhaqaalaha dalka ama gobolka.

---

24 Hartshorne 1959, p.2

25 Juquraafigu waxa uu inaga caawiyaa in aan fahanno astaamaha duleed ee aduunka iyo kala duwanaanshihiisa.

26 Juquraafigu wuxuu muujinayaa kala duwanaanshaha dhaqanada iyo dhaqamada u gaar ah gobolada aduunku ka kooban yahay.

27 Juquraafigu wuxuu saameeyaa dhaqdhaqaaqyada dhaqaalaha isagoo doorweyn ku leh jaangoynta ganacsiga caalamiga ah, maareynta kheyraadka, iyo fahamka farqiga dhaqaale ee gobolka.

28 Juquraafiga iyo deegaanku aad ayay isugu xidhan yihiin. Juqraafiga deegaanku wuxuu muhiim u yahay la tacaalida isbeddelka cimilada, xaalufka, iyo ilaalinta noolaha. Arrimaha Juqraafiyeed ayaa door muhiim ah ka ciyaara fududeynta iskaashiga caalamiga ah ee arrimaha deegaanka.

29 Juquraafiga wuxuu saameeyaa socdaalka, tirade dadka, iyo dhaqanka.

30 Ogaanshaha iyo ka dheregsanaanta tilmaamaha Juqraafiga ee meelaha masiibooyinka u nugul ayaa muhiim u ah u diyaargarowga aafooyinka iyo bixinta gargaarka gobollada iyo dadyowga ay dhibaatadu saameysey.

31 Juquraafigu wuxuu saameeyaa fiditaanka cudurada iyo kala duwanaanshaha daryeelka caafimaadka. Aqoonta juqraafiga caafimaadku waxay caawisaa wax ka qabashada dhibaatooyinka caalamiga ah waxayna hagaajisaa helitaanka daryeelka caafimaadka.

32 Juquraafiga ayaa go'aamiya qaybinta kheyraadka dabiiciga ah. Maareynta kheyraadka wax ku oolka ah ayaa muhiim u ah waaritaanka horumarka iyo si haboon u manaafacaadsiga khayraadka.

33 Juquraafiga ayaa qaabeeya waddooyinka gaadiidka, kaabayaasha, iyo ganacsiga.

34 Siyaasada juqraafiga ayaa muhiim u ah xidhiidhka caalamiga ah maadaama ay saameyn ku leedahay dhaqdhaqaaqa juqraafiyeed, iskahorimaadyada, iyo iskaashiga quruumaha dhexdooda. Diblomaasiyiinta, siyaasad-dejiyeyaasha, iyo ururada caalamiga ahi waa inay fahmaan sida uu u qaybsan yihiin xuduudaha, dhulalka, iyo dawladahu.

Juquraafiga marka aan ka hadlayno waxaan u kala qaadaynaa shan mawduuc - 1) Goobta Juquraafi;[35] 2) Tilmaamaha iyo astaamaha Bogcada;[36] 3) Isdhexgalka Bini'aadamka iyo Deegaanka;[37] 4) Dhaqdhaqaaqa;[38] 5) Gobollada.[39] Marka la soo koobo, juquraafiga waxaa laga helaa aqoonta aasaasiga ah iyo macnaha guud ee lagama maarmaanka u ah fahamka isdhexgalka kakan ee barta dhuleed, dhaqanka, dhaqaalaha, deegaanka, iyo siyaasadda ee qaabeeya xidhiidhka caalamiga ah iyo iskaashiga. Juquraafigu waxa uu ka caawiyaa shakhsiyaadka iyo ummadaha inay qiimeeyaan kala duwanaanta adduunka iyadoo la aqoonsanayo caqabadaha iyo fursadaha ku lamaan goobta ay aduunka kaga yaalaan. Aqoonta juquraafigu waa mid aad ugu muhiim ah fahamka arrimaha caalamka ee dadka iyo dawladahaba.

### 4.2. Juquraafiga Siyaasadeed

Mawduuca Juqraafiga siyaasadeed waxa uu khuseeysaa natiijooyinka aan sinnayn ee hab-socodka siyaasadda iyo xidhiidh is-dhaafsiga ka dhexeeya hababka siyaasadda iyo qaab-dhismeedka goobeed. Waxa ay inta badan mawduucani darsaa ama baadhitaan ku sameeyaa hawlaha siyaasadeed, sida go'aan-qaadashada, fulinta siyaasaddaha, iyo xidhiidhka awoodeed, loogu qaybiyo meel kasta iyo sida ay u qaabeeyaan habka maamul iyo qaab-dhiska bulsheed. Ujeeddada Juqraafiga siyaasadeed waa in la helo aragtiyo ku aaddan cabbirrada siyaasadda, isdhexgalka siyaasadda iyo juqraafiga, iyo saamaynta sinnaan la'aanta deegaanka iyo kala duwanaanshaha natiijooyinka siyaasadeed.

Barashada cilmiga juqraafiga siyaasadu waa baadhista habka maamulka aadamaha (dawladaha) faracyada iyo unug-hoosaadyada siyaasadeed, iyo kala xadeynta siyaasada sida dawladaha iyo quruumaha. Muhiimada cilmigan waxa tilmaamaysa awooda uu u leedahay muujinta iyo qeexida cabbirrada siyaasadeed ee meel ama goob gaar ah.[40] Juquraafiga siyaasadeed ayaa muhiim u ah xidhiidhka caalamiga ah, sababtoo ah wuxuu qeexayaa baaxadda xidhiiidhkaas, wuxuu go'aamiyaa xuduudaha u dhexeeya dawladaha, waxa uu sidoo kale saameyn weyn ku leeyahay go'aamada istaraatiijiga ah ee ay gaadhaan waddamadu. Intaa waxaa dheer, waxa uu muuqaal guud inaga siiyaa qaabka iyo doorka ay dawladuhu ay isula falgalaan. Barashada cilmigan waxa kale oo ay faa'iido u leedahay in la calaamadiyo xadka juqraafiyeed ee sharciga caalamiga ah iyo sharraxaadda taariikhda iyo horumarka siyaasadda caalamka.

[35] Goobta Juquraafi – waa booska dhulka guudkiisa ah (Sugan/U dhow). Barashada juqraafigu waxay ka bilaabataa aqoonsashada barta ay goob kaga taalo dhulka guudkiisa. Goobuhu waxay leeyihiin meelo qumman ama sugan oo tilmaamaya, iyo meelo u dhow ama qiyas beenaad ah oo bar ama goob kaga duwanaan karto goob kale. Tusaale ahaan, magaalo-xeebeedda Saylac ee Somaliland waxay leedahay bar/meel dhammaystiran oo lagu tilmaami karo khariidad kasta oo aasaasi ah. Waxa kale oo ay leedahay tilmaamo kale oo xudun u ah nidaamka istiraatijiyadeed iyo dhaqaale ee ku salaysan sifooyinkeeda iyo kaalinta ay ku leedahay suuqa adduunka.

[36] Tilmaamaha iyo Astaamaha Bogcada - Goobuhu waxay leeyihiin astaamo duleed iyo kala duwanaansho dadeed oo ka dhigaya ama jaangoynaya kala duwanaanshahooda. Juquraafiga wuxuu xooga saarayaa fahamka labada arrimood (astaamaha bogcada iyo dadka goobta) iyo maxsuulka is-dhexgalka labadaa arrimood.

[37] Isdhexgalka Dadka iyo Deegaanka ayaa qaabeeya muuqaalka goobi yeelato. Muuqaalka dhulka ee waqtigani kaliya maaha midka duleed ee Alle sameega ah, laakiin Bani'aadamku waxay u saameeyaan meel kasta oo dhulka ah qiimo ka duwaya goobaha kale ee la nooca ah hadba sida ay kaabayaasheedu u horumaraan ayaana kordhisa qiimaha iyo muhiimada bogcadaas. Juqraafiga goobaha waxaa door ka qaata heerka ay bani'aadamku u saameeyeen deegaankooda.

[38] Dhaqdhaqaaqa – dhaqdhaqaaqa iyo falgalka bani'aadamka iyo dhulka. Dunida casriga ah waxaa kordhay isla falgalka baaxada leh ee bani'aadamka iyo dhulka. ka dib waa mid ka mid ah isdhexgalka weyn ee ka dhexeeya meelaha. Dhaqdhaqaaqani waa mid juqraafigu gacan ka gaystay, hadday tahay isgaadhsiin ama socdaalada badaha guudkooda la isaga gooshayo iyada oo la adeegsanayo Maraakiib.

[39] Gobolada - sida ay u samaysmaan iyo sida ay isu beddelaan goboladu. Tilmaamaha juquraafiyeed ee muhiimka ah waa gobolka. Gobolku waa unug kasta oo ka mid ah dhulka guudkiisa oo leh astamo juquraafiyeed oo ay ka mideysan yihiin.

[40] Qeexitaankaa waxaan kasoo qaatay qaamuuska Mariyam Webister (The Merriam-Webster dictionary)

Waxa uu iftiiminayaa ujeedooyinka iyo qaababka iska-horimaadyada caalamka, waxa aanu inaga caawiyaa in aan fahanno saamaynta arrimo dal kale ama gobol kale ka dhacay ay inagu yeelanayaan edegaynta[41] dunida awgeed.

Juquraafiga siyaasadeed ayaa door muhiim ah ka ciyaara qaabeynta xidhiidhka caalamiga ah iyo khilaafyada ay keenaan xaaladahan midkood - istaraatiijiyad juqraafi-Siyaasad;[42] qaybinta kheyraadka;[43] xuduudaha iyo murannada dhuleed;[44] qaybinta dadweynaha;[45] cimilada iyo deegaanka;[46] u dhowaanshaha juqraafiga;[47] goobaha istiraatiijiga ah iyo waddooyinka.[48] Fahamka juqraafiga siyaasadeed ee gobolku waxa uu siinayaa aragtiyo qiimo leh oo ku saabsan xeeladaha juqraafiyeedka, xulafada, iyo iskahorimaadyada kuwaas oo qaabayn kara xidhiidhka caalamiga ah. Waxay muhiim u tahay cilmiga siyaasadda, xiriirka caalamiga ah, iyo daraasaadka istiraatiijiga ah.

### 4.3. Juquraafi-Siyaasad[49]

Juquraafi-Siyaasad[50] waa barashada xidhiidhka ka dhexeeya juqraafiga, siyaasadda, iyo arrimaha caalamiga ah. Waxa uu tixgalinayaa sida astaamaha duleed ee juqraafi ahaan iyo siyaasadu ay u saameeyaan isbedelada awooda iyo dhacdooyinka caalamiga ah iyo sida jilayaasha siyaasadu u isticmaalaan booska iyo muhiimada juqraafiga si ay danahooda u gaadhaan. Barashada Juquraafi-Siyaasadu waxay ina dhaxalsiisaa xogogaal u noqoshada doorka tilmaamaha juqraafiga dhulka ee siyaasadda iyo xidhiidhka caalamiga ah. Waxaa muhiim ah in la ogaado in Juquraafi-Siyaadu inta badan ay la xidhiidho

[41] Edegeyn waxa aan u isticmaalay sawir Globalization

[42] Istaraatiijiyada Juquraafi-Siyaasad: Dalalku waxay istiraatiijiyeeyaan ficilladooda siyaasadeed iyo kuwooda ciidan iyadoo ku saleysan faa'iidooyinkooda ama xaddidnaanta juqraafi ahaaneed. Tusaale ahaan, dalalka leh xeebaha ballaadhan ayaa laga filayaa in ay diiradda saaraan awoodda badda iyo dhismaha ciidan badeed oo xoogan, halka wadamada xidhan (ee aan bad lahayn) ay awooda saaraan difaaca dhulka ku salaysan (dhismaha ciidanka dhulka iyo qaybihiisa kala duwan).

[43] Qaybinta Kheyraadka: qeybinta juquraafi ee kheyraadka sida saliidda, macdanta iyo biyaha ayaa inta badan jaangooya xidhiidhka caalamiga ah. Wadamada kheyraadka qaar hodanka ku ah ayaa laga yaabaa in ay saamayn weyn ku yeeshaan madalaha caalamiga ah, waxaana inta badan khilaafyadu ay soo baxaan marka khayraadkaas lagu tartamo ama si aan cadaalad ahayn loo qaybiyo.

[44] Khilaafaadka dhulalka iyo Xuduudaha: Goobta iyo aqoonsiga xuduudaha qaranku waxay inta badan door weyn ka qaataan colaadaha caalamiga ah. Muranka ku saabsan gobanimada dhuleed, soo-qeexidda xuduudda iyo maamulida gobolada ayaa keeni karta xiisado circa isku shareera oo mararka qaar isu bedelada dagaal toos ah hadaan la xakamayn.

[45] Siyaasadda iyo xidhiidhku waxaa saameyn ku yeelan karaa tirrada dadka ama dhaqanada dadyowga. Dalalku waxay taageeri karaan siyaasadaha dalalka kale ee la jaanqaadaya ama ku aadan isirka ama dhaqanak qaybo ka mid ah dadkooda.

[46] Muhiimadda ay u leeyihiin arrimaha deegaanka iyo isbeddelka cimilada ayaa si xawli ah ugu kordhaya siyaasadda caalamka. Arrimaha caalamiga ah sida isbeddelka cimilada ayaa horseedi kara muranno ka dhan ah mas'uuliyadda iyo wadaagga culaysyada.

[47] Dalalka deriska ah ay inta badan ay ka dhaxeeyaan taariikho, dhaqaale iyo bulsho isku xidhan, taasoo horseedi karta iskaashi iyo iskahorimaad labadaba. Masaafada dhuleed ayaa saamayn weyn kue leh xidhiidhka; dalalka isku dhow waxay leeyihiin xidhiidh adag oo ay sabab u tahay danaha ay wadaagaan iyo sahlanaanta isu socodka iyo saad isweydaarsiga.

[48] Maamulida Goobaha istiraatiijiga juqraafiyeed leh sida dhuumaha (dhabooyinka muhiimka ah ee isku xidha dalalka iyo dhaqdhaqaaqa dadka iyo ganacsiga), dhulka jooga sare leh, iyo marrinada ganacsi waxay si weyn u saamayn karaan xidhiidhka caalamiga ah. Tusaale ahaan, Xakamaynta Kanaalada cidhiidhiga ah ee Suweys (Suez) ama Xurmus (Hormuz) waxay yeelan kartaa saameyn aad u weyn oo juquraafi-Siyaasad.

[49] Juquraafi-Siyaasad waxaa uu qoraalkayga ugu jiraa waa kalmada afka ingiriisida lagu yidhaa ‘Geopolitics’ halka Juquraafiga Siyaasadu noqonayo ‘Political Geography’. Waxaan rajaynayaa akhriste in aad ila socon doonto oo aanad isku khaldi doonin labada erey maadaama oo ay aad isugu soo noqnoqonayaan meelo badan oo qormadan ka mid ah.

[50] Jururaafi-Siyaasad waxay asal ahaan ka soo jeeda ereyada Giriigga ah ee "γῆ gê – Arlada ama Dhulka iyo 'πολιτική politikḗ' - siyaasad". Waa barashada aqoonta iyo cilmi-baadhista saameynta juqraafiga dhuleed (bini'aadamka iyo Astaamaha Duleed ee Dhulka) ay ku leedahay siyaasadda iyo xidhiidhka caalamiga ah.

dhacdooyinka dhabta ah ee aduunka (tusaale ahaan, dagaalada, colaadaha, iwm), halka Juquraafiga Siyaasadeed loo tixgelin karo kaliya mawduuc aqooneed (takhasus waxbarasho). Waxa kale oo la odhan karaa Juquraafi-Siyaasadu waxay si dabiici ah ugu taxaluqdaa khilaafka dawladaha.

Sida uu qabo Colin Flint, halganka loogu jiro gacan ku haynta goobaha juqraafiyeed ee leh cabbir caalami ah iyo mid aduunyo, iyo adeegsiga juqraafi ee goobtaas ayaa horseedi karta faa'iido siyaasadeed.[51] Juquraafi-Siyaasadu waxa ay arrimaha ka eegtaa dhanka isticmaalka awoodda: sida wadamada iyo kooxaha kale ugu tartamayaan si ay gacanta ugu dhigaan goobaha muhiimada gaarka ah u leh beesha caalamka. Gacan ku haynta goobahan ayaa loo arkaa in ay ka caawiso wadamada iyo kooxaha inay gaadhaan hadafkooda. Juquraafi-Siyaasadu mar walba waxaa lagu eegaa indho caalami ah, taasoo la macno ah in arrimaha la eegayo ay ku xidhan yihiin hirdanka iyo iskaashiyada caalamiga ah.[52] Flint ayaa qaba saddexda nooc oo Juquraafi-Siyaasad oo kala ah ka qadiimiga, midka xasaasiga ah, iyo kan dumarnimada.[53]

Muhiimadda juquraafi-siyaasadu waxa ay ku jirtaa awoodda ay u leedahay inay kaa caawiso fahamka iyo sharraxaadda dhacdooyin badan oo siyaasadeed, dhaqaale, ciidan iyo isbeddelada heer caalami ah. Qaar ka asbaabaha muhiimka ka dhigay Juquraafi-Siyaasada waxaa ka mid ah - Fahamka isbedelada awoodda;[54] Falanqaynta xidhiidhka caalamiga ah;[55] Odoroska dhacdooyinka mustaqbalka;[56] Dejinta siyaasadda arrimaha dibadda;[57] iyo Bixinta macnaha dhacdooyinka dhaqaalaha.[58] Marka lagu eego aragti caalami ah, Juquraafi-Siyaasadu waa udub dhexaadka fahamka xidhiidhka ka dhexeeya wadamada, gobolada, iyo guud ahaan caalamka. Nuxur ahaan, Juquraafi-Siyaasad waa barashada sida awoodduhu u qaybsan yihiin loona ilaaliyo garoomada ama masraxyada caalamka. Waxay ku salaysan tahay fikradda ah in dawladaha iyo hay'adaha siyaasadeed ay si dabiici ah ugu xidhan yihiin deegaanka duleed ee bogcad dhulka ka mid ah iyo xidhiidhka ka dhexeeya dawladuhu uu u qaabeeyaan una muujiyaan jawiga juqraafiyeed. Si waafi ah hadaan u nidhaahno, waxay falanqaysaa saamaynta qodobbada juqraafi-Siyaasadeed ay ku yeelato xidhiidhka caalamiga ah iyo hab-dhaqanka dawladaha. Waxa ay door ka ciyaartaa sida dawladaha iyo quruumaha ay isula falgalaan iyo sida go'aannada looga gaadho dunidan la edegeeyey.

Juquraafi-Siyaasadu waxay door muhiim ah ka ciyaartaa fahamka ujeedooyinka ka dambeeya ficilada siyaasadeed ee muhiimka ah – sida heshiisyo ganacsi oo ballaadhan ama ficillada ciidamada ee adduunka oo dhan. Waxa kale oo ay awood inoo siin kartaa in aan si fiican u fahanno cawaaqibka juqraafiyeed ee isbedelka cimilada ama khilaafaadka gobolka. Nuxur ahaan, juquraafi-siyaasadu waxa ay naga caawisaa

---

[51] Flint, E. 2016. p.16

[52] Ibid. p.36

[53] Flint, C. 2021.

[54] Juquraafi-siyaasadu waxay bixisaa aragtiyo ku saabsan qaybinta awoodda iyo saamaynta ka dhexeeya jilayaasha kala duwan ee masraxyada iyo madalaha adduunka, oo ay ku jiraan dawladaha, shirkadaha caalamiga, iyo jilayaasha aan dowliga ahayn.

[55] Juquraafi-Siyaasadu waxay bixisaa qaabka aynu ku falanqaynayno xidhiidhka ka dhexeeya dalalka iyo sida uu juqraafigu u qaabayn karo xidhiidhkaas.

[56] Juquraafi-Siyaasadu waxa ay ka caawisaa falanqeeyayaasha iyo siyaasad-dejiyeyaasha aqoonsashada goobaha xasaasiga ee mashaqooyin ka dhalan karaan iyo in ay fahmaan saamaynta isbeddeladu ku keeni karaan saaxadda siyaasadeed ee caalamka.

[57] Falanqaynta Juquraafi-Siyaasada waxaa badanaaba adeegsada dowladaha iyo jilayaasha kale si ay u waraabiso go'aamada siyaasadda dibedda iyo in jaangoynta talaabada ugu haboon ee lagaga jawaabayo xaalad gaar ah.

[58] Bixinta macne mug leh oo ku aadan dhacdooyinka dhaqaalaha: Juquraafi-Siyaasadu waxay gacan ka gaysan kartaa sharaxaadda sida arrimaha siyaasadeed iyo juqraafi u saameeyaan maxsuulka iyo natiijooyinka dhaqaalaha, sida habsami u socodka ganacsiga, maalgashiga, iyo hantida.

in aan fahanno guurguurka awooda caalamiga ah, iskahorimaadyada, iyo siyaasadaha horumariya adduunkeena. Juquraafiga waa curiye aasaasi ah oo qaabeeya Juquraafi-Siyaasada.

Waxay saamayn ku yeelataa habka ay dawladuhu isula falgalaan waxayna saamaynaysaa xeeladahooda dhaqaale, ciidan iyo siyaasadeed. Waa kuwan siyaababaha qaarkood juquraafiga u saameeya geopolitics: kheyraadka dabiiciga ah,[59] waddooyinka ganacsiga,[60] caqabadaha asbaabaha dhuleed,[61] iyo xuduudaha.[62] Muuqaalka juquraafi-Siyaasada aduunka waxa qaabeeya taariikhda ummadeed, dhaqankeeda, hogaankeeda siyaasiga ah, khubaradeeda, aqoonyahankeeda iyo ra'yiga bulshadaas.[63] Barashada juqraafiga siyaasadeed ayaa diiradda saaraya sida dawladaha iyo xoogagga siyaasadeed ay uga dhaadhiciyaan muwaadiniinta aragtidooda juqraafi-Siyaasad iyo istiraatiijiyadda siyaasadda dibadda.[64] Awoodda horumarka ee aagagga xuduudaha ayaa lagu qiimeeyay iyadoo la falanqeeyay xidhiidhka dhaqaalaha dibadda. Waxtarkooda waxaa lagu qiimeeyay qaabaynta qodobo door ah oo ku salaysan dheelitirka dhoofinta, soo dejinta, iyo sidoo kale isudheellitirka waaxadaha.[65] Sida uu qabo Pickering juqraafiga iyo siyaasadda arrimaha dibadda waxay leeyihiin xidhiidh adag, oo inta badan si khaldan loo fahmay. Hababka casriga ah ee juqraafiga ayaa muhiim u ah fahamka xidhiidhka ka dhexeeya juqraafiga iyo siyaasadda Arrimaha dibadda. Fahamkan ayaa lagama maarmaan u ah in si wax ku ool ah wax looga qabto arrimaha muhiimka ah ee caalamiga ah sida isbeddelka cimilada, dagaalka, iyo nabadda.[66]

Marka la falanqeynayo xaaladaha juqraafi-Siyaasad, waxaa lama dhaafaan ah in la tixgeliyo afar nooc oo waaweyn oo dhaqanka waddanka ah. Noocyadan qadiimiga ah waxaa loo yaqaanaa Isku-filnaan,[67] Ku tiirsanaan quwadeed,[68] Iskaashi-Wadareed,[69] iyo Is-kaashi Laba-Geesood.[70] Fahamka afartan nooc ee hab-dhaqanka waddanku, waxa uu si fiican u lafaguri karaa oo macno u samayn kara xaaladaha juqraafiyeed iyo go'aannada ay gaadheen dalal kala duwan. Sidoo kale Juquraafi-Siyaasada ayaa ku tiirsan isticmaalka istaraatajiyadeed ee qalabyo kala duwan si loo gaadho ujeedada qaranka. Qalabyadaas ayaa

---

[59] Juquraafiga ayaa go'aaminaya qaybinta kheyraadka dabiiciga ah sida saliidda, macdanta iyo biyaha. Dawladaha leh kheyraad badan ayaa haysta fursad aad u sareysa oo ay kaga faa'iideysan karaan gaadhista ujeedooyinkooda dhaqaale iyo mid siyaasadeed.

[60] Juqraafiga waxa uu sidoo kale saameysaa wadooyinka ganacsiga, kuwaas oo door muhiim ah ka ciyaara ganacsiga caalamiga ah. Dowladaha gacanta ku haya kanaalada iyo dariiqyada istiraatiijiga ah ee ganacsiga, sida Suweys ama Baanama (Panama Canal), ayaa saameyn weyn ku leh ganacsiga caalamka.

[61] Buuraha, lama-degaanadalama-degaanada, iyo badweynadu waxay ciyaaraan door kala xidha xidhiidhka dawladauhu inay kala go'naadaan. Buuraha, lama-degaanada, iyo badweynada ayaa yareeya hawlaha ciidan, dhaqaale iyo isu socodka dadka ee deegaankaas.

[62] Juqraafigu waxa uu saameeyaa xuduudaha u dhexeeya dawladaha, taasoo horseeda xiisadaha juqraafi-siyaasadeed ee ka taagan xuduudaha biyaha iyo xariiqaqa xadeed ee dhulka.

[63] Kolosov, 2011

[64] Kolosov et al., 2018

[65] Bilchak, 2011

[66] Steve Pickering, 2017.

[67] Isku-filnaan dhaqaale (Autarky) waxaa loola jeedaa u janjeedhkaa inuu waddanku isku filnaado oo uu ku tiirsanaado ganacsiga iyo iskaashiga caalamiga ah. Habkani wuxuu inta badan ku lug leeyahay yeelashada dal ee sharciyo adag iyo canshuuraha si loo ilaaliyo suuqyada gudaha.

[68] Ku-tiirsanaan quwadeed (Hegemony), waa u janjeedhka waddan awood leh inuu ku dhaqmo saamaynta uu ku leeyahay waddamada kale oo uu u qaabeeyo arrimaha caalamiga ah sida ay dantiisu tahay. Habkani wuxuu keeni karaa xurguf iyo iska hor imaad ummadaha kale.

[69] Is-kaashi Wadareed (Multilateralism) waxaa lagu gartaa iskaashiga ka dhaxeeya ama ay qayb ka yihiin dalal badan si loo gaadho ujeedooyinka guud ee ay ka mideysan yihiin. Habkani wuxuu ku lug leeyahay ka wada shaqaynta arrimaha sida ganacsiga, amniga, iyo arrimaha deegaanka.

[70] Is-Kaashi Laba-geesoodka (Bilateralism) waa iskaashi ama xidhiidh ka dhexeeya laba dal oo ka wada shaqeynaya arrimo gaar ah. Habkani wuxuu noqon karaa mid faa'iido leh marka la isku dayayo in laga wada xaajoodo heshiisyo adag ama wax ka qabashada caqabadaha gaarka ah.

loo kale qaadaa saddex nooc oo waaweyn oo kala ah Amniga Qaranka, Dhaqaalaha, iyo Xisaabaadka. Isku dhafka siyaasadda, dhaqaalaha, iyo nidaamyada maaliyadeed waxay caddayn kartaa inay tahay istaraatiijiyad faa'iido leh. Tusaale ahaan, fikradda gaadiidka iyo rarka, ayaa u sahla in shirkadaha ajnabiga ah ay ku helaan ogolaansho sharci ah si ay alaab ugu raraan gudaha waddan. In kasta oo ay jiraan heshiisyo ganacsi oo dhinacyo badan leh, waddamo dhowr ah ayaa xaddida hababka gaadiidka kala duwan iyo rarka dalkooda gudihiisa.

Ururada caalamiga ah, sida Qaramada Midoobay, waxay adeegsadaan qalabyo kala duwan oo juqraafiyeed si ay u gaadhaan ujeedooyinkooda. Qalabkan waxaa ku jiri kara gorgortan diblomaasiyadeed, cunaqabatayn dhaqaale, ama xitaa xoog ciidan. Si kastaba ha ahaatee, marka jilayaasha juqraafi-siyaasad ay ku tiirsan yihiin qalabyo badan oo iskaashi ah, sida wadahadal iyo tanaasul, waxay u badan tahay inay ku lug yeeshaan dabeecad cadaawad ah ama bilaabaan isku dhacyo. Aaladaha iyo noocyada iskaashi ayaa ay ka mid noqon karaan hawlgallada nabad ilaalinta, gargaarka bini'aadantinimo, ama barnaamijyada iyo taageerada horumarineed. Waxqabadyadani waxay kobcin karaan isfaham iyo iskaashi ka dhexeeya ummadaha, sidoo kalena hoos u dhigi karaan suurtagalnimada isku dhac. Intaa waxa dheer, marka ay wadamadu iska kaashadaan wax ka qabashada caqabadaha guud, waxa laga yaabaa in ay u badan tahay in ay helaan xalal faa'iido u leh oo kor u qaada xasiloonida iyo badhaadhaha.

Dhanka kale, marka jilayaasha juqraafi-siyaasadu waxay ku tiirsanaadaan aaladaha cadawadeed, sida jujuubis ama gardaro, waxa laga yaabaa inay sii kordhiyaan colaadaha oo ay abuuraan xasillooni darro weyn. Tani waxay horseedi kartaa mawjado rabshado ah iyo aargoosi, taas oo sii murginaysa in la gaadho xalalka mustaqbalka fog. Marka la soo koobo, hadba qalabyada juquraafi-siyaasad ee la isticmaalo si loo xaqiijiyo ujeedooyinka dal ayaa lagu saleeyaa iskaashi ama cadaawad ka uu dan moodo dalkaasi. Ururada caalamiga ah iyo dawladaha xubnaha ka ah waxay si wada jir ah uga shaqayn karaan inay wax ka qabtaan caqabadaha guud oo ay yagleelaan bedqabka, xasiloonida, iyo badhaadhaha dunida iyaga oo kobcinaya korna u qaadaya doorka wadahadalka, isfahamka iyo iskaashiga.

### 4.4. Juquraafi-Istraatajiyad

Juquraafi-Istaraatajiyad waxa loola jeedaa diiradda siyaasadda arrimaha dibadda ee ku aadan odoroska awoodda ciidan, iyo jihada hawlaha diblumaasiyadeed ee ku salaysan goobta juqraafi. Juquraafi-Siyaasada gobolka waxay muujisaa isku xirnaanta qayb muhiim ah oo aduunka ka mid ah (gobolka) oo ku saabsan goobta, dhaqdhaqaaqa, ganacsiga, iyo dhaqanka. Falanqaynta Juquraafi-Siyaasadu waa in ay kala saartaa kala qaybsanaanta caalamiga ah iyo kuwa gobolka.

Juquraafi-Istaraatajiyada gobolka waa inay awooda saartaa fahamka iyo lafagurid xeeldheer si loo helo xog ku filan talaabooyinka, go'aamada iyo shaqooyin saameeyn caalami ah leh, maxaa yeelay istiraatijiyadda maanta waxaa lagu sheegi karaa oo keliya marka lagu eego indho caalamka ku aadan. Juquraafi-Istaraatajiyada gobolku waxay muujisaa xidhiidhka qayb weyn oo adduunka ka mid ah marka loo eego goobta, dhaqdhaqaaqa, hanuuninta ganacsiga, iyo curaarta dhaqanka ama fikirka.[71] Heerka aasaasiga ah, jilayaasha dawladuhu waxay noqon karaan kuwo iskaashi leh ama kuwo aan iskaashi lahayn. Iskaashigu waa habka ay ummaduhu isaga kaashadaan ujeeddo guud. Waddan iskaashi ayaa ka qaybqaata

[71] Saul B. Cohen, 2011.

oo taageera heshiisyada caalamiga ah ee ganacsiga, socdaalka, iyo qawaaniinta, iyo sidoo kale jaangoynta sharciyada, iswaafajinta tacriifadaha, iyo socodka macluumaadka, oo ay ku jiraan isu-wareejinta qalabka iyo aqoonta tignoolajiyada. Waddan aan iskaashi lahayn ayaa leh siyaasado qallafsan, oo inta badan aan loo baahnayn, xaddidaya ganacsiga xuduudaha ee maalgashiga, badeecadaha iyo dadka, waxay galaan aargoosi waxayna bixiyaan wax yar oo tiknoolaji ah.

Meesha ay Somaliland kaga taalo gacanka Berbera iyo Bada Cas, oo ay ku jirto magaalada Berbera, ayaa leh muhiimad juquraafi-istaraatajiyadeed oo baaxad leh. Magaalada Berbera oo ah magaalo ku taal gobolka Saaxil ee Somaliland, may ahayn oo keliya meel si weyn loo danaynayay, oo quwadaha waaweyn ee dunidu ay ku hamin jireen, balse waxay ahayd Meesha ay lacag adag kasoo gali jirtay dawladii midowgii lagu hungoobey ee Jamhuuriyada Somalida. Taas oo ay ugu horrayn sabab u ahayd ganacsiga dhoofinta xoolaha nool oo kobcay oo ay hirgeliyeen ganacsatadii reer Somaliland tan iyo sannadkii 1840-kii. Dhoofinta xoolaha, gaar ahaan geela, loo dhoofiyo Jasiiradda Carabta ayaa ahayd tiir-dhexaadka dhaqaalaha mandaqadda, taas oo dakhli badan ay ka soo saari jirtay reer Berbera. Xidhiidhka ganacsi ee ka dhexeeya Berbera iyo Jasiirada Carabta waxa uu soo dhisnaa in ka badan qarni, kaas oo abuuray iskaashi faa'iido u leh labada dhinac, kaas oo soo jiray jiilal badan.

Heshiiska Berbera waxa uu noqday mid laf-dhabar u ah kobcinta iskaashiga ciidan iyo rayid ee ka dhexeeyay Jamhuuriyadda Soomaalida iyo labada quwadood ee Midowgii Soofiyeeti iyo Maraykanka oo midba waqti joogay. Sida ku cad qodobbada heshiiska, waxa Berbera laga bilaabay dhawr mashruuc oo muhiim ah oo ay ka mid yihiin dhismaha dhabaha dayuuradaha ee ugu dheer Afrika ee inta badan laga hadlo. Waxaa intaa dheer in dhowr dib-u-habayn oo deked ah iyo mashaariic kale oo kaabayaasha aasaasiga ah lagu sameeyay. Ujeeddada hindisahan ayaa ahayd in la wanaajiyo guud ahaan nidaamka gaadiidka iyo saadka ee gobolka, taasoo aakhirka horseedi doonta kobaca iyo horumarka dhaqaalaha.

Hayada Maamulka Hawada Sare ee Maraykanka[72] (NASA) ayaa aqoonsatay muhiimadda istiraatijiyadeed ee madaarka Berbera, waxaanay u dooratay inay noqoto goob degdeg ah oo loo qoondeeyay inay ka soo degto maraakiibta cirbixiyeenada Maraykanka. Si loo sugo mudnaantan, NASA waxa ay gelisay lacag aad u badan oo ku dhow $50 milyan si loo hubiyo in garoonku qalabaysan yahay oo loo dayactiro si heerarkii ugu sarreeyay.

Muhiimadda juquraafi-istaraatajiyadeed ee Somaliland waxay leedahay dhinacyo badan, gaar ahaan meesha ay kaga taalo Geeska Afrika awgeed. Muhiimadda juquraafi-siyaasad ahaaneed ee Somaliland waa mid muhiim ah oo aan la iska indho tiri karin, maadaama ay saamaynayso danaha quwadaha caalamka iyo kuwa gobolka. Meesha ay kaga taalo caalamka ee istaraatiijiga ah, ayaa ah hunguriga marin biyood maraakiibta muhiimka ah isla markaana dul saran kedinka mendab, iyo xasilloonida gobolka oo inta badan aan degganayn ayaa ka dhigaysa goob muhiim u ah mid door weyn ka ciyaari karta hirdanka juquraafi-siyaasad. Sidan oo kale, horumarka Somaliland ee dhinacyada siyaasadda, dhaqaalaha, iyo arrimaha bulshada ayaa saamayn weyn ku leh nabadgelyada gobolka iyo tan caalamka, iyo sidoo kale danaha dhaqaale iyo istiraatijiyadeed. Haddaba, waxa lama huraan ah in siyaasad-dejiyeyaasha iyo falanqeeyayaasha ay si dhow ula socdaan oo ay qiimeeyaan isbeddellada sida xawliga ah u socda ee Juquraafi-siyaasada Somaliland. Arrimahan ayaa ka mid ah kuwa muhiimadooda leh –

[72] National Aeronautics and Space Administration (NASA)

1. *Goobta istaraatiijiga ah* – Berbera, oo ah magaalo xeebeed deked leh oo ku taala Jamhuuriyada Somaliland, taas oo muhiim u ah bixinta adeeg dekedeed laga yaabo inay uga kharash yaraato Itoobiya oo aan bad lahayn isticmaalka dekedaha kale ee gobolka. Marka la eego goobta istiraatiijiga ah, Itoobiya waxay ka faa'iidaysan kartaa dekeddan iyo dekedaha mustaqbalka uu dalka Jamhuuriyada Somaliland maalgelin doonto si ay u ballaadhiso dhaqdhaqaaqeeda ganacsi iyo kor u qaadida kobaca dhaqaalaheeda. Haddaba, Berbera waa marin lagama maarmaan u ah waddamada aan badda lahayn sida Itoobiya oo ay ka gali karaan suuqyada caalamka.[73] Goobtani waxay soo bandhigaysaa faa'iido istiraatijiyadeed oo lagaga hortagayo siyaasadaha isbalaadhinta quwadaha aan dano horumarineed u wadin gobolka geeska Afrika laakiin keena dhinbiisha colaadaha iyo xasilooni darooyinka gobolkan aafeeyey. [74]

2. *Dhabaha saadka ee Caalamiga ah iyo Jidka Ganacsiga*: Dhul-badeedka baaxadda leh ee Somaliland wuxuu ku fidsan yahay Gacanka Berbera, oo ay waqooyi kaga began tahay dalka Yaman. Goobtan istaraatiijiga ah waxay u adeegtaa sidii isku xidhka muhiimka ah ee u dhexeeya waddooyinka ganacsiga ee Badweynta Hindiya iyo Badda Cas, oo door weyn ka ciyaarta isku xidha saddex qaaradood: Afrika, Aasiya, iyo Yurub.[75]

3. *Xasilooni siyaasadeed*: Inkasta oo ay gobolka ka jirto xasillooni-darro, haddana Somaliland waxa ay astaan u tahay bogcad xasilloon oo ku taal gobol ay hadheeyeen hirdanka quwadaha iyo loolanka dawladaha gobolka iyo xiisado ka aloosan qaar ka mid ah dalalka gudahooda. Waxay si guul leh u qabatay doorashooyin dimuqraadi ah oo goobjoogeyaal caalami ah kormeereen, iyada oo mid kasta kala wareejinta awooddu ay u dhacday si nabad ah. Guushaas waxa ay daliil u tahay sida ay Somaliland uga go'an tahay dawladnimada dimuqraadiga ah, iyo sida ay qarankani uga go'an tahay ilaalinta mabaadi'da hufnaanta, xaq-soorka iyo isla-xisaabtanka geedi-socodyada siyaasadeed. Inkasta oo ay jiraan caqabado ka dhashay juquraafi-siyaasada balaadhan ee mandaqada iyo caalamkaba, haddana hay'adaha dimuqraadiga ah ee Somaliland waxa ay ahaayeen kuwo adkaysi u leh, dadkeeduna waxa ay muujiyeen karti la yaab leh oo ku aaddan ka-qaybgal bulsho iyo ka-qaybgal siyaasadeed. Guusha laga gaadhay tijaabadii dimuqraadiyadeed ee Somaliland oo la kowsatay halgankii hubeysnaa ee Ururka dhaqdhaqaaqa wadinga Soomaaliyeed (SNM)[76] hormuudka ka ahayd waxa ay hoosta ka xariiqday suurtogalnimada in dawladaha kale ee Afrika ay raacaan dariiq la mid ah oo ku wajahan xasilloonida siyaasadeed iyo adkaynta dimuqraadiyadda.[77]

4. *Istaraatiijiyadda Siyaasadda Arrimaha Dibedda*: Istaraatijiyadda Siyaasadda Arrimaha Dibedda ee Somaliland waxa saamayn weyn ku leh raadinta maqaamka dawladnimo, taas oo keenaysa in la maro marxaladaha qalafsan ee xidhiidhka caalamiga ah. Arrintaas, Somaliland waxa dabada ka riixaysa baahida loo qabo in la sugo aqoonsi iyada oo isla mar ahaantaana ka faa'iidaysanaysa taariikhdeeda dawladnimo oo aan ahayn mid sinaba u lumi karta marka laga hadlayo shuruucda caalamiga ah,[78] goobta istiraatiijiga ah, iyo khayraadka badan ee ay leedahay ayaa idhamaantood

---

[73] Somaliland Chronicle, 2023.
[74] Ibid
[75] Adan (2021)
[76] Somali National Movement (SNM)
[77] Horton (2021)

[78] Inkastoo taariikhda iyo asalka qaranimo ee Somaliland yahay mid shuruucda caalamiga ah ay sugayaan, hadana waxaa jiro ka gaabin dhanka Somaliland aanay si hawl karnimo ah uga shaqeysan, inta badana doodooda ay u jaangooyaan cid dano kale ka leh gobolkan geeska Afrika.

> ka caawin kara si ay u gaadho yoolkeeda hadii ay gartaan inta mindida daabkeeda haysa, ama shacabku ay fahmaan in iyagu yihiin loo shaqeeyaha isla markaan ay shaqoolahooda (madax, siyaasiyiin, , iyo shaqaale) kula xisaabtamaan shaqada ay u dirteen. Mudnaanta istaraatiijiyadani waxay u baahan tahay in si taxadar leh loo miisaamo arrimo kala duwan oo saameeya rajada dalkan iyo guushiisa. Isku soo wada duuboo, ujeedadu waa in Somaliland laga dhigo dal aan looga maarmin saaxadda caalamiga ah ee qaramada, sumcadna ku leh xasilooni, isku hallayn, is-kaashi, iyo wax-qabad wax ku ool ah.[79]

Meesha istiraatijiga ah ee Somaliland waxa ay miisaan weyn ku leedahay habka go'aan qaadashada ee dawladda marka ay timaaddo xidhiidh la samaynta jilayaasha hanaanka cusub ee dunida dhowr quwadood oo siman.[80] Talaabadan noocan oo kale ah waxay u taagan tahay isbedel weyn oo dalka ku yimid marka loo eego muhiimada juquraafi-siyaasadeed ee uu ku leeyahay gobolka iyo doorka uu u leeyahay inuu qayb weyn ka qaato nidaamka hanaankan aduunka ee soo baxaya. Si haboon uga faa’idaysiga isbedeladan si xirfadaysan, Somaliland waa inay la timaadaa hab firfircoon oo diblamaasiyadda iyo siyaasadda arrimaha dibadda, iyadoo la miisaamayo faa’iidada iyo khatarta heshiis kasta, lana ilaalinayo fahamka dhumucda leh ee siyaasadda gobolka iyo caalamka. Dawladdu waa inay la socotaa isbeddellada ku soo kordhay dhaqaalaha siyaasadda adduunka si ay u qaadato go'aamo xog-ogaal ah oo mudnaanta koowaad siinaysa danta dalka iyo dadka.

Dib-u-aqoonsiga Somaliland waxa ka dhalan kara isbedel weyn oo ku yimaadda muuqaalka juquraafi-siyaasada ee Geeska Afrika, Badda Cas, iyo guud ahaan tartanka quwadahu ugu jiraan kordhinta saameyntooda caalamiga ah. Wadamadu uma wada shaqeeyaan kaliya in ay aaminsan yihiin in horumarku ka sareysiiyoo quruumaha daciifka ah. Laakiin waxa jira sababo ama tiirar ka qayb qaata dhiirigelinta iskaashi, sida amniga qaranka ama danaha dhaqaale. Tani waa sababta diblomaasiyadda dhaqaale ay u tahay tiirarka muhiimka ah ee arrimaha dibadda dalal badan.

Marka laga soo tago arrimaha ugu muhiimsan ee amniga qaranka iyo danaha dhaqaale, waxaa jira arrimo kale oo ku dhiirigelin kara waddammada in ay galaan dadaallo iskaashi. Kuwaas waxaa ka mid ah saamaynta madaxda go'aan qaadashada leh, caadooyinka dhaqanka, qaab-dhismeedka hay'adaha, iyo kala sareynta ama mudnaanta danaha qaranka. Fahamka qaabka ay arrimahani isula falgalaan ayaa muhiim u ah garawsasho dhiirigelin aasaas u noqota iskaashiga caalamiga ah.

Waxa lama huraan ah in la fahmo in go’aamada ay ummadi gaadho, hadday tahay wax wada-qabsi iyo hadday tahay wax-wada-qabsi la’aanba, ay saamayn weyn ku yeelan karto himilooyinka cida mindida daabkeeda haysa. Haddaba, waxaa muhiim ah in la tixgeliyo arrimaha kala duwan ee saameeya hab-fekerka iyo go’aan-qaadashada dadka talada haya, si loo fahmo tallaabooyinka uu waddanku qaadi karo. Muddada meertada doorasho ee qaranku waxa ay door muhiim ah ka ciyaartaa qaabaynta habka xisbiyada siyaasadda iyo ashkhaastu go’aamo u gaadhaan heer qaran. Dhererka meertadu ama mudo dhaafka waqtiga xilku waxay saameyn kartaa dhowr arrimood, oo ay ku jiraan kala soocida mudnaanta, dejinta siyaasadda, iyo qoondaynta kheyraadka. Intaa waxaa dheer, muddada meertadu waxay saameyn

---

[79] Somaliland Chronicle, 2023.

[80] Dunida aan maanta joognaa ma aha tii shalay hal quwad (Maraykan) oo kaliya ka ariminayay, ama tii ka horeysay ee dagaalkii labaad ka bacdi ilaa dagaalkii qaboobaa ee ahayd duni laba quwadood ku hirdamayaan (NATO oo Maraykan hogaanka u hayo iyo WAARSO oo midowgii Soofiyeetku hogaanminayo), laakiin waa duni quwado kala duwan iyo qaar soo korayaba ay ka yihiin jilayaasha arrimaha caalamka.

kartaa habka jilayaasha siyaasaddu ay u dheelitiraan danahooda istiraatijiyadeed ee ka soo horjeeda tixgelintooda doorashada. Sidaa darteed, fahamka muddada wareegga doorashada iyo saamaynta ay ku yeelanayso waxay lama huraan u tahay cid kasta oo ku lug leh go'aan-qaadasho heer qaran ah.

### 4.5. Juquraafi-Dhaqaale

Erayga "Juquraafi-Dhaqaale - geoeconomics" waxaa markii ugu horeysay isticmaalay Edward Luttwak 1990kii oo maqaalkiisii 'Juquraafi-Siyaasad ilaa Juquraafi-Dhaqaale: macquulnimada khilaafka, naxwaha ganacsi.[81] Maqaalkan qoraagu wuxuu ku qiimeeyay mawqifka Maraykanka ee khatarta dhaqaale iyo ganacsiga ee ku aadan dalka Japan ee heer caalami. Marka lagu eego indho falanqeyneed, qoraagu wuxuu macquulnimada tartanka awooda ciidan u rogay dhinaca ganacsiga caalamiga ah.[82] Juquraafi-dhaqaale waxaa lagu qeexaa barashada saamaynta iyo sababaha maadiga ah ee khilaaf ka dhex dhalin kara jilayaasha kala duwan ee nidaamka caalamiga ah, waxa caddaynaya muhiimadda ay u leeyihiin falanqaynta gudaha Siyaasadda Caalamiga ah ee dhaqaalaha[83] (IPE).[84] Aragtida dagaalkii qaboobaa ka dib, noocyada awooda ee loo arkay inay udub dhexaad u tahay juquraafi-siyaasada qadiimiga ah waxay siin lahaayeen doorka dhaqaalaha.

Juquraafi-siyaasad waa fidinta juquraafi-siyaasada oo lagu dabaqayo xidhiidhka dhaqaalaha caalamiga ah. Juquraafi-siyaasad waxaa loola jeedaa baadhitaanka qaybinta awoodda, habaynta nidaamka caalamiga ah iyo sida ay u saamayso arrimaha caalamka iyo qaab-dhismeedka istaraatiijiyadeed. Waxay si dhow ugu xidhan tahay juquraafi-dhaqaalaha, kaas oo qiimeynaysa xifaaltanka juquraafi-istaraatajiyadeed ee ka dhaxeeya dawladaha, laakiin xooga saaraya awoodda dhaqaale. Juquraafi-dhaqaale waa nooc gaar ah oo tartanka juquraafi-siyaasadeed kaas oo xooga saaraya muhiimada ay leedahay awooda dhaqaale oo ah curiye gorfayneed.

Sida laga soo xigtay Sanjaya Baru, Juquraafi-dhaqaale waxay ka kooban tahay laba aragtiyood oo kala duwan oo falanqayn ah. Marka hore, waxay qiimeysaa saamaynta ifafaalaha dhaqaale ee juquraafi-siyaasada, halka ta labaad, ay baadho saamaynta dhaqaale ee isbeddellada juquraafi-siyaasadeed.[85] Giovanni Grevi, wuxuu ku sifeeyay juquraafi-siyaasada sida fikrad ka kooban hantida dhaqaalaha oo loo bedelayo saameyn siyaasadeed iyo isticmaalka awoodda siyaasadeed si loo gaadho ujeedooyinka dhaqaale iyada oo loo marayo habab tartan ama iskaashi.[86] Awood-siyaasadeed ma sii jiri karto awood dhaqaale la'aanteed. Waa lama huraan in la joogteeyo cudud ciidan, qalab diblomaasiyadeed, iyo adeegyada sirdoonka.

Juquraafi-dhaqaale waxa ay ku qeexeen Blackwill iyo Harris, hab dhinacyo badan leh oo lagu horumarinayo laguna ilaalinayo danaha qaranka, iyadoo sidoo kale soo saarta natiijooyin juquraafi-siyaasad wax ku ool ah.[87] Habkani waxa uu isku daraa hababka gorfaynta iyo hab-dhaqanka dawladeed labadaba waxa uuna mudnaan siinayaa aragtiyaha dhaqaale marka loo eego kuwa juqraafiyeed. Nuxur ahaan, juquraafi-dhaqaale waxay baadhaa sida ay arrimaha dhaqaaluhu u qaabeeyo awoodda iyo

[81] From Geopolitics to Geoeconomics: Logic of Conflict, Grammar of Commerce.
[82] Luttwak, 1990.
[83] Jaeger and Brites, 2020.
[84] International Political Economy (IPE) oo la micne ah 'Siyaasadda Caalamiga ah ee dhaqaalaha'.
[85] Baru, 2013.
[86] Grevi, 2011.
[87] Blackwill and Harris, 2016.

saamaynta waddan, taasoo ka dhigaysa qayb muhiim ah oo ka mid ah qorshaynta istiraatijiyadeed ee qaran kasta. Juquraafi-dhaqaale waxaa badanaa loo arkaa inay tahay qayb ka mid ah juquraafi-siyaasada maadaama oo ay wax badan wadaagaan ama iskaga eegyihiin Juquraafi-Siyasadii qadiimiga ahayd. Qodobbada juqraafiyeed ayaa door muhiim ah ka ciyaara isdhexgalka iyo khilaafaadka juquraafi-dhaqaale.

Khataraha Juquraafi-siyaasadeed ayaa dhaliyey walaac weyn oo laga qabo dhaqaalaha adduunka taas oo ay ugu wacan tahay saameynta doorashooyinka, kala qaybsanaanta, iyo iskahorimaadyada dalal gudahood iyo kuwa u dhexeeya dawladaha. Maareynta khatarahaas iyo xoojinta hay'adaha dhiirrigelinaya xasilloonida waxay noqdeen lama huraan, gaar ahaan xiligan aynu ku jirno ee aadka u xasaasiga ah. Saamaynta dhaqaale ee khatarahaas ma aha mid la iska indho tiri karo, waxaana lama huraan ah in si taxadar leh oo taxadar leh loo wajaho. Maareynta waxtarka leh ee khatarahaas ayaa u baahan faham buuxa oo ku saabsan sababaha asaasiga ah iyo saameynta suurtagalka ah. Sidaa darteed, waxaa lama huraan ah in la diyaariyo xeelado si habsami leh u yarayn kara khatarahaas korna u qaadi kara xasilloonida dhaqaale.

Colaadda daba dheeraatay ee ka taagan yukraa'iin (Ukraine) iyo Bariga Dhexe, gaar ahaan xiisadda ka dhex aloosan Israa'iil iyo Xamaas, ayaa waxaa dabka kusii shiday gantaalladii dhawaan dagaalyahanada Xuutiyiintu ay la beegsadeen maraakiib marayay badda cas. Dhacdooyinkani waxay xusuusin buuxda u yihiin saamaynta weyn ee isbedelada juquraafi-siyaasadu ku yeelan karaan dhaqaalaha adduunka sannadka 2024. Marka la eego dabeecadda qalafsan iyo isku xidhnaanta dhaqaalaha adduunka, xitaa iskahorimaadyada maxalliga ah ee dal waxay yeelan karaan cawaaqib baahsan oo fog, gaar ahaan dhinacyada ganacsiga iyo maalgashiga. Sidan oo kale, waxay muhiim u tahay siyaasad-dejiyeyaasha, hoggaamiyeyaasha ganacsiga, iyo maalgashadayaasha si isku mid ah inay ula socdaan isbedeladii ugu dambeeyey ee caalamka isla markaana ay qaadaan tallaabooyin firfircoon si ay u yareeyaan saameynta suurtagalka ah ee khataraha juquraafi-siyaasadu ku yeelan karto hawlahooda iyo doorkooda.

Adduunkan maanta ee edegaysan oo isla markaana isugu xidhan sidii hal xaafad oo kale horumarka tiknoolajiyada awgeed, ganacsiga ayaa waxaa si isa soo taraysa u saameeya arrimaha juqraafi-siyaasada iyo asbaabta juquraafi-dhaqaale. Saamaynta arrimahan ay ku leeyihiin ganacsiyada ayaa noqon kara mid baaxad leh, maadaama ay saamayn karaan meel kasta sida siyaasadaha, xeerarka ganacsiga, maamulka silsiladaha saadka iyo sahayda, iyo gelitaanka suuqa. Tusaale ahaan, isbeddelada siyaasadaha dawladda, sida tacriifadaha ama cunaqabataynta, waxay carqaladayn karaan ganacsiga caalamiga ah, taasoo u horseedi karta kharashyo badan ama hoos u dhaca faa'iidada ganacsiyada. Sidoo kale, isbeddellada ku yimaada muuqaalka dhaqaalaha adduunka, sida kor u kaca suuqyada soo koraya ama hoos u dhaca warshadaha yaryar, waxay abuuri karaan fursado ganacsi iyo caqabado labadaba. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in shirkaduhu ay la socdaan oo ay ka warqabaan horumarka juqraafi-siyaasada iyo juquraafi-dhaqaale iyo inay yeeshaan xeelado ay ku maareeyaan khataraha si looga faa'iidaysto fursadaha ay soo bandhigaan isbeddelladan dunida ka dhacaya oo ka maxsan awoodooda.

Juquraafi-siyaasada iyo Juquraafi-dhaqalahu waa fikrado muhiim u ah ganacsiga caalamiga ah. Juquraafi-siyaasadu waxa ay sahamisaa sida juquraafigu u saameeyo go'aamada siyaasadeed ee ka dhexeeya quruumaha, halka Juquraafi-dhaqaaluhu ay u adeegsato xeelado dhaqaale si loo horumariyo danaha qaranka. Ogaanshaha farqiga u dhexeeya waa lama huraan, maadaama murannada dhuleed iyo heshiisyada ganacsi ay si qoto dheer u saameyn karaan ganacsiga iyo maalgashiga caalamiga ah. Haddaba,

ganacsiyada ka shaqeeya heerka caalamiga ah (ganacsi xuduudaha ka talaabay oo dalal badan ka jira) waa in ay faham fiican ka haystaan Juqraafi-siyaasada iyo Juquraafi-dhaqaalaha labadaba.

Hindisaha Xariiqda iyo Dhabaha (BRI)[88] waa hamiga Shiinaha ee ku aaddan dhisidda kaabayaasha isku xidha Bariga Aasiya, Bariga Dhexe, Yurub, iyo Afrika. Tan iyo markii la bilaabay 2013, yoolkeedu wuxuu ahaa in la dhiirigeliyo kobaca dhaqaalaha, isku xidhnaanta, iyo dhaqanka wax isdhaafsiga ee ka dhexeeya wadamada ka qayb galaya. Dhanka ganacsiyada caalamiga ah marka laga eego, hindisahani waxa uu Somaliland u soo bandhigayaa fursado iyo caqabado labadaba. Wadamada dhabahan uu marayo waxa muuqata in ay fursado wax ku ool ah oo kor loogu qaadayo koboca iyo fududeynta ganacsiga ay ka helayaan. Si kastaba ha ahaatee, Hindisahan Shiinahu wuxuu sidoo kale soo bandhigayaa caqabado gaar ah oo ay ugu wacan tahay saameyntiisa juqraafi-siyaasada iyo juquraafi-dhaqaalaha. Xiisadaha sii kordhaya ee u dhexeeya quwadaha waaweyn ee dhaqaalaha ayaa keeni kara muran ganacsi, xannibaadyo maalgashi, iyo khalkhal ku yimaadda ganacsiga caalamiga ah iyo silsiladaha saadka iyo sahayda. Muuqaalka juquraafi-siyaasadeed ayaa isbedelaya iyadoo dhabahan cusub ee Xadhiidhta[89] uu saameyn ku yeelanayo, iyadoo Mareykanka iyo xulafadiisa ay ka hortagayaan dadaalka Shiinaha, Ruushka, iyo Iiraan. Tartankan ayaa saameyn weyn ku leh xakameynta kheyraadka muhiimka ah, waddooyinka ganacsiga, iyo saameynta suuqa adduunka. Natiijo ahaan, shirkaduhu waa inay dhex maraan shabakad isbahaysiyo oo aad isu bedelaya iyo dabaylo Jurquraafi-siyaasado kakan.

### 4.6. Isku-dheellitirka Awoodda iyo Hirdanka Juquraafi-Siyaasada ee Geeska Afrika

Juquraafi-siyaasadu ma laha taariikh sugan iyo cidii ugu horeysay ee soo kordhisay; in kasta oo ay ka dhex jirtay ilbaxnimooyinkii hore iyo nidaamkii qabiilooyinka iyo qoomiyadaha, ma jiraan wax caddayn ah oo laga hayo qaabka ay u adeegsan jireen, taas oo muujinaysa in ay adagtahay sugtitaanta taariikh sax ah oo dhigaya sidii ay usoo bilaabantay. Juquraafi-siyaasada ayaa ku luglahayd doorka isku dhacyada ka dhex jiray dawlad-goboleedyada Talyaaniga kun sano ka hor, iyada oo khilaafyo siyaasadeed iyo hamiga hoggaamiyeyaasha ay horseedeen xulafeysi iyo dagaal.

Qeexidda juquraafi-siyaasad ayaa muujinaysa caqabad adag, taasoo keentay in la bilaabo laba qeexitaanno oo aasaasi ah. Juquraafi-Siyaasad waa doorka in la qiimeeyo muhiimada istiraatijiyadeed ee dhulka iyo badda marka la eego awoodda dhaqaale iyo ciidan ee qaranka. Waxay si qoto-dheer u falanqaysaa is-dhexgalka ka dhexeeya dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ee caalamiga ah iyo xaaladaha dhuleed iyo deegaan ee gaarka ah ee ay ku shaqeeyaan. Cilmigani waxa uu ku lug leedahay falanqaynta, saadaalinta, iyo adeegsiga awooda siyaasadeed ee gudaha dhul cayiman, ka faa'iidaysiga macluumaadka juqraafiga iyo fikradaha si loo fuliyo ujeedooyinka siyaasadeed. Sida ay qabaan qaar ka mid ah khubarada juqraafiga, juquraafi-siyaasad waxa ay koobaysaa (1) In dal lagu lafo-guro bogcadiisa caalamiga ah iyada oo la eegayo hab-dhaqankiisa juquraafi ahaan, (2) Xeer-hoosaadyo lagu hagayo hab-dhismeedka dawladeed ee ku salaysan falanqaynta noocaas ah; iyo (3) Bayaan qeexaya oo qiimaynaya bogcada caalamiga ah ee waddan, oo inta badan salka ku haya falaqayntan iyo xeerarkan. Ka faa'iidaysiga aragtiyaha caanka ah sida aragtida Mahan, aragtida horumarinta dabiiciga ah ee Friedrich Ratzel, aragtida awoodda badda, iyo aragtida

[88] The Belt and Road Initiative (BRI) oo lagu macnayn karo '*Hindisaha Diilinta iyo Dhabaha*'.

[89] The New Silk Road oo macnaheedu yahay 'Dhabaha Cusub ee Xariirta' waa magac labaad oo loogu yeedho hindisaha kor ku xusan ee Shiinaha.

weerarka kaga-horeynta ah ayaa ku baahsan inta badan quruumaha. Aragtiyadani waxay u adeegaan si ay u xoojiyaan sumcadda qaranka iyo ilaalinta danahooda.

Si aan ugu kuurgalno saamaynta dhabta ah ee Juquraafi-Siyaasada, waxa aynu samayn doonaa dulmar guud oo ku saabsan aragtiyaha iyo fikradaha ugu caansan. Fikradaha muhiimka ah waa Qadiimiga-cusub,[90] Af-rogitaanka,[91] Juquraafi-Siyaasad la'aan,[92] iyo Juquraafi-Siyaasada Xasaasiga ah.[93] Aragtiyada siyaasadeed ee muhiimka ah waxaa ka mid ah Aragtida Ubucda-Dhuleed ee Halford J. Mackinder,[94] Aragtida Gobolada Durugsan ee Nicolas Spykman,[95] Aragtida Jasiiradda ee Gray,[96] Aragtida Balaadhinta

---

[90] Juquraafi-siyaasada Qadiimiga-cusub waxa ay xoogga saartaa juqraafiga iyo khariidada dhuleed marka ay qaabaynayso xidhiidhka caalamiga ah, waxaana tusaale aan usoo gaaqan karnaa aragtiyada caan baxay ee horaantii qarnigii 20aad ee Halford Mackinder iyo Alfred Mahan. Juquraafi-Siyaasada Qadiimigacusub waxa ay ku dhisantahay aragtiyaha qadiimiga ah iyada oo diirada saaraysa saameynta ay ku yeeshaan caalamiyeynta, horumarka tiknoolajiyada, iyo cadaadiska arrimaha deegaanka. Waxay soo bandhigeysaa qaabdhismeed lagu wajaho si loo fahmo habdhaqanka dowladaha ee dunida maanta.

[91] Juquraafi-Siyaasada Af-rogitaanka ahi waxay khilaaftaa isbedeleka awooda ee soo jireenka ah iyada oo loo marayo hab aan caadi ahayn, oo ujeedkiisu yahay in uu wiiqo ama dib u qaabeeyo hanaankii awoodda juquraafi-siyaasada ee jiray. Juquraafi-siyaasada Af-rogitaanka ah waxay ka dhaqaaqdaa habkii istraatajiyada awooda dhexe ee dawlada iyada oo la adeegsanayo xeelado aan caadi ahayn, teknoolojiyad, iyo shabakado isku xidhan si ay u loo gaadho natiijooyin kale oo juqraafi-siyaasadeed. Waxay ka tarjumaysaa tartanka iyo isbedelka joogtada ah ee Juqurafi-siyaasada duni isku-xidhan.

[92] Juquraafi-Siyaasad la'aantu waxay ina gayaysiisaa aragtiyo kale oo lagu falanqeeyo xidhiidhka caalamiga ah. Waxay mudnaanta siiyaan iskaashiga, danaha wadaagga ah, iyo walaaca caalamiga ah ee ka baaxadweyn qiimeynaha soojireenka ah ee dawladuha, iyagoo aqoonsanaya kakanaanta caqabadaha casriga ah ee caalamka hoostana ka xariiqaya baahida loo qabo xoojinta iskaashiga si loo xaqiijiyo xalalka wadashaqayneed.

[93] Juquraafi-siyaasada xasaasiga ahi waxay deristaa sida aqoonta Juquraafi ee deegaan iyo isticmaalka awooda loogu loolamo masraxa xidhiidhka caalamiga ah, iyada oo la is weydiinayo su'aalo male-awaal ah (xaalado dhici kara) iyo isbedelada awoodda. Juquraafi-siyaasad halista ahi waxay ina siisaa hab feker qotodheer, oo adeegsanaya noocyo kala duwan oo aqooneed si loo fahmayo siyaasadda caalamka. Waxay xoogga saartaa in aan si adag u eegno oo aan u daadifeyno heb-fekerada caanka noqday, qaabaynta fahamkeenna aduunka, iyo in aan saamayn ku yeelano ficillada siyaasadeed ee heerar kala duwan.

[94] Mackinder aragtidiisu waxay dunida u qaybisaa sadeex aag oo istaraataji ah: 1) Aaga Udubka ama Ubucda Dhuleed (Pivot ama Heartland), 2) Giraanta-gudaheeda, iyo 3). Giraanta-wareegeeda sare. Waxa uu ka digay in maamulida ama gacan ku heynta Ubucda-dhuleed ay horseedi karto talada caalamka oo dhan oo u gacan gasha hal awood ama isbahaysi ee gacanta ku haya: "Ciddii maamusha Bariga Yurub ayaa ka ariminaysa Ubucda-dhuleed. Cida kasta oo ka arrimisa Ubucda-dhuleedna waxay maamuli doontaa Jasiirada (Giraanta gudaheeda). Cidii Maamusha Giraanta Gudaheeduna waxay hanan doontaa talada iyo gacan ku heynta awooda dunida."

[95] Aragtidani waxay muujinaysaa is-dhexgalka siyaasadda adduunka iyo midnimada badaha ee caalamka oo dhan ka dhexeysa. "Gacan ku haynta Gobolada Durugsani waxay jaangoysaa masiirka Yurub-Aasiya, halka hanashada Yurub-Aasiya ay qaabeyso aayaha caalamka." Fikraddan ayaa laga dheehan karaa, istaraatijiyadii dagaalkii labaad ee adduunka ka dib si loo joojiyo faafitaanka saamaynta Midowgii Soofiyeeti.

[96] Aragtidan Jasiiradaha ee Gray waxa ay soo jeedinaysaa in gacan ku haynta Jasiiradaha Yurub-Aasiya iyo Afrika si loo noqdo awooda kaliya ee dunidaka arrimisa ay u baahan tahay in gacanta lagu dhigo awooda dhulka iyo badda ee inta ka dhaxaysa Yurub-Aasiya iyo Afrika iyo baddaha ku gedaaman, si looga hortago sarraynta awooda adduunka ee midowga Soofiyeetku.

ee Randall Collins,[97] Aragtida Dabiiciga ah ee Friedrich Ratzel,[98] Aragtida Awooda Badda ee Alfred Thayer Mahan,[99] iyo Aragtida weerarrada ka-hortagga[100] ah ee Bush.

Si loo fahmo juquraafi-siyaasada mandaqada Geeska Afrika iyo Badda Cas, waxa lama huraan ah in la lafo-guro dhinacyada juqraafiyeed ee dawlad kasta oo ka jirta deegaanadaas oo ay ku jirto Jamhuuriyadda Somaliland. Dhinacyadan waxaa ka mid ah goobta juqraafiyeed, cabbirka, cimilada, muuqaalka oogada dhuleed, tirakoobka dadka, kheyraadka dabiiciga ah, iyo horumarka tignoolajiyada. Intaa waxaa dheer, waxaa muhiim ah in la tixgeliyo juquraafiga siyaasadeed, xidhiidhka caalamiga ah, iyo astaamaha dhuleed ee cilmiga siyaasadda iyo sharciga caalamiga ah. Sidaan hore uga soo hadalnay, Juquraafiga iyo laamihiisa ayaa door muhiim ah ka ciyaara barashada juquraafi-siyaasadda. Laamahaas waxaa ka mid ah - beeraha, dhaqanka, dhaqaalaha, maamulka iyo doorashada, taariikhda, barashada aadanaha, warshadaha, caafimaadka, degaanka bulsho (miyi iyo magaalo), daryeelka, iyo juqraafiga siyaasadda. Marka la tixgaliyo arrimahan kor ku xusan, waxa ay ina siinaysaa awooda  in la doorto wax wada qabsiga ama xidhiidh ay Jamhuuriyadda Somaliland la yeelan doonto dalalka kale.

Jamhuuriyadda Somaliland waxa ay muhiimad juquraafi-siyaasad ku leedahay siyaasadda caalamka ah iyo tan heer gobol ee gobollada Geeska Afrika iyo Badda Cas. Waxay ku taallaa halka laga soo galo badda cas iyo gacanka Berbera, waxaana la filayaa inay noqoto meel ay saldhigyo ciidan ka sameystaan dalalka muujiyey danaha muhiimka u ah ee gobolka oo ay ku jirto Itoobiya oo ah dalka keliya ee Geeska Afrika ee aan bad lahayn. Meesha istaraatiijiga ah ee Somaliland kaga taalo badda cas waxay kor u qaadi doontaa saamaynta ay ku leedahay arrimaha badda, dhaqaalaha iyo ganacsiga. Inkasta oo aqoonta baddu ay wakhtigan ku kooban tahay dadka reer Somaliland, haddana horumarinta aqoonta la xidhiidha khibradaha badda waxay Somaliland u suurtogelinaysaa inay xidhiidh adag la samaysato quwadaha waaweyn ee caalamka iyo xulafadooda. Xoogaga juquraafi-siyaasada ayaa siyaabo kala duwan isugu xidhan, oo ay ku jiraan wada xaajoodka heshiisyada, sameynta ururo caalami ah, sameynta heshiisyo ganacsi iyo dhaqaale, horumarinta heshiisyada cimilada, iyo xalinta khilaafaadka. Tusaale casrigan ah oo

97 Aragtida Is-ballaadhinta ee Collins waxa ay muujinaysaa shan mabaadii'da muhiimka ah ee la xidhiidha geedi socodka Juquraafi-siyaasad: 1) ballaadhinta gacan ku haynta dhuleed waxaa ay faa'ido u keentaa fidinta awooda iyo kordhka khayraadka; 2) ballaadhinta gacan ku haynta dhuleed waxay faaido u leedahay juquraafi-siyaasada ama tamashlaynta awoodeed; 3) Is-balaadhinta xad-dhaafka ahi waxa ay keenaysaa burbur iyo kala yaac; 4) Khasaaraha is-dhexgalka juquraafi-Siyaasada; 5) Isku xidhnaanta ay keenaan dhaqdhaqaaqa wadareed. Marxaladdan oo kale, is-balaadhinta waxa loola jeedaa xoojinta awoodda maamul ee dal ku leeyahay dalalka dariska la ah.

98 Ratzel fikradaha aragtida dabiiciga ah ee dawlada, oo ku qeexayo sida unugyada noolaha oo kale sida ay u wada shaqeynayaan iyada oo unug kastaa shaqo gaar ah hayo taas oo baaxada dhuleed ee dawladaasna u uku matalay sida qolafta noolahaas oo kale. Aragtidani waxa ay qabtaa in ku dawlada ku qasbayso u hoggaansanaanta sharciyada noolaha ee habdhaqankooda iyo jiritaankooda joogtada ah si ay u sii waaraan.

99 Awoodda baddu waxay ka gudbaysaa macnaha ciidan oo kaliya waxayna ka dhigan tahay awoodda dalku u leeyahay inuu joogteeyo danihiisa siyaasadeed, dhaqaale, iyo ciidan iyada oo kordhinaysa saameynta ay ku leeyihiin badda. Waxay ka kooban tahay awoodda ciidankiisa badda, horumarka sayniska, awoodda warshadaha, iyo dadaalada ganacsi. Xilliga nabadda, awoodda badda waxaa ka qayb qaata tartanka ganacsiga, halka xilliyada dagaalka, ay ka kooban yihiin xeelado diblomaasiyadeed iyo hawlgallo ay sameeyaan ciidanka badda. Lix arrimood oo muhiim ah ayaa ah shuruudaha loo baahan yahay in qaranku uu gaadho awoodda badda. Kuwaas waxaa ka mid ah bogcada juqraafi oo faa'iido leh, oo lagu sifeeyey dhul xeebeed muhiim ah iyo khayraad fara badan; cimilada wanaagsan; dhul ku filan;  tiro macquul ah oo dadweyne isdifaaci kara; bulsho garasha qoto dheer u leh arrimaha badda; iyo xukuumad awood u leh inay dhisto awood iyo istaraatajiyad ay badda ku hantaan.

100 George Walker Bush wuxuu ku dooday in la ilaaliyo danaha qaranka iyada oo loo marayo weeraro ka-hortag ah, si  fududaynta isbeddelka xukunka dimuqraadiga ah ee dawladaha lagu bedelayo loo meel mariyo, dagaallada ka hortagga, in xukunnada lidiga ku ah talada looga tuuro, lana dabagalo danaha ciidan ee Maraykanka.  Mabaadii'daan ayaa loo adeegsaday colaadaha ku lagu dumiyey dawladaha iyo shacabka Ciraaq iyo Afgaanistaan, waxaana la isku dayay in lala xidhiidhiyo Iiraan. Sidoo kale, Israa'iil waxay qaadatay barnaamijkan iyada oo ku fulisa hawlgalada ka dhanka ah Lubnaan iyo Falastiin.

muujinaya juquraafi-siyaasadeed waa Heshiiska Ganacsiga Xorta ah ee Waqooyiga Badwaynta Atlaantiga (NAFTA)[101] iyo Hab-maamuuska Kyoto.[102]

Geeska Afrika waxa uu muddo dheer ahaa gobol aad ay ugu muhiim ah danaha juquraafi-siyaasadeed taas oo ay ugu wacan tahay goobta istaraatiijiga ah ee uu ku yaal, khayraadka dabiiciga ah ee uu hodanka ku yahay, iyo marinada ganacsi ee taariikhiga ah. Isbedelada juquraafi-siyaasada Geeska Afrika waxa lagu macnayn karaa afar arrimood oo xasaasi ah – 1) goobta istaraatiijiga ah – Geeska Afrika waxa uu ku fadhiyaa bogcad istiraatijiyadeed oo ah isgoysyada Afrika, Bariga Dhexe, iyo Badweynta Hindiya. Gobolkani waxa uu ka kooban yahay shan wadan oo kala ah Somaliland, Ethiopia, Eritrea, Djibouti, iyo Sudan; 2) Jilayaasha muhiimka ah ee ku lug leh – Xiisadda Itoobiya[103] iyo Ereteriya,[104] hal-xidhaalaha Somaliland[105] iyo Soomaaliya[106] oo aan weli xal loo helin, siyaasadda dilaalnimada ee Jabuuti,[107] colaadda Suudaan iyo ku lug lahaanshaha quwadaha dibadda;[108] 3) Taariikhda gobolku soo maray;[109] iyo 4)

[101] Heshiiska Ganacsiga Xorta ah ee Waqooyiga Ameerika (NAFTA) wuxuu ahaa heshiis ganacsi oo dhamaystiran oo ay wada saxeexdeen dawladaha Kanada, Meksiko, iyo Maraykanku (Canada, Mexico, USA). Waxay dhaqan galay maalintii sanadku 1994 uu curtay (January 1, 1994), si loo cidhibtiro cashuuraha iyo caqabadaha kale ee ganacsi ee ka dhex jiray saddexda dal si kor loogu qaado isdhexgalka dhaqaale iyo iskaashiga Dalalka Waqooyiga Ameerika. Intii ay jirtay, NAFTA waxay saameyn weyn ku yeelatay xidhiidhka dhaqaale ee Waqooyiga Ameerika waxayna ka dhigantahay heshiis dhaliyey talaabo hore loogu qaaday dhanka ganacsiga caalamiga ah.

[102] Hab-maamuuska Kyoto waa heshiis caalami ah oo ku dhaqangalay 1997-kii magaalada Kyoto, ee dalka Jabaan, kaas oo lagu kordhinayo Heshiiskii Qaab-dhismeedka Qaramada Midoobay ee Isbedelka Cimilada (UNFCCC). Waxay ujeedadeedu tahay in wax laga qabto heerkulka dunida ee sii kordhay iyada oo loo dhigayo bartilmaameedyo ay xaqiijiyaan wadamada warshadaha leh si loo yareeyo gaaska hawada lagu sii daynayo. Inkastoo la dhaliilay waxtarka bartilmaameedyada iyo ka qaybgalka kooban ee dalalka ugu wax-soo-saarka waaweyn sida Maraykanka iyo Shiinaha, hadana Hab-maamuuskani weli waa mid muhiim ah maadaama uu yahay mid ka mid ah heshiisyadii caalamiga ahaa ee ugu horreeyay ee wax ka qabashada isbeddelka cimilada maadaama oo uu leeyahay ballanqaadyo sharcigu waajibinayo.

[103] Itoobiya, oo ah dawlad taariikh ahaan gobolkeeda caan ka ah, ayaa waxay saameyn badan ku yeelataa xasillooni darrada gudaheeda iyo xulashooyinka siyaasadeeda dibadda, taas oo keenta xasilooni daro iyo dagaalo gudaheeda ah.

[104] Erateriya waxay inta badan samaysaa isbahaysiyo ay kaga soo horjeedo Itoobiya, taas oo ka dhigan talaabo ay kaga gaashaamanayso isbedelada dabaylaha juqraafi-siyaasada.

[105] Somaliland waxay 1-dii July 1960-kii isku dayday midow ay la yeelato Soomaaliya kaas oo aanay ansixin baarlamaankii wadajirka ahaa, taas oo midowgaas ka dhigtay mid sharci ahaan u burey. Ka dib dagaalkii xoraynta ee SNM ay horseedka ka ahayd ee ay ku joojisay Xasuuqii beelaha Isaaqa, waxay Somaliland lasoo noqotay dawladnimadeedii 18kii May 1991 iyada oo dunidu ay weli indha ka qarsanayso xaqiiqada dhulkan ka jirta isla markaana lacagtii ay cashuur-bixiyayaashii beesha caalamku ay ku shubeen waxa loogu yeedho barnaamijyada xasilinta Soomaaliya ee lagu lunsado taas oo ka dhigtay Soomaaliya mid ka mid ah goobaha musuqmaasuqa hogaanka u haysa.

[106] Soomaaliya waxaa si caadi ah loogu magacaabay inay tahay dowlad fashilantay, oo ugu horreyn loo aaneeyay colaadihii dabada dheeraaday ee gudaheeda, taas oo sababtay in ay dunidu u garwaaqsato farogalinteeda oo qasab ka dhigeysa dadaallada caalamiga ah ee nabad ilaalin iyo xasilinta.

[107] Jabuuti waxay isu soo sharraxdaa dhexdhexaadiye u noqoshada colaadda Soomaaliya gudaheeda, iyada oo ku raadinaysa inay kordhiso saameynteeda iyo sumcadeeda qarannimo. Si loo xoojiyo mowqifkeeda ah daneeye muhiim u ah siyaasadda Soomaaliya, Jabuuti waxa ay hirgelisay nidaamka 4.5 (afar reer oo waaweyn iyo beelaha yar yar ama laga tirade badan yahay), iyadoo u oggolaanaysa madaxweynaha Jabuuti inuu awood u yeesho inuu soo jeediyo xildhibaannada ku jira golaha baarlamaanka Soomaaliya ee haybtiisa ah. Jabuuti iyadoo ka faa'iidaysanaysa ka qaybgalka xaddidan ee Somaliland kaga qayb-gasho juquraafi-siyaasadda caalamiga ah, waxay Jabuuti saldhigyo ciidamo shisheeye ka kireysay dalal kala duwan, taas oo ay ugu wacan tahay goob-istiraatiijiyadeed oo ku taala kadinka marinka biyoodka ee Mandeb (Bab-el-Mandeb Strait). Jabuuti waxay u aragtaa Somaliland inay khatar ku tahay koboca dhaqaalaheeda, waxaanay si firfircoon u carqaladaysaa isku dayada Somaliland ku aaddan inay si siman uga qayb qaadato siyaasadda gobolka iyo tan caalamka.

[108] Quwado shisheeye, sida Mareykanka, Shiinaha, Ruushka, Iiraan, iyo dalalka Khaliijka ayaa farageliyay colaadaha ka jira Yemen iyo Sudan, iyagoo doonaya in ay saameyn ku yeeshaan iyaga oo u maraya maalgashiga dhaqaale, saldhigyo ciidan, iyo xidhiidh diblomaasiyadeed. Soomaaliya waxay sidoo kale aheyd goob ay sanado badan ku loolamayeen awoodahani.

[109] Taariikhda gobolka Geeska Afrika waxaa uu ku suntan yahay saameynta gumeysiga, hirdankii colaadaha dagaalkii qaboobaa, iyo halgankii awoodda iyo khayraadka ee xorriyadda ka dib. Colaadaha sida Xasuuqii beelaha Isaaq (1987-1990), Dagaalkii Eritrea iyo Itoobiya (1998-2000), iyo Dagaalkii Sokeeye ee socday ee Soomaaliya (oo soo saaray Xag-jirnimo, Argagixiso, iyo Burcad-badeednimo), Colaadda soohdinta ee Eritrea iyo Djibouti (10-13 Juun 2008); dagaaladii sokeeye ee Sudan ee koowaad iyo labaad

Arrimaha Juquraafi-siyaasada ah ee hadda jira[110] waxay saamayn weyn ku leeyihiin falanqaynta juqraafi-siyasad ee gobolka Geeska Afrika.

Geeska Afrika waxa ku nool 179.4 milyan oo qof (Jabuuti 1.15,[111] Erateriya 3.82,[112] Itoobiya 130,[113] Somaliland 6.2,[114] iyo 49.4 Suudaan[115]), boqollaal qoomiyadood iyo toban gobol cimilo. Waxa uu leedahay heerar kala duwan oo horumarka aadanaha ah, taariikhda gumeysi, saameyn siyaasadeed oo cusub, iyo caqiido diimeed oo kala duwan, taasoo ka dhigaysa gobolka ugu firfircoon Afrika. Intaa waxaa dheer, waxa uu u adeegaa sidii halbowle isgaadhsiineed oo muhiim ah oo heer caalami ah waxa uuna u shaqeyaa sidii garoon dabiici ah oo loogu talagalay daneeyayaasha gudaha iyo dibadda ee ka shaqeeya gudaha qaaradda Afrika. Sida uu qoray Dr. Cabdiraxmaan Gaas "Quwadaha a caalamka sida Mareykanka iyo Shiinahu waxay isku hayaan inay saameyn ku yeeshaan gobolka, iyagoo diiradda saaraya xidhiidhka ciidamada, amniga, dhaqaalaha iyo ganacsiga. Wadamada kale, oo ay ku jiraan Hindiya, Dawladaha Khaliijka, Turkiga, Ruushka, Boqortooyada Ingiriiska iyo Midowga Yurub, ayaa sidoo kale muujiyay danayntooda gobolka. Geeska Afrika waxa soo food saaray caqabado dawladnimo iyo xasillooni, balse waxa uu doonayaa in uu wax ka qabto iyada oo la horumarinayo is-dhexgalka gobolka iyo xasilloonida siyaasadeed".[116]

Inta aynaan dabaalan badweynta dheelitirka awoodeed mandaqada Geeska Afrika, aynu si kooban u taabano mabda'a ahaan micnaheeda. Fikradda Dheellitirka Awooddu waa mabda'a aad ugu muhiim ah xidhiidhka caalamiga ah iyo Juquraafi-siyaasadda. Waxay khusaysaa awood qaybsiga dawladaha ama kooxo dawlado ah si looga hortago in hal maamul uu si xad-dhaaf ah u maamulo oo uu awood ugu yeelan karo inuu ku soo rogo rabitaankiisa dawladaha kale iyada oo aan la mucaaradi karin. Qodobbada ugu muhiimsan ee dheellitirka awoodda waa - ka-hortagga Baarqab Siyaasadeed/awood koobsi,[117] Xulufaysiga Diblomaasiyadeed iyo Gashaanbuursiga,[118] Awoodaha ciidan,[119] Xirfadaha

(1955-1972, iyo 1983-2005) waxay qaabeeyeen iswaafajinta juqraafi-siyaasada ee hadda taagan.

[110] Caqabadaha juqraafi-siyaasada ee casriga ah ee geeska Afrika waxaa ka mid ah biyo-xidheenka weyn ee Itoobiya (Grand Renaissance), halkaas oo muran ku saabsan biyaha Wabiga Nayle (Nile ama Niil) ay saameyn ku yeeshaan xidhiidhka u dhexeeya Itoobiya, Suudaan iyo Masar. Sidoo kale, arrimo aan la xallin oo u dhexeeya Somaliland iyo Soomaaliya, oo ay ka mid yihiin Xasuuqii Isaaq iyo bur-burkii midowga labada dal ee ay sabab u tahay aragtidii Soomaali-weyn oo aan macquul ahayn ayaa weli ah kuwo taagan. Argagixisada (Al-Shabaab ee Soomaaliya), budhcad-badeedda ka hanoqaaday xeebaha Soomaaliya, iyo muranka xuduudaha, ayaa ah arrimo kakan oo xal u helid sugaya. Intaa waxaa dheer, in Geeska Afrika ay martigalisay saldhigyo ciidamo shisheeye oo kala duwan oo muhiim u ah hawlgallada caalamiga ah, ee ay ka mid yihiin dadaallada ka dhanka ah budhcad-badeedda iyo la dagaalanka argaggixisada. Tobankii sano ee la soo dhaafay, Shiinahu waxa uu balaadhiyay saameyntiisa badda iyada oo u marayo dadaallo ay ka mid yihiin barnaamijka suunka iyo jidadka (BRI) iyo xiisadaha ku lugta leh xidhiidhka Taiwan ay la leedahay Somaliland, taas oo wax ka bedeshay muuqaalka nabadgelyada gobolka. Jawaab ahaan, Hindiya waxay si firfircoon uga hawl gashay fagaarayaal ay ka mid yihiin Wadahadalka Afar-Geesoodka ah ee Amniga (QUAD) iyo Iskaashiga Dalalka Wadaaga Badweynta Hindiya (Indian Ocean Rim Association – IORA) sababo la xidhiidha in Shiinaha joogitaanka Shiinaha ee Badweynta Hindiya oo sii kordhaya iyo xidhiidhka ay Bakistaan la leeyihiin oo ay xoojiyeen.

[111] Eeg … https://worldpopulationreview.com/countries/djibouti-population

[112] Eeg .. https://worldpopulationreview.com/countries/eritrea-population

[113] https://worldpopulationreview.com/countries/ethiopia-population

[114] Somaliland in Figures 2023

[115] Eeg … https://worldpopulationreview.com/countries/sudan-population

[116] Abdirahman Gaas (2019) Challenges and Breakthrough for Horn of Africa Regional Integration. Journal of Political Science and International Relations. Vol. 2, No. 1, 2019, pp. 11-17. doi: 10.11648/j.jpsir.20190201.12

[117] Ujeeddada ugu weyn ee dheelitirka awoodu waa in laga hortago in hal dowlad ama isbahaysi aanay koobsan ama ku kaliyesan awooda iyo ka ariminta caalamka taas oo horseedi karta xasilooni darro ama isku dhac.

[118] Dowladuhu waxay sameeyaan isbahaysiyo si ay uga hortagaan khataraha ku iman kara, ha ahaato kuwa rasmi ah iyo kuwa aan rasmi ahaynba, sida NATO, oo ku saleysan danaha la wadaago iyo heshiisyada difaaca loo dhan yahay.

[119] Awoodda ciidan waxa ay muhiim u tahay ilaalinta isku dheelitirka awoodda. Dowladahu waxay doonayaan inay yeeshaan xoog ciidan oo ku filan si ay uga hortagaan xadgudubyadda ayna u ilaaliyaan danahooda iyaga oo ka fogaanaya inay bixiyaan jawaab

dhaqdhaqaaqyada Istraraatajiyadeed,[120] iyo Ururada iyo Xeerarka Caalamiga ah.[121] Gobolka Geeska Afrika, tartanka quwadaha waaweyn iyo quwadaha soo koraya ayaa had iyo jeer khatar ku ah xasiloonida gobolka. Dhulkani waa mid muhiim ah sababtoo ah waxay isku xidhaa Badweynta Hindiya iyo Badda Medhitareeniyan ka iyada oo la sii marayo Gacanka Berbera iyo Badda Cas.

Dhaqdhaqaaqa quwadaha caalamka ayaa si xawli ah u socda, iyadoo ay soo baxayaan quwado cusub sida Shiinaha iyo ku fidinta danahooda dhaqaale ee Afrika, oo inta badan ay reer galbeedku ku naaneysaan diblumaasiyadda deynta. Intaa waxaa dheer, dawlada Federaalka Ruushka, oo la kulmay hoos u dhac ka dib burburkii Midowgii Soofiyeeti, ayaa dhawaan dib u cusbooneysiiyay dedaalada uu diiradda ku saarayo Afrika si uu u abuuro isbahaysi iyo iskaashi. Isbedeladani waxay awood u leeyihiin inay carqaladeeyaan dheelitirnaanta awoodda ee jirta, taasoo u baahan in wax laga beddelo istaraatiijiyadda iyo xulafada. Geeska Afrika waa mid ka mid ah masraxyada juquraafi-siyaasada caalamka ee markasta loolanka dheelitirka awoodu uu ka dhaco.

Isku-dheelitirnaanta awoodeed ee caalamiga ah waa arrin kakan oo si joogto ah u kobcaysa, oo ay qaabeeyeen arrimo kala duwan oo ka baxsan awoodda ciidan. Arrimahani waxay ka kooban yihiin awoodda dhaqaale, horumarka tignoolajiyada, iyo awoodda jilicsan. Awoodda dhaqaale kuma koobna oo keliya hantida iyo kheyraadka ummadi leedahay, laakiin sidoo kale awoodda ay u leedahay in ay dhaqaajiso ganacsiga caalamiga ah iyo saameynta suuqyada caalamka. Horumarka tignoolajiyada ayaa udub dhexaad u ah go'aaminta dheelitirka awooda, iyadoo siinaya faa'iidooyin istiraatijiyadeed wadamada leh tignoolajiyada casriga ah. Intaa waxaa dheer, fikradda awoodda jilicsan, oo lagu garto awoodda ay ummadi u leedahay in ay dadka kale ku duufsato iyada oo loo marayo diblomaasiyadda, dhaqanka, iyo fikradda, waxay si qotodheer u saameyneysaa dheelitirka awoodda adduunka. Dhaleeceeyayaashu waxay ku doodayaan in raadinta dheelitirka awoodda ay keeni karto xasillooni darro, tartanka hubka, iyo colaadaha, gaar ahaan marka ay dawladuhu mudnaanta siiyaan ammaankooda iyaga oo isha ka lalinaya danaha baaxada le n ee caalamiga ah.

Wadamada Geeska Afrika ayaa had iyo jeer qaata istiraatijiyad la kala safasho awoodaha ku hirdamaya caalamka si ay uga hortagaan khataraha la dareemayo ama ay uga helaan taageero dibadeed. Itoobiya taariikh ahaan waxa ay xidhiidh adag la lahayd reer galbeedka intii lagu jiray dagaalkii qaboobaa, laakiin waxa ay u wareegtay dhanka Shiinaha oo ay ka hesho taageero dhaqaale iyo mid kaabayaal ah sanadihii u dambeeyay. Intaa waxaa dheer, isbahaysi goboleed ayaa la sameeyay si loola dagaallamo argagixisada loona dejiyo aagagga colaadaha. Bishii koowaad ee sanadka 2024, Itoobiya waxay xubin ka noqotay BRICS.[122] Jabuuti oo markii hore la safnayd reer galbeedka ayaa hadda ah dalka kaliya ee martigeliyey ciidamada Shiinaha ee Afrika ku sugan. Loolanka juqraafi-siyaasada ee u dhexeeya quwadaha waaweyn iyo isbedelada awoodaha Geeska Afrika ayaa saameyn toos ah ku leh xasiloonida gobolka, horumarka dhaqaalaha, iyo xaaladaha bini'aadantinimo. Qalalaasaha ka jira hal waddan ayaa ku sii fidi kara dawladaha deriska ah, taas oo sii xumaynaysa colaadaha iyo carqaladaynta hawlaha nabadda iyo horumarinta.

daandaansi ah oo aan loo meel dayin.

[120] Dawladduhu waxay si istaraatiijiyadeed ula kala saftaan isbahaysiyada iyo siyaasadaha ku saleysan duruufaha juquraafi-Siyaasada ee isbedelka xawliga ah ku socda, iyaga oo qaadaya talaabooyinka ay ka midka yihiin sameynta iskaashi cusub ama higsashada hindiseyaal diblomaasiyadeed oo saameyn ku yeelan kara natiijooyinka caalamiga ah.

[121] Ururada iyo xeerarka caalamiga ah, sida Qaramada Midoobay iyo xeerarka caalamiga ah, waxay qaabeeyaan oo ilaaliyaan dheellitirka awoodda iyagoo sameynaya qaab-dhismeedyo lagu xalliyo khilaafaadka, iskaashiga, iyo amniga guud.

[122] BRICS oo u taagan shanta dal ee ururkan sameeyey (Baraasiil, Ruushka, Hinidiya, Shiinaha, iyo Koonfur Afrika) ayaa ah urur ay ku doonayaan in ay dhaqaalaha dunida ee Doolarka Maraykanku jaangooyo ay hoos u dhigaan oo ay sameeyaan lacag ay wax ku kala iibsadaan ama lacagahooda ay wax ku kala iibsadaan, taas oo ay u arkaan in awooda dhaqaale ee Maraykanka ay hoos u dhigaan.

Geeska Afrika waa gobol aad u qalafsan, halkaas oo is-dhexgalka awoodeed ee quwadaha caalamka iyo dawladaha shisheeye ay si weyn u saameeyaan istaraatiijiyadaha juqraafi-siyaasad, isbahaysi iyo isku dhacyo. Fahamka isbedeladan iyo dhaqdhaqaaqyadan ayaa muhiim u ah wax ka qabashada caqabadaha gobolka iyo ka midho-dhalinta nabad iyo horumar waara. Geeska Afrika taariikh ahaan waxa uu soo jiitay dano juqraafi-siyaasadeed oo muhiim ah taas oo ay ugu wacan tahay goobta istaraatiijiga ah ee uu ku yaal, khayraadka dabiiciga ah, iyo marinada ganacsi ee taariikhiga ah. Xaaladdan oo kale, fikradda "Dheeli-tiranka Awoodu" waxay la xidhiidhaa awood qaybsiga iyo saamaynta ka dhexeeya dawladaha iyo jilayaasha aan dowliga ahayn ee gobolka iyo sida dhaqdhaqaaqyadani u qaabeeyaan xulafada, iskahorimaadyada, iyo xasilloonida.

Somaliland markii uu ka socday Xasuuqa Beelaha Isaaq ama magacii ay dawladu xiligaa u taqaanay hawlgalkeeda "Dabargoynta Isaaqa", Imaaraadku waxa ay siiyeen diyaarado dagaal oo Hunter ah, kuwaas oo duqeynta qayb ka ahaa. Dhanka kale, Boqortooyada Sacuudigu waxa ay ka taageertay bixinta calooshood u shaqeystayaasha Koonfur Afrika iyo Simbaabwe ee duqeynta waday. Haybadii guusha ka dib, shacabka reer Somaliland waxay dib uga dhisteen dalkooda, iyagoo adeegsanayay waxii yaraa ee ay haysteen. Iyaga oo ay la ahaatay in ay nagu qasbi karaan waxa ay rabaan, dawladaha Carabtu waxay dhawr jeer mamnuuceen inay iibsadaan xoolahayaga laakiin naguma ay qasbin inaan u hoggaansanno shuruudahooda. Labaatankii sano ee u dambeeyey, dhaqdhaqaaqa awoodeed ee caalamiga ah iyo gobolka ayaa si weyn u saameeyay xidhiidhka dalalka Geeska Afrika. Geeska Afrika waa mid istaraatiijiyad ahaan aad muhiim u ah maadaama uu u dhow yahay marinnada ganacsiga iyo meelaha saliidda hodanka ku ah. Wadamada Sacuudiga iyo Imaaraatka Carabta ayaa ka leh dano dhaqaale iyo mid diimeed. Ku lug lahaanshaha daneeyayaasha caalamiga ah ee gobolka ayaa saameysa siyaasada gudaha ee dalalka gobolka waxayna kordhin kartaa xasaradaha iyo xiisadaha colaadeed ee bogcadan istaraatajiga ah.

Boqortooyooyinka khaliijka ayaa muujiyay xiisaha ay u qabaan Geeska Afrika, iyaga oo ka dhiganaya garoon ay ku hirdamaan si ay ugu fidiyaan xurguftooda aan xal loo helin iyaga oo u maraaya wakiiladooda gobolkan aadka u kakan. Danahooda gobolka ayaa ah kuwo dhinacyo badan leh, oo ay ku jiraan haqab-beelka cuntada, maalgashiga casriyeynta dekedaha, dhexdhexaadinta iyo xallinta khilaafaadka, gargaarka bini'aadantinimo, la dagaalanka argagixisada, iyo saldhigyada ciidamada. Dawladaha khaliijku waxay leeyihiin taariikh dheer oo ay ku lug lahaayeen dhaqdhaqaaqii xoraynta Ereteriya, colaadaha Soomaaliya iyo Itoobiya, iyo waliba maamulkii kali-taliska ahaa ee Soomaaliya ee ku dhaqaaqay Xasuuqii beelaha Isaaq. Dhowr wadan oo Carbeed ayaa ka qeyb galay dagaalkii xoreynta Eritrea ee ka dhanka ahaa Xabashida. Markii la helay shidaalka, wadamada Carabtu waxay bilaabeen inay saameyn ku yeeshaan nidaamyada siyaasadeed ee ummadaha kale ee Muslimka ah iyagoo adeegsanaya taageero horumarineed, gargaar bini'aadannimo, iyo kor u qaadida fikirka Wahabiga ah. Tani waxay door ka ciyaartay kor u kaca xagjirnimada iyo argagixisada, taasoo saamaysay Muslimiinta caalamka. Qiimaha istaraatiijiyadeed ee uu leeyahay awgeed, Geeska Afrika waxa uu u nugul yahay xoogagga dibadda. Gumeysiga reer Yurub ayaa qaabeeyay gobolka, iyaga oo abuuray wadamo ku tiirsan jilayaal shisheeye, taas oo xaddiday madax-bannaanida Itoobiya. Qodobada hoose waxay si kooban uga hadli doonaan tartanka jilayaasha shisheeye ee muhiimka ah ka jooga Geeska Afrika, gaar ahaan dalalka Khaliijka oo gobolka u qaatay shaybaadh ay ku tijaabiyaan awoodooda iyo saameyntooda siyaasadeed.

*Shiinaha*

Shiinaha ayaa soo saaraya kheyraadka dabiiciga ah dalalka gobolka Geeska Afrika sida Suudaan, Koonfurta Suudaan, Kiiniya, Tansaaniya, Soomaaliya, iyo Itoobiya si ay ugu xidhaan xurumaha Afrika iyo dhul weynaha Shiinaha – Ujeedada hindisaha ayaa ah in la sameeyo xidhiidh dhexmara xurumaha Afrika iyo dhul weynaha Shiinaha iyada oo loo marayo balaadhinta hindisaha dhabaha ganacsiga ee waddada xidhiidhinta Jidka Lusaka-Daar es Salaam iyo Jidadka Jamhuuriyada Dimuquraadiga ee Koongo-Jabuuti/Kiiniya iyo Itoobiya. Intaa waxaa dheer, Shiinuhu wuxuu kordhinayaa ka-qaybgalkiisa hawlgallada nabad ilaalinta iyo hawlaha bani'aadamnimada ee gobolka. Shiinuhu waxa kale oo uu saldhig ciidan ka samaystay gobolka Geeska Afrika, gaar ahaan Jabuuti si uu u ilaaliyo danihiisa marin biyoodkan muhiimka ah ee gobolkan xasaasiga ah.

*Boqortooyada Sucuudi Carabiya*

Tan iyo 1970-meeyadii, Boqortooyada Sucuudi Carabiya, Boqortooyada Kuweyd, iyo dalal kale waxay gacan weyn ka geysteen dhexgalka gobolka iyaga oo u maraya hay'adaha diimeed iyo dhaqan ee gobolka - iyagoo soo waariday fikirka Wahabiga ah ee xagjirnimada u horseeday argagixisada. Sannadihii 1980-aadkii, Sucuudigu waxa ay soo jiidatay maal-gashiga Beershiya iyada oo iibsatay ama kireysatay dhul beereed si loo xaqiijiyo haqab-beelkeeda cuntada. Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed labaduba waxay muhiimad istiraatijiyadeed u leeyihiin taageerada hubaysan ee ololaha militari ee isbaheysiga uu hoggaamiyo Sacuudiga ee Yemen. Saamaynta kooxaha uu Sucuudigu taageero ee faafiya tafsiirka fikirka Salafiga ayaa walaac weyn ku abuuray cilmi-baadhayaasha, diblomaasiyiinta, iyo dawladaha Geeska Afrika.

Sucuudi Carabiya ayaa soo bandhigtay dhiirigelin diblomaasiyadeed iyo mid dhaqaale oo la taaban karo si ay Suudaan uga dhaadhiciso inay xidhiidhka u jarto Iiraan. Sannadkii 2015-kii, Riyaad waxay siisay lacag dhan 1 bilyan oo doolar bangiga dhexe ee Suudaan, taasoo keentay in Suudaan ay dib u la xidhiidho beesha caalamka oo ay joojiso xidhiidhkii ay la lahayd Iiraan. Sucuudi Carabiya ayaa sidoo kale heshiis dhanka ammaanka ah la saxeexatay Jabuuti, waxayna isla qaateen heshiis ay saldhig militari ka sameysaneyso ka dib waxay xidhiidhka u jareen Iiraan.[123] Qalabkan dibloomaasiyadeed, dhaqaale iyo amni ayaa si weyn hoos ugu dhigay saamaynta Iiraan ee gobolka Geeska Afrika.

Boqortooyada Sucuudi Carabiya ayaa doonaysa in ay gobolka ka xakaymayso saamaynta Iiraan iyada oo kor u qaadaysa doorkeeda hogaamineed ee dalalka wadaaga xeebaha Bada Cas. Sannadkii 2016-kii, Sucuudigu waxa uu abuuray Isbahaysiga Ciidamada dalalka Islaamka ah ee La-dagaalanka Argagaxisada ee dhammaan dalalka Khaliijka iyo 41 dal ay xubno ka yihiin, kuwaas oo kala badh ka mid ah dalalka ka hooseeya Saxaraha Afrika. Sacuudigu waxa uu sidoo kale kaalin nabadeed ka qaatay Geeska Afrika. Sebtembar 16, 2018, madaxda Erateriya iyo Itoobiya waxay wadahadal nabadeed u fadhiisteen miiska qasriga Jidda. Heshiiskan ayaa loo yaqaan "Heshiiska Nabadda ee Jidda 2018," kaas oo soo afjaray colaaddii 20-ka sanno ahayd ee Itoobiya-Erateriya. Heshiisyada nabadeed ee Jidda ayaa ah tusaalihii ugu dambeeyay ee hindisayaasha sii kordhaya ee wadamada Khaliijka ee ka hooseeya Saxaraha Afrika.

[123] Bishii January 2016, Jabuuti waxay joojisay xidhiidhkii ay la lahayd Dahraan ka dib markii weerar lagu qaaday safaaradaha Sucuudiga ee Iiraan ay weerareen mudaharaadayaal ka cadheysan tacadiga Riyaad iyo dilka lagu fuliyay wadaadka shiicada ah ee Nimr al-Nimr. Xulafadii kale ee Sacuudiga, oo ay ku jirto Baxrayn, ayaa iyaguna joojiyay xidhiidhkii Iiraan, ka dib markii ay go'aamiyeen inay xidhiidhkii u dhaxeeyey Iiraan inay jaraan. Iiraan ayaa ku dhawaaqday Jimcihii, 22kii Sebtember 2023, in dib loo soo celiyo xidhiidhkii diblomaasiyadeed ee Jabuuti in ka badan todobo sano kaddib markii ay ku biirtay dalalka kale ee gobollada ee xidhiidhka u jaray Dahraan si ay u taageeraan Sucuudiga.

Madaxweyne Isaayas Afweerki waxa uu ka faa'idaystay xidhiidhka Riyadh iyo Abu Dhabi si looga khafiifiyo cunaqabataynta iyo in uu xoojiyo sumcadiisa caalamiga ah isaga oo aan ogolayn wax isbedelo siyaasadeed oo gudaha dalkiisa ah. Heshiiskii nabadda ee Jedda ee 2018 kii, oo ay kala saxeexdeen Itoobiya iyo Erateriya, waa guushii ugu dambeysay ee dhexdhexaadinta nabada Khaliijka.

*Qadar*

Qadar, ayaa dhankeeda u aragta fursado badan oo ay ku gaadhi karto saaxiibo cusub iyo maalgashi ay ku xoojinayso madax-banaanideeda iyada oo ku maaranaysa cadaawada Khaliijka ee xannibaadaha ku ahaa. Qadar ayaa dhowr safaaradood ka furatay dalalka Saxaraha ka hooseeya ee Afrika. Intii u dhaxaysay 2013 iyo 2015, Dooxa waxay ka samaysatay 11 safaaradood oo cusub, halka Imaaraadka Carabta, Boqortooyada Sucuudiga, iyo Kuwayd ay fureen sagaal, lix iyo laba safaaradood, siday u kala horreeyaan, intii u dhaxaysay 2010 ilaa 2018. Mudadii 2010 ilaa 2017, Qadar waxay ciidamo nabad ilaalin ah u dirtay xuduuda Erateriya-Jabuuti. Muran xuduudeed dhaliyay dagaal toos ah wallow uu koobnaa maalmaha uu socday. Sanadkii 2017 markii ay taageertay Erateriya go'doominta ka dhanka ah Qadar ayay dib ugu yeedhay ciidamadeeda xidhiidhka diblomaasiyadeed ee labada dalna uu hoos u dhacay. Qadar waxa ay inta badan ku tiirsanayd cuntada ay ka soo dhoofsan jirtay dhammaan dalalka Khaliijka. Xiisaddii Go'doominta dalkeeda ka dhanka ah ee 2017 ayaa u horseeday mas'uuliyiinta Qadar inay wax ka qabtaan arrimaha haqab-beelka cuntada. Bishii March 2018, Qadar waxay Suudaan la saxeexatay heshiis $ 4 bilyan ah oo lagu maamulayo dekedda Savakin ee badda cas. Tani waa tallaabo muhiim u ah gobolka, maadaama Qadar, Boqortooyada Sucuudiga, iyo Isutaga Imaaraadka Carabtu ay si weyn u maalgashadaan Suudaan. Hindisaha Qadar ee ku aaddan casriyeynta dekedda Savakin ayaa ah tallaabo muhiim u ah aragtideeda ku aaddan gargaarka iyo horumarinta Geeska Afrika, iyadoo xoojinaysa xidhiidhka gobolka. Sanadkii 2018ka, dowladda Qadar ayaa ku dhawaaqday qorshe ay ku maalgelinayso nus bilyan doollarka Mareykanka ah ee dhinacyada beeraha ee Suudaan taas oo ay uga golahayd Haqab-beelkeeda cuntada.

Soomaaliya, tartanada damaca siyaasadeed ee dalalka dhaqaalaha badan leh ee Khaliijka ayaa ay ka dhigay madal xasaasi ah oo lagu loolamo deeqo lacageed iyo taageero barnaamijyo bani aadamino lagu hanto madaxda Soomaaliya iyaga oo danahooda shaqsiga ah iyo nuglaantooda loogaga faaidaystay. Dooxa waxay aas aastay koox laga soo jeexay urur diimeedka Ictisaam oo ay u bixiyeen 'Damul Al Jadiid' oo macnaheedu yahay 'Dhiig cusub' oo doorashadii 2012 u caleemo saaray Xasan Sheekh Maxamuud iyo Maxamed Cabdilahi Farmaajo doorashada 2016. Qadar ayaa safaaradaha ugu badan ka furatay dalalka Saxaraha ka hooseeya marka loo eego dalalka kale marka laga reebo Turkiga. Dooxa waxay samaysay 11 safaaradood oo cusub intii u dhaxaysay 2013 iyo 2015, halka UAE, Saudi Arabia, iyo Kuwait ay fureen sagaal, lix iyo laba safaaradood intii u dhaxaysay 2010 iyo 2018, siday u kala horreeyaan.

Qadar waxay hadda xafiisyo diblomaasiyadeed ku leedahay 23 waddan oo Afrikaan ah. Samaynta safaaraduhu waxay horseedaysaa xidhiidh diblomaasiyadeed oo xasiloon, waxaanay ka caawisaa dawladaha Khaliijka inay si wanaagsan u ilaashadaan danahooda dhaqaale iyo amni iyo inay si hufan isugu xidhaan siyaasadda arrimaha dibadda. Qadar waxay isku dayday inay dhisto sumcad dhexdhexaadiye daacad ah oo lagu kalsoonaan karo iyadoo gacan ka geysata xallinta khilaafaadka kala duwan ee Bariga Dhexe iyo Afrika. Waxa ay door muuqda ka ciyaartay wada-xaajoodyadii u dhexeeyay Erateriya iyo Suudaan, Jaadh (Chad) iyo Suudaan, iyo Erateriya iyo Jabuuti. Saamaynta Dooxa ayaa sidoo kale u muuqatay inay dhexdhexaadiye ka noqon karto murankii soohdinta badda ee u dhexeeya Nayroobi iyo Muqdisho.

*Isu-taga Imaaraadka Carabta*

Imaaraatka iyo Sucuudiga oo ah xulafo muhiim ah oo gacanka Beershiya ayaa hadda Geeska Afrika u arka bogcad aad muhiim ugu ah istiraatijiyaddooda amni. Waxay ka wada shaqaynayaan sidii ay uga hortagi lahaayeen saamaynta sii kordheysa ee Turkiga, Iiraan, iyo Qadar ee gobolkan. Imaaraadku waxa uu damacsan yahay in uu u adeegsado joogitaankiisa siyaasadeed iyo mid ciidanba si uu uga hortago cadawgiisa – Dhaqdhaqaaqyada Islaamiyiinta ee ay taageerayaan Qadar iyo Turkigu, iyo sidoo kale Iiraan. Talaabooyinka Imaaraadku horumarka ka sameeyay ayaa waxa ka mid ah – Maalgelinta shirkada DP World ee Jabuuti, taas oo muran ka dhex qarxay dartiis la joojiyay; Mashaariicdan ayaa sidoo kale waxaa ka mid ah maalgelinta DP World ee Dekedda Berbera, Saldhigyada ciidan ee laga hirgeliyay Berbera, Somaliland iyo Casab, Ceritariya, sidoo kale heshiiska kiraynta Dekedda Boosaaso iyo tababarrada ciidamada gaarka ah ee la dagaalanka Argagixisada ee Muqdisho iyo Boosaaso ayaa ka mid ah dedaalada Imaaraadka ee ku aadan Gobolka Geeska Afrika. Kala qeybsanaanta diblomaasiyadeed ee 2015 ayaa keentay in ciidamada Khaliijka laga saaro saldhigga Jabuuti. Taasi waxay keentay in Imaaraadku uu dib ugu laabto dekedda Casab ee dalka Ceritariya sannadkii 2015-kii, wuxuuna ka samaystay saldhig ciidan oo uu ku beddelanayo horumarinta dekedda si ay Ceritariya u sii isticmaasho. Casab hadda waa xarunta saadka ee Imaaraatka ee hawlgallada Yemen, taas oo ay ku sugan yihiin helikobter, diyaarado, diyaarado bilaaduuliye ah (drones), iyo maraakiib.

Sannadkii 2017-kii, Imaaraadku wuxuu bilaabay inuu saldhig labaad ka dhisto dekedda Berbera ee Somaliland, kaasoo u dhow mashruuca DP World ee ay balaadhinta Dekeda ku maalgelisay 442 milyan ee Doollarka Maraykanka ah. Sannadkii 2017-kii, Boqortooyada Sucuudi Carabiya waxay saldhig ciidan ka samaysatay Djibouti, si ay u ilaaliso danaheeda istiraatijiyadeed ee Badda Cas iyo Geeska Afrika. Saldhigyo ciidan oo laga samaysto Jabuuti waxa ka soo xarooda dakhli sanadeed wax weyn ka taray miisaaniyada dalka ugu yar gobolka Geeska Afrika oo ah mid khayraadkiisu aad u yar yahay.

Itoobiya waxay u jeesatay dhanka Sucuudiga iyo Imaaraatka si ay u helaan dhaqaale ay aad ugu baahnaayeen iyada oo xidhiidh furan Qadar la leh. Bishii Oktoobar 2018, Imaaraadka iyo Yugaandha waxay kala saxeexdeen heshiis lagu abuurayo in dalka Yugaandha laga dhiso aag cashuurta ka caagan oo cabirkiisu yahay 2,500 hektar. Tani waxay u ogolaan doontaa shirkadaha Imaaraadku inay maalgashadaan dhismaha-warshadaha waxsoosaarka beeraha si ay u buuxiyaan baahida haqab-beelka cuntada ee dalkooda. Sidoo kale, Sideedaad ee 2019, UAE iyo Saudi Arabia waxay u qoondeeyeen $3 bilyan si ay u caawiyaan Suudaan, si Qadar ay uga saaraan Suudaan, sidoo kale khalkhal galiyaan maalgashiyadii Qadar ee beeraha si loo joojiyo higsigooda haqab-beelka cuntada. Bishii Noofambar 2020, shirkadda IHC Food Holding ee Imaaraatka, oo xarunteedu tahay Abu Dhabi, ayaa soo bandhigtay heshiis $225 milyan ah oo lagu horumarinayo laguna beerayo in ka badan 100,000 acres oo dhul beereed ah oo ku yaalla Suudaan.

*Turkiga*

Dhanka kale Turkiga iyo Qadar ayaa aad ugu janjeedha inay wajahaan kacdoono dadweyne si ay u awoodeeyaan kooxaha sida Ikhwaanul Muslimiinka oo ay aaminsan yihiin inay danahooda mustaqbalka fog ku horumarin karaan. Haddana, Ikhwaanka iyo faracyadeeda ayaa mararka qaarkood ka tallaabsaday kacdoonadii 2011-kii iyagoo ku soo rogay ajandayaashooda fikriga ahaa, taasoo abuurtey cabashooyin badan oo cusub. Turkiga ayaa ka faa'iidaystay Soomaaliya, isagoo noqday dalkii u horeeyey ee madaxweynahoodu booqdo dalkii Soomaaliya ee burburay xilliyadii ugu darnaa ee macaluusha, isagoo isu muujiyay inuu yahay walaalka awooda leh ee xilliyada ay dhibaatadu jirto. Laga soo bilaabo 2002 ilaa

2010 siyaasadda arrimaha dibadda ee Turkiga waxay ku salaysanayd ama udub-dhexaad u ahaa iskaashiga dhaqaale ee gobolka waxayna bartilmaameed ka dhigatay hal-ku-dheggii ahaa '*Dhibaato la'aan dalalka deriskayaga*'.[124] Adalet ve Kalkınma Partisi[125] (AKP - Xisbiga Cadaaladda iyo Horumarka) ayaa bilaabay inay dib u habeyn ku sameyaan siyaasaddooda arrimaha dibadda oo ka durugsan iskaashi dhaqaale kaliya laakiin ay ku ladhaan mabaadi'da fikriga ah. Sidoo kale isbeddelka ujeedooyinka, siyaasadda arrimaha dibadda ee Turkigu waxay noqotay mid ku sargoan hadba arrinta taagan, oo aan la saadaalin karin, isla markaana ku soo afgo'aysa hoggaamiyaheeda saamaynta badnaa ee Erdoğan. Tan iyo markii uu dhacay afgambigii masraxiyada ahaa ee bishii Todobaad (July) 2016, waxaa sare u kacay kusoo ururinta awoodda dowladda Turkiga gacanta xisbiga AKP iyo Madaxweyne Erdogan.[126]

Laga soo bilaabo 2011 ilaa 2015, siyaasadda arrimaha dibadda ee Turkiga waxay u wareegtay inay diiradda saarto Bariga Dhexe, iyada oo xoogga saaraysa urur diimeedada Sunniga ah ee ku taxan Ikhwaanul Muslimiin. Intii ka dambeysay kacdoonkii Ikhwaanul Muslimiinka ee Masar kasoo qayb ka ahaa Gugii Carabta iyo go'doominta Qadar ee 2017kii ayaa saameyn weyn ku yeelatay. Taageerada cad ee Qadar ay siiso Ikhwaanul Muslimiinka ayaa sahashay xidhiidh dhow oo labada dhinac dhex maray tobankii sano ee la soo dhaafay, waxaana tusaale u ah saldhiga ciidamada Turkigu uu ka sameystay Qadar.

Sannadkii 2010-kii, Turkigu waxa uu Soomaaliya ka bilaabay ka qayb-galka hawlaha xasilinta iyo hawlgalada ciidamada isaga fulinaya heshiis tababaro, kaas oo gogol xaadh u ahaa dadaallada bini'aadantinimo iyo diblomaasiyadeed ee uu gobolkan ka wado. Isbalaadhinta uu Turkigu uu mudooyinkii dambe ka sameeyay gobolka Badda Cas ayaa keentay in la isweydiiyo istiraatijiyadiisa gobolka ee waqtiga fog. Sannadkii 2016-kii, Turkiga ayaa Jabuuti la saxeexday heshiis lagu dhisayo aagga ganacsiga xorta ah,[127] iyadoo sannadkii 2017-kii uu Muqdisho ka furay saldhigiisa ciidan ee ugu weyn ee uu ku leeyahay dhul shisheeye.[128] Xeradan saldhiga ee la yidhaa TURKSOM[129] ayaa laga dhisay magaalada Muqdisho bishii September ee sanadkii 2017-kii, waxaana xeradan lagu tababari doonaa cutubyo ka tirsan ciidamada dawlada Soomaaliya. Balaadhinta xidhiidhka ciidamada oo lagu daro xoojinta amniga badaha waxa ay taageeraysaa hamiga Ankara ee ah in ay isu muujiso in ay tahay saaxiibka koowaad ee Soomaaliya iyo xubin muhiim ah oo ka tirsan jilayaasha gobolka, taas oo u ogolaanaysa Turkiga in uu helo dhul xeebeed balaadhan oo ku yaala Geeska iyo marinada muhiimka ah ee badda ee isku xidha Badweynta Hindiya. Heshiiskii ay dhawaan la gashay dowladda Soomaaliya ayaa u ogolaanaya Ankara in ay saldhig ciidankeeda bada uga samayso meel istiraatiiji ah oo muhiim ah, taasoo sare u qaadaysa

---

[124] Van and Yüksel, 2018. Pp.8-9.

[125] Xisbiga AK waxaa la aasaasay sanadkii 2001-dii kooxo kala duwan oo ka kooban siyaasiyiin ka soo kala jeeda xisbiyo kala duwan, oo ay ka mid yihiin garabka isbeddelka ee xisbiga "Xisbiga Nidaamka Islaamka " iyo xubno ka tirsan xisbiga Xisbiga Mayalka Adag ee Bulshada Dhulka Hooyo. Xisbigu wuxuu kusoo baxay kaalinta koowaad ee ku guulaystay doorashooyinkii 2002, 2007, 2011, Juun 2015, Nofeembar 2015, 2018, iyo 2023. Waxay si weyn ugu guuleysteen muddo 13 sanno ah, hase yeeshee waxaa laga guuleystay June 2015, waxaa dib loogu soo celiyay doorashadii degdegga ahayd ee November 2015- kii, dabadeedna mar kale ayaa lagaga guuleystay 2018. Xisbigu wuxuu ku guuleystay doorashooyinkii dowladaha hoose sanadihii 2004, 2009 iyo 2014, balse magaalooyin waaweyn sida Istaanbuul iyo Ankara 2019kii, waxaa loo aaneeyey xasarad dhaqaale oo Turkiga ka taagan, eedeymo kali talisnimo, iyo cabashada in dawladdu ay waxba ka qaban la'dahay dhibaatada qaxootiga reer Suuriya.

[126] Jongerden, 2018,. p. 5.

[127] http://smc.sd/en/erdogans-3-day-visit-to-southeast-africa-to-strengthen-ties/

[128] https://www.reuters.com/article/us-somalia-turkey-military/turkey-opens-military-base-in-mogadishu-to-train-somali-soldiers-idUSKCN1C50JH

[129] Laga soo bilaabo go'doomintii Qadar ee bishii Juun 2017, Turkigu wuxuu qaatay doorar muhiim ah oo dhinacyada juquraafi-siyaasada iyo amniga ah isaga oo si dhow ula safanaya Qadar oo uu haddana dhexgalay murannada ay qaybta ka yihiin awoodaha gobolka ee saameynta leh sida Sacuudiga, Imaaraatka Carabta (UAE), iyo Masar, kuwaas oo dhamaantood qayb ka ah jilayaasha joogitaan ku leh gobolka Geeska Afrika.

joogitaankeeda gobolka Geeska oo ka baxsan taageradii iyo iskaashigii dawladaha badan.[130] Dhaqdhaqaaqyada ciidan ee Turkiga ka wado Soomaaliya ayaa ku xidhan xiisadaha ka taagan gobolka Badda Cas.[131]

Intaa waxaa dheer, ka dib markii uu Maraykanku ka qaaday cunaqabataynta Suudaan, Turkigu wuxuu muujiyay xiisaha uu u qabo inuu maal-gashi ku sameeyo waddanka wuxuuna la saxeexday heshiisyo dhan 650 milyan oo doolar intii uu ku jiray booqashadii Madaxweyne Recep Tayyip Erdoğan.[132] Maalgashiga Turkiga ee Suudaan waxa uu ka kooban yahay mashaariic kala duwan, oo ay ka mid yihiin garoon diyaaradeed cusub ee Kharduum, aagga ganacsiga xorta ah ee magaalo xeebeeda Marsada Suudaan (Port Sudan), sidoo kale maalgelinta ganacsiyada yaryar ee gaarka loo leeyahay sida xarumaha korontada, wax soo saarka suufka, Qamadiga, iyo warshadaha diyaarinta hilibka. Madaxweyne Erdogaan ayaa ballan qaaday inuu ganacsiga Turkiga iyo Suudaan gaadhsiin doono ku dhawaad 10 bilyan oo dollar, wuxuuna la galay heshiis inuu dib u dhis ku sameeyo jasiiradda Suakin, oo ah deked taariikhi ah oo ka mid ahayd Boqortooyadii Cusmaaniyiinta oo ku taal badda cas.[133] Qorshuhu waa in la horumariyo awoodda dalxiiska ee Suakin iyadoo la fududeynayo safarka xujeyda muslimiinta ah ee doonyaha ku tagaya Jeddah iyaga oo ku sii jeeda Maka iyada la balaadhin doono dekedan si ay ugu soo xidhaan maraakiibta rayidka iyo kuwa ciidamaduba.[134]

Joogitaanka Turkiga ee Badda Cas ayaa xumeeyay xidhiidhka ay la lahaayeen Masar, kadib markii ay isku khilaafeen ururka Ikhwaanul Muslimiin. Bishii Nofembar 2017, mas'uuliyiinta Masar waxay xidheen 29 qof oo looga shakiyey inay u basaasayeen Turkiga.[135] Masar ayaa walaac ka muujisay xidhiidhka Ankara iyo Kharduum, gaar ahaan suurtagalnimada iskaashi ciidan.[136] Marka la eego sida ay diiradda u saarayaan dagaalka Yemen, Riyadh iyo Abu Dhabi waxay u arkaan joogitaanka Turkiga ee Badda Cas mid halis ah. Sacuudiga iyo Imaaraadka ayaa kordhiyay joogitaanka ciidankooda ee dekedaha muhiimka ah ee Badda Cas.[137] Marka la eego iskaashiga istaraatiijiyadeed ee Maraykanku ay la leedahay Qadar iyo Turkiga, ciidamaynta ku soo badanaysa Badda Cas waa isbeddel aan saaloonayn iyo duruufaha cakiran ee ku wajahan siyaasadda guud ee Mareykanka ee ku aadan Bariga Dhexe.[138]

---

130 https://www.dw.com/en/somalia-turkey-security-deal-how-does-it-impact-ethiopia/a-68375405

131 Yousef, T. et al. (June 2018). 'What Brookings experts are saying about the one-year anniversary of the Gulf crisis.' Brookings, Op-Ed. https://www.brookings. edu/opinions/what-brookings-experts-are-sayingabout-the-one-year-anniversary-of-the-gulf-crisis/ 4 International Crisis Group (5 June 2018). 'Somalia and the Gulf Crisis.' https://d2071andvip0wj.cloudfront. net/260-somalia-and-the-gulf-crisis_0.pdf.

132 http://aa.com.tr/en/africa/erdogan-calls-for-more-turkish-investment-in-sudan/1014914

133 https://sputniknews.com/africa/201712261060333479-erdogan-red-sea-port-sudan-restoration-ottoman-empire/

134 https://www.reuters.com/article/us-turkey-sudan-port/turkey-to-restore-sudanese-red-sea-port-and-build-naval-dock-idUSKBN1EK0ZC

135 https://www.bloomberg.com/news/articles/2017-11-22/egypt-arrests-29-people-on-suspicion-of-spying-for-turkey

136 Muranka taagan ee ku saabsanaa saddexagalka xalayiib ee ku yaalla xadka Masar iyo Suudaan ayaa ah mid leh taariikh fog. Dhawaan ayay ahayd markii Suudaan ay arrintan ka soo jeedisay Qaramada Midoobay, iyadoo ugu baaqday Masar inay dib u laabato. Xiisadaha ayaa waxaa ka mid ah eedeymo ah in Suudaan ay gabbaad u tahay xubno ka tirsan Ikhwaanul Muslimiin oo dibad wareeg kaah dhulkooda iyo Masar oo taageersanayd mucaaradka Daarfuur. Qaahira ayaa sidoo kale ka walaacsan maalgashiga qadar ee kusoo badanaya suudaan. Turkiga ayaa ku dhexjira shabakada loolanka geeska Afrika ay ugu jiraan awooda oo ah mid aad u khatar badan. Dib-u-soo-kicidda murannada biyaha ee ay sabab u tahay biyo-xidheenka weyn ee Itoobiya (GERD) ee ku yaalla Webiga Nayle ama Niilka buluugga ah, ayaa ka dhigaya arrin ay isku dhan ka istaagaan Masar iyo Suudaan.

137 Aragtida ku aadan in Turkiga uu ku lug yeesho siyaasadda Carabta ee gobolka Badda Cas dhexdiisa ayaa si adag ugu xidhan aragtida Israii'il. Isra'il oo xdhriidh adag la yeelatay Mohammed bin Salman iyo Sisi ga Masar ayaa saameyn weyn ku leh isbedbedelka awoodeed ee Geeska Afrika. Heshiisyada ciidani ee Turkiga uu kula galey Soomaaliya iyo Suudaan ee ku kala yaalla Badweynta Hindiya iyo Badda Cas ayaa loo arkaa in ay halis ku yihiin Masar iyo Isra'iil, maadaama maraakiibta iyo diyaaradaha Ay Israel isticmaalaan marka ay ay isaga gooshayaan Aasiya iyo Afrika.

138 Haddii dagaalka Yemen uu kusii socdo xasilloonida uu ku hayo gobolka, lagama yaabo in jilayaasha gobolku ay awood u

*Cumaan*

Cumaan ayaa ka mid dalalka danaynaya ee soo eegaya dhanka Afrika. Gaar ahaan, Saldanada Cumaan waxay saxiixday heshiis is afgarad ah oo dhex maray sanduuqa kaydka guud ee dawladda Cumaan iyo maamulka dekedaha iyo aaga cashuurta ka caagan ee Djibouti si loo sameeyo iskaashi istiraatijiyadeed oo u dhexeeya labada hay'adood. Guddoomiyaha Fulinta ee Sanduuqa Kaydka Guud ee Dawladda Cumaan Abdul Salam bin Mohammed al-Morshedi ayaa sheegay in "heshiisku uu u ogolaanayo labada dhinac inay iska kaashadaan horumarinta dekedaha oo ay maalgashadaan; ka hawlgalaan oo maamulaan dekedaha, iyo sidoo kale tas-hiilaadka saadka ee kale".[139]

*Iiraan*

Jamhuuriyada Islaamka ee Iiraan ayaa dano xooggan ka leh gobolka Geeska Afrika sababo siyaasadeed, dhaqaale iyo istiraatijiyadeed. Siyaasad ahaan, Iiraan waxay doonaysaa inay faafiso ajendaha soo noolaynta Islaamka, taasoo ay u marto dhismaha masaajidda, mashaariicda kaabayaasha dhaqaalaha ee gobolka, iyo ilaalinta ganacsiga Iiraan ee aagga Bab-Al Mandab. Dhinaca dhaqaalaha Iiraan waxa ay diiradda saartaa ganacsiga, waxa ayna Soomaaliya u aragtaa waddo kale oo ay uga faaidaysan karto shixanadaha badeecadaha ee badaha ka goosha. Istiraatiijiyad ahaan, Iiraan waxay hiigsaneysaa inay ka faa'ideysato kheyraadka badda Soomaaliya, waxayna heshay qandaraasyo soo saarista gaaska badda gunteeda. Iiraan waxay xidhiidh istiraatijiyadeed la samaysatay Geeska Afrika. Dalka Jabuuti oo kale, Iiraaniyiintu ayaa u dhisay xaruntooda baarlamaanka, in kasta oo mar dambe oo khilaafka Sucuudiga iyo Iiraan dhexdooda ah uu sababay in Jabuuti ka mid noqoto dalalkii xidhiidhka u jaray, waxaa cajiib ahayd sida wasiirkii arrimaha dibada Iiraan oo la waydiiyey uu sheegay in aanu aqoonba meel ay ku taalo, taas oo ka dhigan yareysiga dalkaas yar ee Jabuuti. Iran waxa ay dalka Suudaan la samaysatay iskaashi ciidanka iyo xog is waydaarsi dhanka sirdoonka, iyada oo u adeegsanaysa inay ka dhigto goob hubka looga sii gudbiyo saaxiibada Iran ee bariga dhexe badhtamihii 2015.

Iiraan waxa ay doonaysaa in ay kula tartanto Sucuudiga iyada oo maalgashi gaar ah ku samaynaysa beeraha warshadaha ee Itoobiya iyo wadamada kale ee bariga Afrika. Isbaheysiga uu hoggaamiyo Sucuudigu ayaa ujeedadiisu tahay in la ilaaliyo dowladda Yaman ee caalamku aqoonsan yahay iyo in la xakameeyo saameynta Iiraan ee gobolka. Xuutiyiinta ay Iiraan taageerto ayaa u ogolaaday Dahraan in ay xoog ku yeelato badda cas, iyaga oo ku riixaya xulafada Carbeed ee Sucuudigu hogaamiyo in ay difaacaan danahooda iyo ta xulafadooda. Intaa waxaa dheer, waxay xidhiidh la sameynayaan bulshooyinka Shiicada Lubnaan ee Afrika ku dhaqan oo dhan, iyadoo walaac laga qabo in ganacsiga dheemanka ee bulshooyinkani ay noqon karaan kuwo kordhiaya cududa iyo awooda Xisbullah iyo fallaagada Xuutiyiinta.

---

yeelan doonaan inay ka fogaadaan xasilooni darrada ka dhalan karta. Sidaa darteed, tallaabada ugu horeysa ee muhimka ah ayaa ah in Maraykanku ay samayso istiraatiijiyad joogto ah oo wax looga qabanayo colaadaha joogtada ah ee baaba'a ku haya dadka iyo dalka Yamaniyiinta, kaasoo hadda aan laheyn wax calaamado ah oo saadaalinaya in la soo afjaro.

[139] Uman tadkhul..., 2019

## 5. WAA LAMA DHAAFAAN IN GOBOLKA GEESKA AFRIKA SAMEEYO HORUMAR KU DHISAN ISKAASHI DHAQAALE, SIYAASADEED, NABADGALYO, IYO DIFAAC.


Waxa aynu ka soo hadalnay arrimo door ah oo isugu jira taariikh kooban oo guud mar ah oo ku aadan ururada ay xubno ka yihiin dalalka gobolkan aan xudunta iyo hooska midna aan lahayn eek u habsaamay jeedaalinta ururo kale iyo jibada jiibta iyo jaanta ururo kale tumanayaan. Waa gobol dihin iskuna filnaan kara hadii dadkiisu fahmaan bogcada istaraatajiga ah ee ay ku yaalaan iyo khayraadka weynaheen ku manaystay. Waa gobol balaadhan oo leh bad, beri, buuro, banan, dhul daaqsimeed, dhul beereed, dhul hoose oo kulul, dhul joogiisu sareeyo oo qabow, xoolo, macdano kala duwan, Gaas iyo saliid wali dihin oo aan la munaafacaadsan.

Waxa aynu si faahfaahsan ugu soo xusnay qormadan arrimaha muhiimka u ah baahida urur goboleedkan inaga oo dhinacyo badan ka eegnay sida Juquraafiga, Juquraafiga siyaasada, Juquraafi-siyaasad, Juquraafi-Istraatajiyad, Juquraafi-dhaqaale iyo sida ay u saameeyaan iskaashiga iyo khilaafka, colaada iyo nabada, dagaalka iyo heshiiska.




Sawirka 3aad: Khariidada dalalka xubnaha ka noqon doona Urur Goboleedka Bulshada Geeska a Afrika (Soo jeedinta Qoraaga).

Aasaasidda Urur Goboleedka Geeska Afrika waxay balanqaad u tahay dhiirigelinta isbeddel wanaagsan oo ka dhaca gobolka iyo deegaanada la deriska ah. Iyada oo la xoojinayo iskaashiga dhaqaale iyo midnimada dalalka geeska Afrika, waxa uu ururkani awood u yeelanayaa inuu wax-ka-qabto arrimo kala duwan oo aad u lagama maarmaan ugu ah horumar waara oo ka hanaqaada gobolkan, oo ay ka mid yihiin kobcinta ganacsiga, horumarinta kaabeyaasha gobollada, wax ka qabashada arrimaha amniga, iyo xasilooni u helida xiisadaha dadyowga ku dhaqan gobalkan Geeska Afrika.




Sawirka 4aad: Jaantuska waxqabadaka heer dal kaliya, dalal wadar ah, iyo doorka Urur Goboleedka Geeska Afrika.

In la abuuro Ururkan waxa uu saameyn weyn ku yeelan karta gobolka iyo qaarada Afrika Guud ahaan. Iyada oo la xoojinayo is-dhexgalka dhaqaale iyo iskaashiga ka dhexeeya dalalka geeska Afrika, waxa ururku wax ka qaban karaa arrimo dhowr ah oo muhiim ah:

- ✓ *Kobaca Dhaqaalaha*: Ganacsiga sare loo qaaday iyo iskaashiga dhaqaale waxay dhiirigelin karaan horumarka, shaqo abuurka, iyo wanaajinta heerka nolosha ee dalalka xubnaha ka ah. Wuxuu horseedi karaa kaabayaasha dhaqaalaha oo wanaagsan, fursado maalgelin oo badan, iyo guud ahaan xasilloonida dhaqaalaha.
- ✓ *Xasiloonida Gobolka*: Xidhiidhka dhaqaale wuxuu gacan ka geysan karaa in la yareeyo khilaafka iyadoo la abuurayo isku tiirsanaan. Dalalku marka ay dhaqaale ahaan isu dhexgalaan, waxay heystaan wax badan oo ay ka helaan ilaalinta nabadda iyo xasilloonida, taas oo colaada ama khilaafka ay ku waayi karaan.
- ✓ *Amniga Badda Cas*: Goobta istiraatiijiga ah ee Geeska Afrika ee ku teedsan Badda Cas ayaa muhiim u ah ganacsiga caalamiga ah ee badaha. Xasiloonida gobolkan ayaa sare u qaadi karta amniga, waddooyinkan muhiimka ah ee badda, kuwaas oo udub dhexaad u ah ganacsiga caalamka.
- ✓ *Xidhiidhka Caalamiga ah*: Geeska Afrika oo xasilloon oo dhaqaale ahaan isu-dhexgalay waxa uu xoojin karaa xidhiidhka dibloomaasiyadeed iyo ka ganacsi ee dalalka geeska afrika dhexdooda iyo ka ay la leeyihiin dalalka kale ee dunida iyo ururada caalamiga ah, taas oo suuragalinaysa xidhiidho muhiim ah oo u horseedi kara taageero iyo maalgashi labadaba.

- ✓ *Horumarka Bulshada*: Horumarka dhaqaaluhu waxa uu horseedi karaa daryeel caafimaad, waxbarasho iyo adeeg bulsho, taas oo kor u qaadaya tayadda nolosha dadka gobolka ku dhaqan.

Guusha laga gaadho aasaasida urur goboleedkan waxay ku xidhan tahay dawladmimo hufan, wadashaqeyn dhex marta dawladaha xubnaha ka ah gobolkan, iyo wax ka qabashada wixii khilaaf ama arrimo hoose. Hadii caqabadahaas si fiican loo maareeyo, waxa dhab ahaantii faa'iidooyinku noqon karaan mid gebi ahaanba u beddesha Geeska Afrika gobol horumaray oo kaalintiisa lagama maarmaanka ah ka ciyaaray xasiloonida iyo iskaashiga bulshada caalamka.

## 6. XIGASHO


Abdirahman Gaas (2019) Challenges and Breakthrough for Horn of Africa Regional Integration. Journal of Political Science and International Relations. Vol. 2, No. 1, 2019, pp. 11-17. doi: 10.11648/j.jpsir.20190201.12

Abdirahman Hussein and Orhan Coskun (1 October 2017) Turkey opens military base in Mogadishu to train Somali soldiers. Retrieved 2 April 2024. https://www.reuters.com/article/us-somalia-turkey-military/turkey-opens-military-base-in-mogadishu-to-train-somali-soldiers-idUSKCN1C50JH

Adan Najah (2021) Somaliland's Foreign Policy Strategy: Exploring Plausible options to statehood status. Intergovernmental Research and Policy Journal. https://irpj.euclid.int/articles/somalilands-foreign-policy-strategy-exploring-plausible-options-to-statehood-status/ revived on 13 December 2023.

Ali Kucukgocmen and Khalid Abdelaziz (26 December 2017) Turkey to restore Sudanese Red Sea port and build naval dock. Retrieved 21 April 2024. https://www.reuters.com/article/us-turkey-sudan-port/turkey-to-restore-sudanese-red-sea-port-and-build-naval-dock-idUSKBN1EK0ZC

Bahattin Gönültaş (26 December 2017) Erdogan calls for more Turkish investment in Sudan. Retrieved 21 April 2024. http://aa.com.tr/en/africa/erdogan-calls-for-more-turkish-investment-in-sudan/1014914

BARU, S. (2013). India and the World: A Geoeconomics Perspective. Economic and Political Weekly, 48(6), 37–41. http://www.jstor.org/stable/23391393

Bil'chak, M.V., On the assessment of cross-border regions' development potential, Balt. Reg., 2011, no. 2, pp. 139–145.

Blackwill, R.D., Harris, J. (2016). War by Other means: Geoeconomics and Statecraft Harvard, Belknep Press.

Flint, C. (2016). Introduction to Geopolitics (3rd ed.). Routledge. https://doi.org/10.4324/9781315640044

Flint, C. (2021). Introduction to Geopolitics (4th ed.). Routledge. https://doi.org/10.4324/9781003138549

Gookins, A.J. (2008). The Role of Intelligence in Policy Making. SAIS Review of International Affairs, 28, 65 - 73.

GREVI, Giovanni (2011). "Geo-Economics and Global Governance", in: MARTININGUI, Ana; YOUNGS, Richard (eds.), Challenges for European Foreign Policy in 2012: What Kind of Geo-Economic Europe? Madri: Fride.

JAEGER, B. C., & BRITES, P. V. P.. (2020). Geoeconomics in the light of International Political Economy: a theoretical discussion. Brazilian Journal of Political Economy, 40(1), 22–36. https://doi.org/10.1590/0101-31572020-2982

Jongerden, J. (2018). 'Conquering the state and subordinating society under AKP rule: a Kurdish perspective on the development of a new autocracy in Turkey.' Journal of Balkan and Near Eastern Studies. p. 5. 9 Cop, B. and Zihnioğlu, Ö. (2015). Turkish Foreign Policy under AKP Rule: Making Sense of the Turbulence. Political Studies Review 2017, Vol. 15(1) 28–38.

Kolosov, V.A.(2011) Critical geopolitics: main concepts and the experience of its use in Russia, Polit. Nauka, 2011, no. 4, pp. 31–52.

Kolosov V., Popov F., Zotova M., Gritsenko A., Sebentsov A., Vendina O. (2018) Post-Cold War Borders: Reframing Political Space in Eastern Europe. London: Routledge; 2018. [Google Scholar]

Luttwak, E.N. (1990). From Geopolitics to Geo-economics: Logic of Conflict, Grammar of Commerce.

MICHAEL HORTON (2021) How Somaliland is playing its geostrategic cards better than most. Responsible Statecraft. https://responsiblestatecraft.org/2021/12/01/how-somaliland-is-playing-its-geo-strategic-cards-better-than-most/ revived on 14 December, 2023.

Ministry of Planning and National Development (2023) Somaliland In Figures 2023. https://mopnd.govsomaliland.org/article/sl-cpi-2023 revived on 21 March, 2024.

Mimi Mefo Takambou (26 February 2024) Somalia-Turkey security deal: How does it impact Ethiopia?. Retrieved 5 April 2024. https://www.dw.com/en/somalia-turkey-security-deal-how-does-it-impact-ethiopia/a-68375405

Richard Hartshorne (1959) Perspective on the Nature of Geography. Association of American Geographers.

Saul B. Cohen (2011) Geostrategic and Geopolitical Regions. Minghi, J. (Ed.). (2011). The Structure of Political Geography (1st ed.). Routledge. https://doi.org/10.4324/9781315135267

Somaliland Chronicle (2023) Somaliland solves the geostrategic problems of Ethiopia and the United States. https://somalilandchronicle.com/2023/10/31/somaliland-solves-the-geostrategic-problems-of-ethiopia-and-the-united-states/ revived on 13 December 2023.

Sputnik International (26 December 2017) Turkey Temporarily Granted Ancient Ottoman Red Sea Port in Sudan for Rebuilding. Retrieved 21 April 2024. https://sputniknews.com/africa/201712261060333479-erdogan-red-sea-port-sudan-restoration-ottoman-empire/

Steve Pickering (2017) Geography and Foreign Policy. https://doi.org/10.1093/acrefore/9780190228637.013.431 revived on 12 March 2024.

Tarek El-Tablawy (22 November 2017)Egypt Arrests 29 People on Suspicion of Spying for Turkey. Retrieved 21 April 2024. https://www.bloomberg.com/news/articles/2017-11-22/egypt-arrests-29-people-on-suspicion-of-spying-for-turkey

The Merriam-Webster dictionary definition of political geography https://www.merriam-webster.com/dictionary/political%20geography#:~:text=noun,situations%20of%20cities%20compare%20geopolitics revived on February 20, 2024.

Van Veen, E. and Yüksel, E. (2018). Too big for its boots: Turkish foreign policy towards the Middle East from 2002 to 2018, The Hague: Clingendael Institute. p.8-9.

World Population Review (Djibouti Population) Retrieved 19 April 2024. https://worldpopulationreview.com/countries/djibouti-population

World Population Review (Eritrea Population) Retrieved 19 April 2024. https://worldpopulationreview.com/countries/eritrea-population

World Population Review (Ethiopia Population) Retrieved 19 April 2024. https://worldpopulationreview.com/countries/ethiopia-population

World Population Review (Sudan Population) Retrieved 19 April 2024. https://worldpopulationreview.com/countries/sudan-population

Yousef, T. et al. (June 2018). 'What Brookings experts are saying about the one-year anniversary of the Gulf crisis.' Brookings, Op-Ed. https://www.brookings. edu/opinions/what-brookings-experts-are-sayingabout-the-one-year-anniversary-of-the-gulf-crisis/ 4 International Crisis Group (5 June 2018). 'Somalia and the Gulf Crisis.' https://d2071andvip0wj.cloudfront. net/260-somalia-and-the-gulf-crisis_0.pdf.

MAAN

Institute for Diplomacy and Global Affairs


Waddada Muj. Abdilahai Askar, Koonfur-
Galbeed Maansoor Hotel,
Ibrahim Koodbuur, Hargeisa,
Somalilandl

+252 634-888-444

Kayd@maan-institute.com

www.maan-institute.com